# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Hadal-qoraalka iyo Fadhiyada

**Golihii 5aad Kal-fadhigii 1aad Fadhigii 10aad**

**Sabti 24 August2021**

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib.

**Gudoonka: -** Guddoomiye Abdirisaaq Khaliif Axmed

**Ajandaha Fadhiga: -**

- Doodda Xeerka Shaqaalaha Dawladda

**Md. Axmed Jaamac Saalax** *(5min 37sec):-* Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Gudoomiyaha iyo Labadiisa Ku-xigeen iyo dhammaan Xildhibaanada marka hore waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka ASC.

Anigu ugu horeyn waxaan rabaa inaan ka hadlo **Qodobka 41aad** ee Xeerka oo ka hadlaya Xaqal ciidka wuxuu sheegayaa *"Xiliyadda dabaal-degga munaasabaddaha bisha Ramadaan iyo Arafa, xubin kasta oo kamid ah shaqaalaha dawladda waxaa la siinayaa xaqal ciid, qaddarkisa ay go'aamiso Hay'adda shaqaalaha dawladda iyada oo talo-wadaag la samaynaysa Madaxwaynaha"* haddaba su'aasha iswaydiinta leh waxay tahay madaama hay'adda shaqaaluhu go'aamiso qadarka xaqal ciidka ee shaqaalaha dawladu qaadanayaan waa maxay minqyaaska ay ku go'aan qaadanayaan, halkan kuma xusna. Waxa kale oo iswaydiin leh iyaduna waxa loo qaybinayaa ama percentage-ka mushaharka qofkasta oo shaqaale ah laga siinayo xaqal ciidka, tusaale ahaan, hadii mushaharkiisu hal milyan oo sl sh yahay ma 10% baa xaqal ciid loo siinayaa, ma 30% baa, mise waa 50%, ma cadda taasina, sidoo kale waa maxay criteria-da ay ku bixinayaan ama shaqaalaha dawlada xaqal ciidka ku siinayaan, ma grades baa sida Grade A, Grade B, Grade C, iyo Grade D, mise xaqal ciid isku mid ah bay helayaan.

Waxa kale oo iyana muhiima ah in Xeerkan Shaqaalaha lagu xuso xuquuqda xaqal ciidka shaqaaluhu intay le'eg tahay, waxa Xeerka ku qoran in Hay'adda Shaqaaluhu tala-wadaag kala yeelanayso Madaxweynaha inta loo siinayo shaqaalaha xaqal ciid, tusaale ahaan haddii Madaxweynaha iyo Hay'addu isla qaataan in qofkasta oo shaqaale ah la siiyo $100 oo xaqal ciid ah, sidee loogu ogaan karaa si public ah oo daahfuran in Madaxweynaha iyo hay'addu lacagtaas isla qaateen, si aanay u noqon wax iyagun ku kooban oo Madaxweynaha, Hay'adda iyo Wasaarada Maaliyada kaliya ay ogtahay.

Ugu dambeyn waxaan soo jeedin lahaa, isla markaana golewaynaha ka codsan lahaa in lagu daro xeerka oo laga dhigo bil Mushaharkeed xaqal ciid kasta oo la siinayo labada ciiddood ee Ciida Ramadaan iyo Ciida Carafo, madaama shaqaalaha dawladu dad

danyar ah u badan yihiin, waana waajib in dawladu ka farxiso shaqaalaha iyo caruurtooda labadaas munaasibadood ee ciidu soo galayso.

**Qodobka 70aad** ee Fasaxa Qoyska, Qodobkan oo fasax ka dhigaya hadii qofka ay geeri ku timaado ama hadii uu aroosanayo ama hadii xaaskiisu umusho in muddo saddex (3) cisho oo fasaxa la siiyo, kuma filna qofka saddex cisho oo fasax ahi hadii uu guursado tusaale ahaan, marka waxaan soo jeedinayaa in fasaxa laga dhigo 7 cisho si ay wakhti isugu helaan lamaane kasta oo shaqaalaha dawlada ka mid ah oo guursada ama nolol cusub bilaaba, waana waajib ina saaran in guurka shaqaalaha laga shaqeeyo iyo farxadooda si ay wakhti isugu helaan oo ugu yaraan jaanis loo siiyo toddoba (7) cisho oo toddoba bax ah, waana muhiim in la siiyo wakhti ku filan oo ka badan saddex cisho.

Sidoo kale fasaxa geerida, waynu ognahay oo qofka ay ku timaado geeri qoyskiisa ah oo ceergaabo ama meelaha ka sii fog ah ama Sool ah saddex cisho waa maalin uu sii socdo iyo maalin oo soo socdo, waana wakhti yar, marka iyanada waxaan soo jeedin lahaa in laga dhigo toddoba (7) cisho, waxaan rajaynaya in Goluhu wadda qaato go'aankaas. Intaas ayaan ku soo koobayaa, WSC.

**Md. Jimcaale Axmed Cilmi** ***(7min 41sec):-*** Mudane Guddoomiye, Shir-gudoonka, Mudnayaasha, Shaqaalewaynaha, bahda saxaafada iyo Marti-sharafta kale ee Golaha joogtaba ASC.

Kolay anigu dooddaydu waxay ku saabsan tahay **Qodobka 25aad** ee ka hadlaya Agaasimaha Guud, Qodobkaas **Farqadiisa 2aad** waxay sheegaysaa *"Agaasimaha Guud waa shaqaale dawladeed (civil servant) waana sarkaalka ugu sarreeya shaqaalaha joogtada ah ee hay'addiisa, waxaanu hoos tagayaa Wasiirka ama Guddoomiyaha Hay'adda"*.

Haddaba **Qodobka 90aad** ee Dastuurka **Farqadiisa 3aad** Xarafka (kh) waxay sheegaysaa in Agaasimayaasha guud ka mid yihiin Madaxda sare ee dawlada ee aanu ahayn shaqaale dawaladeed, sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa ama ku adkaynayaa in laga saaro Qodobkaas, maalintii dhowayd ee madaxda hay'adda shaqaaluhu inala joogeen halkan waxayaalaha ay sheegeen waxa ka mid ahaa in Agaasimayaasha Guud ay ka mid yihiin shaqaalaha dawlada iyadoo aan la doonayn in agaasimayaashu aanay ku milmin siyaasada, taasi waxay si cad uga horumanaysaa Dastuurka qodobkiisa 90aad farqada 3aad xarafkeeda (kh).

Dhinaca kale haddii lagu darro shaqaalaha dawlada oo marka intaas oo agaasime la eryo oo lagu daro shaqaalaha dawlada waxay keenaysaa culays dhaqaale, waxayna culays dhaqaale ku keenaysaa Miisaaniyadii dalka, waxayna sababaysaa in mushaharkoodii iyo gunooyinkoodii ay miisaaniyada ku noqon karto culays dhaqaale, sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa oo aan Mudanayaasha Golaha u soo jeedinayaa in Xeerka laga saaro Qodobkaas.

**Qodobka 56aad** oo ka hadlaya Shaqo joojin, oo ah marka qof shaqaale dawladeed shaqada laga joojinayo Qodobkaas **Farqadiisa 2aad** waxay leedahay *"Amarka shaqo joojinta ah waxa kaloo raaci kara in shaqaalaha dowladeed laga hakiyo qayb ahaan ama guud ahaanba mushaharkiisa ilaa inta uu go'aan kama dambaysa ah ka soo baxayo Guddida Hay'adda Shaqaalaha Dawladda",* anigu waxaan qabaa in farqadaas laga saaro ama si kale loo dhigo oo halka Mushaharka lagu bedelo gunooyinka, madaama mushaharku yahay biilka kaliya ee nololeed ee qofku ku tiirsan yahay, hadii la hakiyo waxa laga yaabaa inay wakhti qaadato marka qofka ay dacwadi ku socoto, hadii la yidhaahdo intaas oo dhan ha laga hakiyo waxa laga yaabaa in aanay duruufaha nololeed u saamixi Karin in mushaarkiisii qayb ahaan ama guud ahaan la hakiyo oo noloshiisii guud ahaan aanu qofku sii wadan Karin, sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo gunooyinka.

Sidoo kale, **Qodobka 55aad** ee Xeerka Shaqaalaha Dawlada ee ka hadlaya Gafafka iyo tallaabooyinka anshaxmarinta, **Farqadiisa 2aad xarfaheeda (I) iyo (J)** waxa ku qoran aflagaado, waxaan soo jeedinayaa in lagu darro nooca aflagaadaasi tahay oo la caddeeyo inay aflagadaasi tahay **qoraal ama muuqaal ama markhaatiyaal ugu yaraan saddex qof,** ah in marka lagu soo eedaynayo ay noqoto mid cadaynteedii wadata.

Anigu intaas uun baa ku soo koobi lahaa qodobada xeerka, waxaan xaga dambe ka raacin lahaa tallo, Mudanayaal marka aynu joogno Golaha waxaan aad ugu bogaadinayaa Guddoomiyaha sidii uu ugu dedaalo uguna soo dabaalo doodduhu markay socdaan in doodduhu ka bixin xayndaabka ajandaha, mudanayaasha waxaan u soo jeedinayaa in dhinacyo badan ka eegno dooddeheena waayo dadweynihii baa inagu xidhan, marka hadalka aynu leenahay manfaciisa iyo maqsadkiisa eegno oo ay noqoto wax miisaaman oo umadda wax tar u leh waxaynu ku hadlayno ama ka hadlayno xaaladda taagan ee dhabta ah, aad baad u mahadsan tihiin, WSC.

**Md. Qaasim Aadam Suleymaan** ***(7min 36sec):-*** Shir-guddoonka, Mudanayaasha Sharfa leh ee Golaha, Xubnaha Shaqaalaha Golaha, Saxaafada iyo Martida kaleba dhamaan waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka ASC.

Mudanayaal, waxaynu maanta u fadhinaa doodda Xeerka Shaqaalaha Dawlada, muhiimada ugu wayn ee xeerkan leeyahay sidaynu arkayno waa inay ka muuqdan daah-furnaani oo uu noqdo mid u furan dhammaan umadda reer Somaliland oo ah mid ay xaq u leeyihiin inay dalbadaan dhammaan shaqooyinka, in xeerkan qeexayo qaabka lagu xulanayo oo ah aqoontooda iyo khibradooda ay u leeyihiin shaqooyinka, waxa kale muhiima in la eego dheeli-tiranka shaqaale ee deegaamada Somaliland oo isaguna xeerkan looga baahan yahay, inuu si fiican u qeexo, kama xishoonayo inaan idhaahdo deegaanada aan ka soo jeedo ee Gobolada barri dheeli-tirankaasi waa ku qabyo, deegaanka aan gaar uga soo jeedona kama xishoonayo inaan idhaahdo in qof shaqaale ah aanay dawlada ku lahayn.

Waxa kale oo aynu u baahanahay xeerkani inuu illaaliyo xuquuqda shaqaalaha Dawlada, sidoo kalena gafafka ama khaladaadka ka yimaada ama ka dhaca shaqaalaha, sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in marwalba ay jirto guddi daba-galka oo xeerkani qeexayo, taas oo kula xisaabtamaysa daah-furnaantaas iyo qodobada uu xeerkani ka turjumayo cid ku daba-gasha, si aysan u dhicin waxyaabaha aan sheegay ee ah in deegaamo badan xuquuqi ka maqan tahay ama cabasho badani ka jirto iyo arrimaha noocaas ah.

Waxaynu la soconaa Mudanayaal oo jirta Wasaarada Shaqaalaha wixii la doono ee kale ha la raaciyee arrimaha bulshada iyo wixii kaleba hala raaciyee, waxa kale oo jirta Hay'adda Shaqaalaha, waxa kale Iyana jirta Gudi la yidhaahdo Guddida shaqo qaran, saddexdooda mid waaliba xeer bay shaqaalaha ka leedahay, in la is-waafajiyaa waa muhiim, marka waxaan Golaha u soo jeedinayaa in xeerarkaasi noqdaan xeerar is-waafaqsan oo aan is-burinaynin, hay'addahaas kala socdo ee dhamaantooda shaqaalaha dawlada kuwada saabsana la mideeyo oo qaab ka duwan qaabka ay hada u shaqeeyaan loo sameeyo.

Qodobka kale ee muhiimka ah waxa weeye Xeerkani wuxuu qeexayaa shaqaalaha dawlada, laakiin ma caddaynayo yaa ah shaqaale dawladeed, yaanse ahayn? Waxaan rabaa in xeerka lagu caddeeyo yaa ah shaqaale dawladeed, waxa jira hay'addo madax-bannaan oo la mid ah hay'adda shaqaalaha inay xeer u sameynayso ama hay'addo ka sareeyaba doonayso inay xeer u samayso, ayna ka mid yihiin hay'addo la doortay. Sidaa awgeed, waxaan soo jeedinayaa in la caddeeyo shaqaalaha dawladu waayo, xeerkani uu qabto shaqaalaha dawlada ee aanu ka gudbin.

Qodob ka mid ah hadaan soo qaaato, shaqo dhimista ay xeerkan ku soo qoreen, agaasimihii maalintii dhoweyd wuxuu inoo sheegay inay ku illaalinayan ee aanay maamulin shaqadooda, **Qodobka 49aad Farqadiisa 2aad** oo aan u malaynayo inay uga jeedaan 2aad waxa ku qoran farqada 1aad ay sax ku tahay farqada 2aad, waxa ku qoran *"Dhimista shaqaalaha dawladda, waxa go'aaminaya Golaha Wasiiradda kadib marka ay ka helaan warbixinta qiimaynta xaaladdaha shaqo dhimista Hay'adda Shaqaalaha Dawladda"*Taasi waxay qabanaysaa hay'addihii ka madax-banaanaa ee ay lahaayeen shaqaanu u sameynaynaa.

Sidaa si la mid ah, Xadka adeegsiga Xeerkan oo ah **Qodobka 4aad,** farqadiisa 4aad waxay sheegaysaa in xeerarkasta oo kale oo jira oo xataa yihiin xulasho uu Madaxweynuhu sameeyay inay burayso oo xeerkani qabanaynin, sidaa awgeedna, waxaan qabaa in farqadaasna meesha laga saaro. Isla **Qodobka 4aad Farqadiisa 7aad** waxay qoraysaa in ay jiraan xubno aan xeerkani lagu dhaqaynin, xubnahaas oo xeerkan ku cad.

Waxaan soo jeedinayaa in Xeerkani uu noqdo Xeer lagu dhaqo hay'addaha uu khuseeyo iyo shaqaalaha dawlada sida uu u qoran yahay oo ah Xeerka Shaqaalaha Dawlada inuu ku koobnaado xayndaabkiisa.

**Qodobka $31^{aad}$** ee Shuruudaha shaqo qorista, waxaan soo jeedinayaa in shuruudaha lagu daro in shaqaalaha la qorayaa uu maskax ahaan caafimaad qabo, da'ahaana qaan-gaadh yahay oo uu gaadho da'dii loogu talagalay inuu shaqayn karo.

**Qodobka $26^{aad}$** wuxuu qorayaa Agaasimayaasha guud shaqo ka wareejintooda oo anigu u fasirtay shaqo ka joojintooda, sababtoo ah waxa maalintii dhowayd la inoo caddeeyay xubno gole agaasimayaal ah oo la bilaabay xukuumadii AHN Marxuum Madaxweyne Cigaal inay illaa iyo manta, iyadoo cid wax u dirsatay jirin ay mushahar qaataan. Waxaan soo jeedinayaa in **Qodobkaas $26^{aad}$ Farqadiisa $7^{aad}$** lagu siinayo mushaharka xubnaha shaqada laga wareejiyay ee aan loo baahan shaqadooda meesha laga saaro isaguna oo uu yahay mid aan ku qumanayn goobtaas.

Waxaan ku soo gabo-gabeynayaa dooddeyda, in qoraal kasta oo ka baxaya Golaha, inuu noqdo qoraal dhamaystiran oo tafatiran oo la saxayo erey-bixintiisa iyo qaabka uu u qoran yahay, waxaan xoojinayaa in la saxo qaabka uu u qoran yahay, in la saxo Alfabeytiga uu isticmaalayo oo sidaynu isla qaadanay ah Af-keena Somaliga ee aanu noqonin afkale. Aad baad u mahad-santihiin, WSC.

**Md. Axmed Maxamuud Cabdilaahi** ***(3min 22sec):-*** ASC, **Qodobka $9^{aad}$** wuxuu qeexayaa khasaare bixinta shaqaalaha, wuxuuna sheegayaa bixinta khasaaraha si badheedha ama daaya'caad shaqo uga dhaca, ma qeexayo khasaaraha aan badheedhka ahayn ee shaqaalaha ka dhaca iyo sida loo bixinayo.

**Qodobka $7^{aad}$** ee xuquuqda shaqaalaha, sida ku cad Qodobka $20^{aad}$ ee Dastuurka Farqada $6^{aad}$ oo sheegaysa taakulaynta iyo badbaadinta ama caymiska shaqaalaha oo ka mid ah xuquuqda shaqaalaha ma qeexayo xeerku, wayna ka maqan tahay qodobkaas $7^{aad}$ ee xuquuqda shaqaalaha.

Waxan ku soo koobayaa dooddayda labada qodob ee kala ah: -

- Waa in Xeerka lagu qeexaa khasaaraha aan badheedhka ahayn ee shaqaalaha ka dhaca cidda bixinaysa, sida loo bixinayo iyo waxa uga yaala sharci ahaan dawlada.
- In **Qodobka $7^{aad}$** ee xuquuqda shaqaalaha ka hadlaya lagu darro taakulaynta, bad-baadinta iyo caymiska shaqaalaha sida uu qeexayo Dastuurka Qodobkiisa $20^{aad}$ Farqadiisa $6^{aad}$.

**Md. Mubaarik Muuse Ismaaciil** ***(12min 03sec):-*** Haddii la eego **Qodobka $1^{aad}$** xeerkan waxaa la yidhaahdaa xeerka shaqaalaha dawlada Somaliland, iyagoo soo koobaya waxay yidaadhdeen xeerkan wuxuu khuseeyaa dhammaan Hay'addaha iyo Wasaaradaha dawlada waxaan ahayn Baarlamaanka iyo Garsoorka. Runtii waxaa jirra waaxyo kale sida Bangiga oo kale, Wakaalada Biyaha, waaxahaas oo iyaguna madax-bannaan muu sheegin kumuuna qeexin inaan shaqaalohoodaas khusayn.

Mida kale magaca xeerkan oo ah xeerka shaqaalaha dawlada wuxuu **Qodobkiisa 2aad farqadiisa 15aad** uu leeyahay: - Shaqaale dawladeed waxaa looga jeedaa shaqaalaha dawlada, markaa waxaa jira shaqaale dawladeed oo fara badan oon joogto ahayn runtii markaa waa in magaca xeerkan qeexaa xeerka shaqaalaha dawlada ee joogtada ah.

Xeerkan waa xeer cusub, hay'addan shaqaalaha dawladu xeer hore malaha markaa mar mar markay tilmaamayso ama awooda ay maanta haayadaha kale ee ka madaxa-bannaan iyo kuwa kale iyadda oo ah hay'adda aan wali lahayn xeer inay xeer soo jeediso sida ay ku maamusho dhamaan haayadaha dawlada waxaan u arkaa runtii arin u baahan in laga fiirsado oo xeerkeeda markay qorayso ay hay'addaha ay khuseeyo oo dhan kala tashato.

**Qodobka 3aad** een soo jeedinayaa waxaa weeye ujeedada xeerkan **farqadiisa 2aad iyo 2aad** waxa ku qoran in haayada shaqaaluhu ay tahay haayad dawladeed oo in xeerkan maamuli doono dhamaan shaqaalaha dawlada qodobkaa waxaan u arkaa in wax ka badal lagu sameeyo waayo marka laga hadlayo maamul waa in si wanaagsan ay u qeexdaa ujeedada ay maamul ku tahay qodobkan waxa uu in badan ka hadlay shaqaale qorista dalacsiinta iyo habka shaqaalaha loo qaadanayo, laakiin waa inay ku caddeysaa maamulkii waxay ugala jeedaan.

**Qodobka 4aad** xadka adeegsiga xeerkan dhammaan waxaa lagu dabaqayaa shaqaalaha joogtada ee hay'addaha kala duwan ee dawlada qodobkan laftiisa waxaan u arkaa qodob u baahan tafsiir iyo in wax ka bedel weyn lagu sameeyo. Mida kale shaqaale dawladeed markuu sheegayo waxaa ku hoos jira shaqaalaha dawladaha hoose siduu xeerkan qeexayo, waxaynu ognahay sida uu dastuurku sheegayo in shaqaalaha dawladaha hoose inay xeer gaara leeyihiin ay ku maamushaan shaqaalohooda. Markaa runtii awooda inay iyagu ku maamuli karaan ama iyagu wax ka bedel ku samayn karaan shaqaalaha dawladaha hoose oo xeer gaara leh oo xeerkana aanu meelaba ku qeexayn siduu xeerarkaa ula shaqaynayo iyo xeerarkaa siduu u tix galinayo xeerka dawaladaha hoose haystaan ama maamulada Goboladu.

Xeerkan waxaa kaloo uu sheegayaa Qodobkaas **farqadiisa 5aad** in shaqaalaha labada Gole loo raacayo Qodobka 52aad iyo 53aad ee Dastuurka Somaliland waxa kaluu sheegayaa in xuquuqda kala duwan ay kala mid yihiin shaqaalaha kale ee dawlada Qodobkaas in dastuurka si wanaagsan loo waafajiyo waayo waxaa jira haayado kale oo madax banaan sida Garsoorka xeer-ilaalinta.

**Qodobka 7aad** ee xeerkan wuxuu yidhi; xeerkan lagu dabiqi maayo madaxda kala duwan ee dawlada ee madaxweynuhu magacaabo, marka laga reebo Agasimayaasha guud. Sida runtii ay mudanayaal farabadani u sheegeen Agaasimayaasha guud waxa soo doorta Madaxweynaha. Waa waax muhiima runtii oo shaqada qodobkan kumay sheegin sababta looga reebayo Agaasimayaasha guud wax qodob Dastuuri ah ama xeer kale ah

oo ay soo qaateena ma jirro waxaana muhiima in sababta lagu qeexo halkan markaa qodobkan laftigiisu wax ka beddel buu u baahan yahay.

**Cutubka 2aad** maamulka Shaqaalaha Dawlada **Qodobka 5aad** siyaasada guud ee shaqaalaynta **farqada 2aad** waxa ku qoran hay'adda shaqaalaha Dawladu waxay dajinaysaa siyaasada lagu hirgalinayo nidaamka shaqaalaysiinta Shaqaalaha Dawalada. Halkan waa in lagu qeexaa oo lagu qoraa Hay'addaha ka madaxa-banaan waayo sidii aan hore u sheegay shaqaalaha dawladu waa shaqaale aad u faro badan dawladaha hoose shaqaale madax banaan bay leeyihiin haayado madaxa-bannaan baa jira, markaa qodobkan iyo qodobo kale oo badan waxay si caamma uga hadlayaan Shaqaalaha Dawlada oo dhan.

Isla qodobkaa **farqada 3aad** waxay leedahay Hay'adda Shaqaaluhu waxay abuuraysaa nidaam wax ku ool ah oo lagu maamulo Shaqaalaha Dawlada korna loogu qaado xirfada iyo nidaamka, waxayna runtii fasireen inay dhisanayaan meel wax lagu tababaro waxaanan runtii ognahay dawladaha hoose ay leeyihiin machad ama haya'ad tababar oo lagu tababaro shaqaalaha dawladaha hoose markaa waxaa loo baahan yahay hadii ay maal galin dambe ay hay'addan samaynayso inay la kaashadaan haayada kale ee jira si aan dhaqaale fara badan ugu bixin.

**Cutubka 3aad** qodobka **Qodobka 12aad** waa xeerka aasaasaya Hay'adda Shaqaalaha Dawlada waxay halkan ku qoreen waxaa xeerkan lagu aasaasay Hay'adda Shaqaalaha Dawalada jamhuuriyada Somaliland. Waxaa uu qodobkani caadaynayaa in haayadan wax qaanuuna oo ay ku shaqayso, waxaanay qaadatay qodobka Dastuurka ee 113aad isla qodobkaas 113aad ee Dastuurka waxaa kale oo ku qoran haayadaha kale ee madaxa banaan sida Bangiga-dhexe, markaa xeerkan laftiisa lagu aasaasay haayadan qodobkan dastuurka ee ay soo qaadatay waxaa jira haayado kale oo madax banaan oo isla qodobkaas siiyay markaa runtii inuu xeerkan xad dhaaf ku samaynayo haayadaha kale ee madaxa banaan. **Farqada 5aad** ee isla qodobkan Hay'adda Shaqaalaha Dawladu waxay yeelan kartaa machadyo tababar ah shaqaalaha Dawlada (civil sevent institute).

Waxaan soo jeedinayaa xeerkan waa xeer cusub qodobo aad u faro badan buu ka hor imanaya xeerar dastuurku sameeyey markaa waxaan leeyahay waa in wax kabadal lagu sameeyo aad u fara badan maadaamuu yahay xeer aad u muhiima

**Md. Sh. Axmed Dayib Adam** ***(13min 02sec):-*** Bacda salaam, Marka koobaad waxaan ku raacsahay **Qodobka 70aad** fasaxa 7 cisho ah waan ku taageersanahay Xildhibaanadii iga horeeyay.

**Qodobka 41aad** xaga xaqal Ciidka sideedaa horaan u daynayaa waan ku khilaafsanahay oo maadaama haynta dawlada labada biloodna isku dhow yihiin, iyada sidaa xeerkaan u daynayaa.

**Qodobka 4aad** xadka adeegsiga xeerka **farqada 1aad** shaqaale joogto ah, **halkaa eray bixinta in lagu daraan soo jeedin lahaa maxaa loola jeedaa shaqaale joogto ah**. **Farqada 5aad** waxaan ku xigsiin lahaa **farqad 6aad** oo ah shaqaalaha komishanka qaranka oo anigu waan ka saarayaa xeerka oo waa ku gudo jiraa, **farqada 7aad** oo markaa xeerkana ta 6aad ah waxaan ka dhigi lahaa oon soo jeedin lahaa in laga dhigo **shaqaalaha labada gole ee baarlamaanka iyo komishanka qaranku waxay xuquuqda kala siman yihiin shaqaalaha dawlada.**

Waxaan anigu ka saaray oo aan laalay soojeedintii Guurtidda.

Halka agaasimayaasha guud **farqada 7aad** oo aniga ta 8aad ii noqonaysa waxay u taalaa xeerkan lagu dabiqi maayo madaxda hay'addaha kala duwan ee madaxweynuhu magacaabo marka laga reebo agaasimayaasha guud waxaana laga qaadanayaa shaqaalaha dawlada, anigu halkaa waxaan raacinayaa **agaasimayaasha guud in laga soo qaato marka hore ee la magacaayaba**, iyadoon qodobka dastuuriga ahna waxba loo dhimayn marka la magacaabo in shaqaalaha sare ay ka mid yihiin shaki kuma jiro.

Laakiin halka laga soo qaadanayo hadii banaanka laga keeno iyo hadii kale way kala duwan yihiin 3 sababoodna waan u cuskanayaa waa sababta koobaade waxay dhaawac ku noqonaysaa hanaanka dhismaha asxaabta qaranka oo xisbigu markuu talada ku guulaysto xisbi cusub oo laga yaabo xubnihii xisbiga oo laga yaabo inuu agaasimayaal guud u magacaabo hadhow marka xilka laga qaadana la idhaa haayada shaqaalaha ayay dulsaar ku noqonayaan micneheedu waxaa weeye xisbigii dhaawac ayay ku noqonaysaa. Waa ta labaade waa hawl – wadeeno waa shaqaalaha wasaarada iyo hay'addaha dawlada ee bulshada u adeega waana udub dhaxaadkooda sidaa daraadeed qof wasaaradaha iyo hay'addaha ku jira oo shaqada fahansan in lasoo qaato marka horeba waxayna kobcinaysaa in shaqada wasaaradaha iyo hay'addaha dawladu si wanaagsan u socoto una shaqeeyaan, waata sadexaade kolka la idhaa agaasime kasta oo dibada laga keeno hay'adda shaqaalaha lagu darayaa dhiig bax dhaqaale ayay keenaysaa.

**Qodobka 10aad** oo ah saacadaha shaqada farqada 1aad waxay tilmaamaysaa saacadaaha shaqada ee shaqaalaha dawaladu shaqaynayaan inay 8 saacadood tahay **farqada 7aad** waxay sheegaysaa bisha ramadaan iyo shaqada waxayna u dhigan tahay sidan (bisha ramadaan waxaa saacadaha shaqada laga jarayaa 1 saac), mudane gudoomiye waxaan halkaa soo jeedin lahaa **in halkaa saac lagu kordhiyo sida caadiga xeerkuna dhigayo 8 saac in laga kordhiyo 1 saac oo laga dhigo 3 saac** oo 5 saacadood la shaqeeyo.

**Qodobka 16aad** shuruuda magaacista **farqadaha 2aad iyo 3aad** anigu waan isku dhafay waxaanan u dhigay sidan **{inuu yahay Muslim kuna dhaqmo diinta islaamka markaa ku sifoobo asluub akhlaaq wanaagsan.**

**Qodobka 17aad** asbaabaha xubinimada guddida ku banaanaan karto, qodobkaas waa hal farqad oo kaliya markaa lambar in la siiyo kuma haboona, markaa waan ka saaray xagan

a, b, c da la adeegsadayna lambaraan adeegsaday waxayna u dhigan tahay sidan oon u dhigay

**Xubinimada guddida shaqaalaha waxaa lagu waayi karaa hadii xubintu geeriyooto ama is casilaad qoraal ah u soo gubiso madaxweynaha, madaxweynuhuna ka aqbalo.**

**Xubintu xilka u gudan Kari waydo karti daro awgeed**, markaa intaa hore oo dhan kala mid baan ahay halkaa hore ee farqada A da ah baad yara moodaa habkay u yara taalaa, markaa intaasaan ku badalay anuu.

**Qodobka 18aad** oo ah buuxinta xubinimada banaanaata wuxuu u dhigan yahay sidan:- marka ay xubinimada guddida hay'adda shaqaaluhu ku banaanaato si waafaqsan Qodobka 17aad farqada qodobkan baa ku qoran markaa qodobkaasi muu lahayn farqado waana qodob cusub, markaa **Qodobka 17aad ee ka ka horeeya ayay noqonaysaa** ee xeerkan madaxweynaha ayaa soo magacaabaya xubinta buuxinaysa jagadaasi iyada oo loo raacayo habkii magaacista xubinta banaanaatay farqad 2aad buu qodobkaasi leeyahay oo odhanaysa mudo xileed sheegaysa markaa anigu qodobkaas waan ka saaray maadaama ayna mudo xileed go'an lahayn xiligii uu doonana madaxweynuhu uu ka qaadayo **farqadaa 2aad** waan ka saaray.

**Qodobka 26aad** agaasimaha shaqadiisa **farqada 7aad** oo tilmaamaysa marka agaasimaha xilka laga qaado agaasimaha guud sabab aan ahayn xil gudasho la'aan ama dambi uu galay wuxuu ku wareegayaa hay'adda shaqaalaha, halkaa waxaan u badalay **waxaa uu ku wareegayaa hay'addii ama wasaaradii uu hore uga tirsanaan jiray,** maadaama marka hore aan soo jeediyay in laga soo qaato wasaaradaha ama hay'addaha dawlada.

**Qodobka 30aad** mabaadiida guud ee shaqaalaysiinta qodobkaasi **farqada 1aad** waxay tilmaamaysaa qorista shaqaalaha dawlada waa in loo fuliyaa laguna saleeyaa tartan cadaalad ah iyadoo ay u wada siman yihiin dhamaan mudanayaasha reer Somaliland. **Farqada 3aad** anigu waan tirtiray oo sheegaysa siyaabo gaara dad gaara sheegaysa oo ah dadka laga tiro badan yahay naafada, waayo isla farqadan bay ka hor imanaysaa marka la idhaa cadaalad, sideedabana cadaalad iyo sinaan waa kala duwan yihiin waa marka koowaade islaamkuba cadaalad buu siiyay dadka naafada ah oo dadka aan naafada ahayn lama simin laakiin dadka kale ee laga tiro badan yahaybaa ku qoran waxaan qabaa mudane gudoomiye inay siman yihiin maadaama farqada 1aad sheegayso inay u siman yihiin dhamaan dadweynaha reer somliland cadaaladna markaasi la helo inaan markaas loo baahnayn dadka laga tirada badan yahay dadka naafada ahna kolka horeba tix galin gaara ayaa sharcigeenu siiyay.

**Qodobka 32aad** farqada 6aad imtaxaan qaadayaasha waxaa magacaabaya guddida hay'adda shaqaalaha dawlada isla markaana dhaarinaysa **isla markaana waxaa dhaarinaya gudoomiyaha haayada shaqaalaha** intaas ayaan anigu ku daray maadaama ay garsoor noqonayaan oo ay dad dhex u noqonayaan waxaan qabaa in la dhaariyo.

**Farqada 7aad** waxay sheegaysaa oo ay u dhigan tahay sidan: - imtaxaanka tartamayaasha shuruudaha iyo imtaxaanka tartanka imtaxaanada goobta iyo wakhtiga imtaxaanada iyo nidaamka ku dhawaaqida natiijada, waxaa dajinaya guddida shaqaalaha dawlada markaa maan fahmin halkaa guddidu mar hadaanay imtaxaankii iyagu diyaarinayn shuruudaha iyo nidaamka ay u adeegsanayaana aanay u raacayn shaqaday qabanayaan. Markaa waxaan anigu qabaa inay leeyihiin imtaxaan diyaarintiisa iyo soo saarista natiijadiisa inay yeeshaan guddidaa la magacaabay.

**Qodobka 40aad** horumainta mushaharka **farqadiisa 3aad** waxaa ku qoran "xadiga ugu badan ee horumarinta mushaharku aanay ka badan bil" Mudane gudoomiye qof xanuusanaya oo shaqaale dawladeed ah ama geeri ay ku timid ama hawlo badan ay ku dhaceen hadii la idhaa hal bil wax ka badan laguu horumarin maayo waxaan u arkaa inay culays tahay qofkaa shaqaalaha ahna ay dhib ku tahay markaa waxaan ku badalayaa halkaa **3 bilood** markaasi looga dhigo horumarinta mushaharkiisa la siinayo qofkaas sidoo kale mudada lagaga soo calinayo waxaa ku qoran inayna ka badan 4 bilood halkaana **6 bilood** baan anigu ka dhigi lahaa.

**Qodobka 62aad** da'da hawl gabka anigu waxaan ka dhigi lahaa **da'da hawlgabka shaqaalaha dawladu waa 63 sanadood,** dumarkii 60 baa laga dhigay ragiina 65 sababta loo kala fadilay garan maayo anuu. Maadaama markaa nabi maxamed calayhi salaatu wasalaam iyo cumar binu khadaab abiibakar cali binu abii daalib oo shaqaale dawladeed ahaa da'dii ilaahay shaqada kaga fadhiisiyay ahayd 63 waxaan soo jeedin lahaa **in da'da hawlgabka shaqaalaha dawlada la mideeyo** oon lakala farqin aad iyo aadbaad u mahadsan tihiin.

**Md. Saleeban Maxamed faarax** (*8min 28sec*)**:-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Alxamdulilaahi Rabil Caalamiin. Shir-Guddoonka, Mudabayaasha, Shaqaalaha, Saxaafada iyo Marti sharafta kale dhammaantiin Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

Waxaan jeclahay in aan Insha Allaah Xeerkan Shaqaalaha Dawlada wixii Ilaahay iiga qadaro inaan halkan ka soo jeediyo.

**Qodobka 7aad Xadka Adeegsiga Xeerka,** Waxaan ku waafaqsanahay Mudanayaashii iga horeeyey badhkood, sida Mudane Mubaarig Muuse Ismaaciil iyo Mudane Jimcaale. Xeerkani waxa uu leeyahay Qodobkiisa 7aad Xeerka lagu dabaqi maayo Madaxda Hay'adaha Kala duwan ee Dawlada ee Madaxweynuhu Magacaabo marka laga reebo Agaasimaha.

Waxaan ku raacsanahay oo aan ku taageersanahay sababta gaar looga soo dhigay in la caddeeyo, waxaanan ku raacsanahay Mudanayaashii iga horeeyey. Sidoo kale waxaad moodaa inuu Qodobku iska horimanayo.

Lifaaqa ay Guurtidu inagu soo celisay oo aan xeerkan ku ool, Golaha Guurtidu wuxuu ku soo daray **Xarafka (F)** oo odhonaya Hay'adaha Madaxa-bannaan ee Dawlada ee ku tiirsan dakhliga laguma dabaqi karo, sida Banka dhexe iyo Wakaalada Biyaha. Halka hore waxa ku taala laguma dabaqi karo hay'addaha dawlad marka laga reebo agaasimaha Guud. Sidaa darteed, markaa in aan lagu dabiqi hay'addaha guud waxaan ku raacsanahay Mudane Mubaarig Muuse.

Sidoo kale in la is waafajiyo Xarafkan (A) iyo A-da ugu horaysa oo iska horimanaya in meel la isugu guuriyo, iyadan waan soo jeedinayaa.

**Qodobka 10aad** Saacada Shaqada ayuu ka hadlayaa. Wuxuu leeyahay Shaqaaluhu waxay shaqayn karaa 48 saacadood wiigii. Waxaan filayaa in laga keenay sideed casho oo lagu dhuftay lix saacadood (8 casho x 6 saacadood= 48 Saac).

Waxaan soo jeedinayaa Mudane Guddoomiye in halkaas lagu bedelo 6 casho iyo 36 saac, waayo 48 saac lama socoto waaqiciga iyo curfiga jira.

**Qodobka 38aad** Musharaharka Shaqaalaha. Marka la eego maalinta Mushahar bixinta Caalamiga ah, shaqaalaha mushaharkiisa in la siiyo way ku taalaa iyo xuquuqa shaqaalaha. Mudane Guddoomiye iyo Mudnayaal kuma taalo maalin ku cad ama ku astaysan mushaharka Shaqaalaha.

Waxaan soo jeedinayaa in maalinta Mushahar qaadshada shaqaalaha lagu qeexo Xeerkan Shaqaalaha, maalintaasi ha noqoto 30 ama 31 bil dhammaaskeed. Haddii aan la bixin karayn oo ay sababo jiraan, waxaan soo jeedin lahaa in wiig ka hor oo adduunyada haddii Bananku khal-khal galaan waxa lagu buuxiyaa automatically in bisha 30-keeda ama 31-keeda mushahar la bixiyo.

Inaga xageena duruuf ayaa jiri karta, haddii ay yimadaan sabab caykaas oo kale ahi oo 30-kii ama 31-kii lagu bixin karayn ama dakhligii mushahaarooyinka laga bixinyey aanay soo xeroon, waa in wiig ka hor tilifoon ahaan ama sidii kale ee ugu fudud loo daraaseeyaa oo daraasayn lagu sameeyo oo shaqaalaha lagu ogaysiinaayo in wiig ama laba wiig mushaharku dib u dhacayo oo mushahar qaataha lagu ogaysiiyaa. Duruufaa jiri karra waxa dhici kartaa in 30 bisha, 31 bisha 10 ama 16 aanu shaqaaluhu mushaharkii aanu heli karrin.

Waxaan soo jeedinayaa in maalinta ugu dambaysa laga dhigo maalin ku astaysan maalinta bixinta Muahaharka shaqaaalaha, haddii aanu dhici karrina sababihii aan soo sheegay lagu ogaysiiyo.

Qodobka ugu dambeeya waxaan ku raacsanahay xildhibaan Qaasim, marka la inoo soo bandhigo xeer kasta waxa ku jira Qodobo badan oo xagga editing ah. Waxaad arkaysaa xaraf Capital ah oo aan loo baahnayn inuu meel dhexda ah dhaco. Marka xeer meel soo gudbinayo waxay sheegaysaa aqoon iyo xirfada Golaha. Xeerarku waxay ku bixi karaa

English ama Soomaali, waxaan soo jeedinayaa in mar kasta xeerarka wakhti la siiyo. Inamada soo qora ma ceebayno waa bani'aadam qalad way samayn karaan, laakiin qodobkaasi wuu soo noq-noqdaa akhrin badan ayaa ku jira. Qodobka editing waxaan ku waafaqsanahay Xildhibaan Qaasim.

Waxa jira Qodob kale oo maskaxdayda ku jiray in aan ka hadlo, markaa wixii intaas ka badan waxaan u dhaafayaa Mudanayaasha kale.

**Md. Axmed Nuur Guruuje** **(7min 31sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Allaahumaa Salii Calaa Muxamed wa calaa Aalii Muxamed. Shir-guddoonka, Mudanayaasha Waan salaamayaa. Salaam ka bacdi, waxaan guda galayaa Doodayda.

Xeerkan la inoo soo gudbiyey ee Xeer Lr. 97/2021 ee loo bixiyey Xeerka Shaqaalaha Dawladda, sida ku xusan Qodobka 3aad ee Xeerkan farqadihiisa 1aad iyo 2aad. Waxa uu ka kooban yahay laba xeer oo isku dhex jira oo midi yahay Aasaaska Xeerka Hay'adda Shaqaalaha dawlada midna yahay Xeerka Shaqaalaha Dawlada. Haddaba sida uu waajibiyey Qodobka 122aad ee Dastuurka waxa uu qeexayaa xeerka Aasaaska dawlada, Qaab-dhismeedka, Waajibaadka iyo dhawrsanaanta Madaxda Hay'addaha dawlada. Iyada oo hay'addaha dawladuna tahay kuwo dabeecada shaqo iyo duruufahooda guud ku kala duwan yihiin sida ku xusan Qodobka 13aad iyo 14aad ee Dastuurka. Xeerka shaqaalaha Dawlada waxa u aasaas ah Madax-bannaani, dhex-dhexaadnimo iyo hufnaan.

Sidoo kale Xeerka Shaqaalaha dawlada Xeer Lr.97/2021 isna waxa laga doonayaa xuquuqaha iyo waajibaadka ku xusan Qodobka 40aad ee Dastuurka JSL xuquuqaha shaqo ee aasaasiga ah iyo xuquuqaha ku xusan Shaqaalaha Caalamiga ah ee uu jidaynayo xeerka caalamiga ah ee Shaqaalaha. (International Labor Law). Kaas oo u dhigma Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Somaliland oo la yidhaa Xeer Lr. 31/2014.

Shaqaalaha Dawlada waxa laga rabaa inay yeeshaan xuquuqaad u dhigma kuwa rayidka ah ee gaarka ah iyo waliba dheeraad. Inaga oo og in Shaqaalaha Dawladu ay ka mushaharaad yar yihiin kuwa gaarka ah, isla markaana ay u nugul yihiin inay la kulmaan xadgudubyo siyaasadeed ama mid deegaan, maadaama oo qof u shaqeeyo cid gaar ah ama shaqeeyaha ama loo shaqeeyahu si madax-bannaan u gor-gortamayaan iyo in qof dawlad u shaqeeyaa ay kala duwan yihiin.

Waxaynu isla garanaynaa in Shaqaalaha C iyo D marka aynu eegno mushaharkooda ay sekadu ku waajibayso, isla markaana ay u baahan yihiin inay helaan daryeel dheeraad ah. Sidaa daraadeed, aniga oo doodayda soo ururinaya xeerkan la inoo soo gudbiyey oo ah labada xeer ee isku dhex jira waa xeer luminaya Madax-bannaanidii looga baahnaa Hay'adda Shaqaaluhu inay yeelato, isla markaana xad-gudub ku ah Qodobada 113aad iyo 114aad oo hay'addaas siiyey Madax-bannaani farabadan si ay dhex-dhexaad u noqoto, iyadoo Qodobada xeerkan la inoogu soo gudbiyey ay ku jiraan in Madaxweynuhu xilka

ka qaadi karo Guddoomiyaha iyo Xubanaha Hay'adda Shaqaalaha, isla markaana in Dastuurku jideeyey in Golaha Wakiiladu ansixiyaan xil ka qaadistaa oo xeerkan laguma soo darin in Golaha Wakiiladu ogolaanayo xil ka qaadistooda.

Sidoo kale, xeerkan laguma sheegin halka ay ka imanayaa xubnaha Hay'adda Shaqaaluhu, iyadoo loo baahan yahay in xeerku caddeeyo inay ka imaadaan sida Guddida Xuquuqal iisaanka ee Qaranka, Gobolada oo dhan, Beelaha laga tirada badan yahay, haweenka iyo ururada sharci yaqaanka oo kale.

Sidoo kale, waxa xeerkani ka horimanayaa Qodobka 20aad ee Dastuurka oo jidaynaya inay shaqaaluhu helaan Caymis shaqaale, caawimada bukaankooda, shilalka ama naafo ay la kulmaan. Sidoo kale waxa uu ka horimanayaa qofka shaqaalaha ahi marka uu gaysto khasaare aanu u badheedhin.

Qofka shaqaalaha ah looma raaco magdhaw, haddii aan si badheedh ahayn u galo shil. Xeerkani waxa uu sheegayaa uun sidii isaga looga jari lahaa magdhaw. Markaa xeerkani duuduub ahaan haddii aan u soo koobo waa xeer Madax-bannaanidii ay lahaan lahayd hay'adda shaqaaluhu hoos geeyey hay'adda Fulinta, isla markaana xuquuqdii ay heli lahaayeen oo dhan shaqaaluhu la hoos geeyey hay'adda shaqaalaha. Waxaanu dulmi ku yahay Madax-bannaanidii Hay'adda Shaqaalaha iyo xuquuqdii Shaqaalaha Dawlada labada.

Sidaa darteed, waxaan Golaha Wakiilada u soo jeedinayaa, oo aan ka codsanayaa in xeerkan dib loo celiyo. Labadaas xeer ee ku kala xusan Qodobada 22aad ee ku xusan Dastuurka oo ah xeerka Aasaaska Hay'adda iyo Qodobka 20aad, oo sheegaaya in Shaqaaluhu yeelanayaa xeer u gaar ah, sida shaqaalaha rayidka ahiba ay u leeyihiin xeer gaar ah. Waxaan soo jeedinayaa in xeerkan dib loo celiyo xeerkan oo labadaas xeer kala ahna dib Golaha loogu soo celiyo, oo lagu miisaamo Madax-bannaanidii Hay'adda shaqaaluhu u baahnayd. Xeerka shaqaalaha dawladuna waafaqsan yahay waajibaadkii iyo xuquuqihii ay la haayeen Shaqaalaha Dawladu.

Sidaa daraadeed, labadan xeer isku dhex jira oo aan waligoodna is qabsanayn dib ha loo celiyo oo ha la inagu soo celiyo iyaga oo kala Madax-bannaan.

**Md. Xasan Cumar Xasan** **(18min 49sec):-** Mahadsanid Mudane Guddoomiye. Mudane Guddoomiye, sida ku qoran Xeerkan Shaqaalaha Dawladda, waxa uu sheegaya in Shaqaalaha komishanka Qaranka ay maamuli doonto Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu, sida ku cad **Qodobka 4aad** ee Xeerka Shaqalaha Dawladda ee ka hadlaya (Xadka adeegsiga Xeerka).

Mudane Guddoomiye, madama Komishanka Doorashooyinka Qaranku yahay Hay'adda madaxbanaan isla markaan ah hay'adda garsoor, oo ka garsoorta tartamada Doorashooyinka Qaranka, waxaa muhiim ah in ay hesho madax-banaanin maamul,

shaqaale, dhaqaale iyo mid sharci si ay si madax-banaan oo dhex-dhexaad ah ugu gudan karto shaqooyinkeeda, markaas Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedin lahaa in aan xeerkan lagu dhiqin, maamulin sinaba loogu adeegsan shaqaalaha Komishanka Doorashooyinka Qaran, ta badel-keedana shaqaalaha Komishanka Qaranka lagu maamul XEERKA GUUD EE DOORASHOOYINKA IYO DIWAANGALINTA COD-BIXIYAYAASHA XEER LR.91/2020 Goluhuna isku xil-saaro sidii xeerkaas Doorashooyinka wixi ka qabyo ah ama u baahan sixitaan wakhtiga ku haboon Goluhu guda galo.

Sidoo kale, waxaan soo jeedin lahaa in lagu daro farqad kale isla **Qodobkan 4aad** oo cusub oo si cad u sheegaysa madaxbanaanida shaqaale ee Komishanka Doorashooyinka Qaranka, Mudane Guddoomiye waxaan soo jeedin lahaa in laga saro isla **Qodobkan 4aad** ee Xeerka Shaqaalaha Dawlada, **farqadiisa 4aad** ee odhanaysa "**Haddi ay dhacdo iska hor imaad u dhaxeeya qodobada xeerkan iyo qodob kasta oo kale oo ku jira xeer kale oo dhaqan gal ah, ama wareegto madaxweyne, ama xeer-nidaamiye, ama qawaaniin kale oo la xidhiidha maamulka shaqaalaha dawladda ama arrin kasta oo ku xusan xeerkan, Qodobada Xeerkan ayaa la raacayaa.**" Mudane Guddoomiye, farqadaasi waxay tabraysaa Hay'addo kala duwan oo Shaqaale heeda u madaxbanaan, sidaas markay tahay waa in laga saaro qodobkaas.

Mudane Guddoomiye, isla **Qodobka 4aad** ee Xeerka Shaqalaha Dawlada farqadiisa 3aad ee ka hadlaysa Xoghayaha Fulinta ee Dawlada Hoose, ee u dhigan sidan "Xoghayaha fulinta ee degmooyinka leh Golayaasha Deegaanka iyo Xoghayaha fulinta ee Gobolada dalku waxay ka mid yihiin shaqaalaha dawladda waxaana laga soo dhex xulayaa shaqaalaha ka diiwaan gashan Hay'adda shaqaalaha dawladda iyada oo loo raacayo magacaabistooda Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer Lr. 23/2019." Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedin lahaa in Xoghayaha fulinta Dawlada hoose loo daayo sidii hore ee ahayd in Wasiirka Arimaha Guduhu soo magacaabo, madama oo uu yahay xidhiidhiyaha Dalwada Dhexe iyo Dawlada Hoose, madama oo Dawladaha Hoose iyo Wasaaradda Arimaha Gudaha wada shaqayn ka dhaxayso.

Mudane Guddoomiye, **Qodobka 53aad** ee Xeerkan Shaqaalaha Dawladda ee ciwaankiisu yahay "Guddiga Anshaxmarinta ee heer Wasaaradeed ama Hay'addeed." Waxaan soo jeedin lahaa in lagu daro laba farqadood oo kala ah: -

**1.** Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waa inay 14 maalmood gudohood laga bilaabo marka rafcaanka loo soo gudbiyay ay dhegaysato rafcaanka, waa in Hay'adda

Shaqaaluhu ay 45 maalmood gudo hood laga bilaabo maalintii cabashada loo soo gudbiyay ay go'aan qoran kusiiso qofka soo rafcaan qaatay

**2.** Go'aanka Hay'adda Shaqaalaha waxa looga rafcaan qaadan kara Maxkamadda sare ee JSL.

Mudane Guddoomiye, **Qodobka 32aad** ee Xeerkan Shaqaalaha ee ciwaankiisuna yahay "**Imtixaanka Shaqada**", waxaan soo jeedin lahaa in lagu daro saddex farqadood oo cusub oo, farqada 1aad, 2aad iyo 3aad laga dhigo, una dhigan sidan "1. **Jagada banaanata ee loo tartamayo waa in lagu xayaysiiyo dhamaan warbaahinta qaranka isla markaana lagu dhejiyo xafiisyada Degmooyinka iyo Gobolada dalka oo dhan**. 2. **Baahinta jagada banaan waa in la xaysysiiyo mudo aan ka yarayn laba todobaad**, iyo 3. **Imtixaanka shaqo qorista waa in qof walba lagaga qaado Gobolka uu degan yahay."**

Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedin lahaa in **Qodobka 13aad** ee Xeerkan Shaqaalaha ee ciwaankiisu yahay "**Xilka iyo waajibaadka Hay'adda Shaqaalaha**" in lagu daro farqad cusub oo odhanaysa, **ilaalinta xuquqaha shaqaalaha dawladda inaan lagu xad gudbin.**

Mudane Guddoomiye, **Qodobka 8aad** ee ciwaankiisu yahay **"Waxyaaabaha ka reeban Shaqaalaha Dawladda**", ee Xeerkan, waxaan soo jeedin lahaa in lagu daro farqad cusub oo odhanaysa "**Shaqaalaha dawladdu waa u adeegge bulsho iyo daneeya Qaran ee maaha xubin xisbi dan siyaasiye leh u adeega. Waxaa waajib ku ah inuu u shaqeeyo si hufan oo aan waxyeello ku ahayn karaamada diinta, Dalka iyo dadka oo ay ka muuqato xirfad wanaag, hufnaan iyo faham qotodheer oo ka fog, kooxaysi, Gobolaysi, qabyaalad iyo Siyaasad. Shaqaalaha dawladdu ma metelli karaan oo kamma hadli karaan afkaaraha iyo siyaasadaha xukuumadda ee waxa ay u xilsaaran yihiin fullinta siyaasadaha xukuumadda hadba xilkahaysa**

Mudane Guddoomiye, **Qodobkan 41aad** ee ka hadlaya Xaqul ciidka (Eid bonus) ee ku jira Xeerka Shaqaalaha Dawlada ee u dhigan "

**Xaqal Ciidka Shaqaalaha: -** Xiliyadda dabaal-degga munaasabaddaha bisha Ramadaan iyo Arafa, xubin kasta oo kamid ah shaqaalaha dawladda waxaa la siinayaa xaqal ciid, qaddarkisa ay go'aamiso Hay'adda shaqaalaha dawladda iyada oo talowadaag la samaynaysa Madaxwaynaha. Mudane Gudoomiye, Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah xeer ln 31/2020, wuxuu sheegayaa in shaqaalaha Rayidka ah xaqul ciid loo siinaayo 15-cisho lacagteed oo loo qaybinaayo mushaharkiisa oo u kala dhigan in 7.5 maalmood lacagtood la siinaayo bisha Ramadaan iyo 7.5 malmood oo la siinaayo bisha Arafo. Hay'adda gacanta ku haysaana waa hay'adda shaqada iyo shaqaalaha dadka ka shaqaynayaana

waa shaqaale dawladeed oo maalin kasta u gar-qaadaya shirkad iyo shaqaale lacagtii ciida la siin waayay, markaas Guddoomiye waxaan soo jeedin lahaa in shaqaalaha Dawladda la siiyo caqul ciid dhan 10 maalmood oo loo qaybinaayo mushaharkiisa, waayo waxaa haboon in shaqaaluhu wax ku xisaabtamaan.

**Kharashka Aaska ee Shaqaalaha: -** Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedin lahaa in farqad cusub xeerka lagu daro oo ka hadlaysa kharashka marka qof shaqaalah ahi dhinto, taas oo loo dhigaayo, "**Hadii qof shaqaale ah dhimasho caadi ahi ku timaado, waa in Dawladdu ka bixisaa lacag xabaalo qod ah oo u dhiganta 10 cisho lacagtood**."

Mudane Guddoomiye, shaqaalaha Dawladu intooda badani ma haystaan niyad wanaagsan sax ah iyo higsi ay higsanayaa, markaas waxaan mudanayaasha ka codsan lahaa in maanta xeerkani shaqaalaha Dawladda jaanis u yahay oo aynu ugu hiilino wixii xaq ah ee ay leeyihiin iyo wixii xaq shaqadu ugu leedaha iyaga, waayo Wasiirka ama Agaasimuhu waxa uu Qaranka kula jiraa heshiiis shaqo oo aan abid ahayn markaas wuxuu la ciyaarayaa kolba halka uu jaaniskiisu yaalo lakiin shaqaaluhu waa cududdii wadanku ku faanayay, waana dad u baahan mustaqbalkooda inay ka dhex arkaan xeerkan, markay sidaas tahay waxaa inagu waajib ah inay si masuuliyadi ku jirto xeerkan u dhuganno, insha ALLAH.

**Hay'adaha Madaxa Banaan ee Dawlada**: - Mudane Guddoomye, sida ku cad Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Hay'adaha madaxa baanaan, nidaamka maamul wanaaga iyo halbeegyada caalamiga ah madax banaanida Hay'adahani yeelanayaan waxa ay noqonaysaa madax banaani maamul iyo mid maaliyadeed (Management and Financial Independence).

Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland waa awooda ugu saraysa qaanuunka dalka. Sida ku cad **Qodobka 113aad** waxa uu dhigayaa, Hay'addaha madaxa banaan ee Dawladda waa: -

- Xeer-ilaaliyaha Guud
- Baanka Dhexe
- Hay'adda Shaqaalaha Dawladda
- Hanti-dhawrka Guud

Haddii loo baahdo Hay'addo kale waa la dhisi karaa si xeerka waafaqsan.

**Sidoo kale, Qodobka 122aad** ee Dastuurka JSL waxa uu dhigayaa '' Hay'ad kasta oo ka mid ah Hay'adaha Dawlada ee gaarka ah waxa ay yeelanaysaa Xeer u gaar ah oo qeexaya qaab-dhismeedkeeda, Waajibaadkooda iyo dhawrsanaanta madaxdooda''.

Markay sidaas tahay

Xeerka kala xadaynta Nidaamka Xukuumada iyo Hay'adaha madaxa banaan, xeer lr 71/2015 qodobkiisa **65aad faqradiisa 1aad** waxaa ay qeexaysaa heerka ay gaadhsiisan tahay Madaxbanaanida Hay'addaha gaar ahi, waxaana ay si cad u sheegaysaa **"Xeerka lagu aasaasay hay'adda waa in lagu sheegaa heerka madaxbanaani ee ay leedahay inta uu gaadhsiisanyahay"**. Isla **faqrada 2aad ee qodobka 65aad** ee xeerku waxa ay xadaynaysaa heerka madaxbanaanida Hay'addaha madaxa banaan waxaanay u dhigantahay sidan **''Heerka madax-bannanidu wuxuu noqon karaa mid hawl-gudasho iyo mid maaliyadeed''**. Markaas Guddoomiye waxaan soo jeedin lahaa in Hay'adda madax banaan ee aan xeerba lahayn in xeer loo sameeyo,

**Sidaa daraadeed,** iyada oo laga duulayo qodobada **113aad** iyo **122aad** ee **Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland** iyo qodobka 65aad ee ku jira xeerka kala xadaynta nidaamka xukuumada iyo Hay'addaha madaxa banaan **xeer lr 71/2015,** waa in ay ka madax banaanaadaan Hay'ada Shaqaaaha Dawlada hay'addahan hoos ku xusani:

- Dawladaha Hoose
- Baanka Dhexe
- Wakaaladaha Biyaha
- Hanti-dhawrka guud ee qaranka
- Commission-ka Doorashooyinka Qaranka
- Iyo wixii la hal maala

Weli Guddoomiye, waxaan halkaas ku sii dari lahaa in Wakaaladaha Biyaha ee lixda Gobol iyo Gabiley madaweynu magacaabo maareeyaheeyayaashooda sida uu imikaba u magacaabo Wakaalada Biyaha ee Hargeysa.

**Shaqalaha Hanti-dhawraha:-** Mudane Guddoomiye, sida lagu sheegay Xeerka Shaqalaha Dawladda, waxaa ku jirta in Shaqalaha Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka ay maamulayso Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu, markaas sida aynu la socono Hanti-dhowruhu waa Hay'add madaxbanaan oo u xilsaaran inuu ku sameeyo baadhista madax banaan Dawladda iyo hay'addeheeda qaranka, awoodiisuna tahay baadhista wixii hanta lunsi lacageed dhacay, markay sidaas tahay, shaqaale aan madaxbananayn oo Hay'adda Shaqaalaha la hoos geeyaa, door sax ah oo baadhitaan ma yeelan karto, waxabay ahayd in Shaqaalaha hanti-dhawrka la siiyo lacag ku filan iyo gunno

wanaagsan si ay moral ahaan iyo ficil ahaan u ahadaan kuwo dhawrsan oo aan cidi wax hoose ula iman, hadii kale ma noqonayaan kuwo baadhis rasmi ah samaynaya waayo baahidu waxay qofka ka leexisaa dariiqii cadalaada ahaa.

Markaas Guddoomiye sida uu dhigaayo Xeerka Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka, Xeer 76/20216, **Qodobkiisa 18aad Faqradiisa 3aad** (**Magacaabista Shaqaalaha**), Komiishanka Hanti-dhawrka Qaranka ayaa magacaabaya shaqaalaha Xafiiska Hanti-dhawrka qaranka waxaanay u dhigantahay sidan "Komishanku Waxa ay magacaabayaan saraakiisha iyo shaqaalaha kale ee aan ahayn Hanti-dhawraha Guud."

Sidoo kale Qodobka **19aad** ee Xeerka Hanti-dhawrka Qaranka **Xeer.Lr. 76/2016** waxa uu u dhiganyahay sidan ''Shaqaalaha/Hawlwadeenada xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka waxa loo tixgalinayaa saraakiil dawladeed laakiin kamana mid aha lagumana dhaqayo xeer hoosaadyada, wareegtooyinka, iyo xeer nidaamiyayaasha kale ee ay faafiyeen Haay'ada Shaqaalaha Dawladdu''

Markaas Guddoomiye, waxaan soo jeedin lahaa in Shaqalaha Hanti-dhawrka laga gaar yeelo Hay'adda Shaqaalaha Dawlada oo weliba meelaha ku haboon lagala hadlo mushaharkooda iyo Gunnooyinkooda in kor loo qaado, Insha Allah.

**Baanka Dhexe: -** Sida ku cad Xeerka Baanka Xeer Lr 54/2012, **Qodobkiisa 9aad faqradiisa 16aad** Guddida Agaasinka (Board of Directors) Baanka ayaa awood u leh inay go'aamiyaan miisaaniyadda Baanka Dhexe ee Somaliland, shuruudaha shaqaalaynta kuna jirto gunnada hawlgabka ee shaqaalaha, wakiilada, xidhiidhiyeyaasha Baanka Dhexe ee Somaliland ee aan ka ahayn Guddiga agaasimayaasha. Sidoo kale Qodobka **22aad faqradiisa 2aad** waxa ay si cad u sheegaysa Shaqaalaha Baanka Somaliland in loo raacayo xeer hoosaadka shaqaalaha ee Baanka dhexe. Waxaanay u dhigan tahay sidan ''Guddiga agaasimeyaashu (Board of Directors) waa inay meelmariyaan xeer-hoosaad ay ku habeynayaan xaaladaha shaqo iyo shaqaale ee Baanka Dhexe ee Somaliland''.

Sidoo kale, sida uu dhigayo **Qodobka 20aad Faqradiisa 3aad** Gudoomiyaha Baanka dhexe waa madaxa fulinta ee Baanka iyadoo ku xidhan go'aamada siyaasadda guud ee Baanka waa inuu mas'uul ka noqdaa maareynta Baanka oo ay ku jirto isku dubaridka, magacawga iyo eriga shaqaalaha si waafaqsan shuruudaha shaqada ee ay dhigeen guddida agaasinku, xeerka shaqaalaha dawlada iyo awooda uu Baanku wax ku kharash garaynayo''. Markaas Guddoomiye waa in Baanku ka madaxbanadaa Hay'adda Shaqaalah Dawladda.

**Md. Cabdikariim Aadan Cumar (7min 03sec):-** Bismilahi Raxmaani Raxiim. Alxamdulilahi Rabil Caalamiin Wa Salaatu Wa Salaamu Calaa Rasuulilaahi Salalaahu Calayhi Wasalam. Shir-Guddoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha kala duwan iyo saxaafada. Waxaan idinku salaamayaa Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Tacaalaa Wa Barakaatu.

Waxaan ka hadli lahaa dhawr Qodob oo xeerka ka mid ah, Qodobka 4aad Farqadiisa 7aad Xarafka (A). Intaana gelin waxa uu ka hadlayo xarafka (A) waa kalmada English ah, waxaanu ka horimanayaa Dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo odhanaya afka koowaad ee Qaranku waa afka Soomaaliga, afka labaadna waa afka carabiga afafka kalena waxa loo isticmaalayaa wixii looga maarmi waayo. Waxaan soo jeedinayaa in Xarafka (A) laga saaro meelo badanoo xeerka ahna way ku jirtaa.

**Qodobka 4aad Farqadiisa 7aad Xarafka (A)** wuxuu odhanayaa xeerkan lagu dabaqi maayo Madaxda hay'addaha kala duwan ee Madaxweynuhu Magacaabo marka laga breebo Agaasimayaasha Guud.

Qodobkan Xildhibaano badan ayaa ka hadlay iyaga ayaanan ku raacsan ahay sidaa ay sheegeen saaxiibaday, iyaga ayaan Seconded- garaynayaa, maadaama oo uu ka horimanayo Qodobka 90aad ee Dastuurka JSL.

**Qodobka 4aad farqadiisa 4aad** Iyana waxay odhanaysaa "Haddii ay dhacdo iska horimaad u dhexeeya Qodobada xeerka iyo Qodobo kasta oo kale oo ku jira xeer kale oo dhaqan gal ah ama wareegto Madaxweyne" iyaduna waxaan taageersanahay Maadaama oo ay ka horimanayso qodob Dastuuri ah oo saaxiibo iga horeeyey sheegeen, waayo qodob kale oo dhaqan gal ah ama wareegto Madaxweyne. Taasna saaxiibaday ayaan taageersanahay.

**Qodobka 5aad** oo ka hadlaya siyaasada guud ee shaqaalaysiinta farqadiisa 2aad waxay odhanaysaa, "Shaqaalaha Dawladu waxay dejinayaa siyaasada lagu hirgelinayo nidaamka shaqaalaysiinta oo ku salaysan tartan daahdurnaan ah, iyada oo fursad isku mid ah la siinayo dhammaan tartamayaasha" halkaas ayaa lagaga hadhay.

Waxaan ognahay wakhtiga aan joogno in shaqaalaha dawladu ay u badan yihiin Caasimada Hargaysa oo aan odhan karno 95% shaqaalaha dawladu waa Gobolka Maroodi-jeex. Taasna waxa keenay fursad isku mid ah ma haysataan Gobolada kale. Waayo ninka ka imanaya laascaanood waxa laga yaabaa inay ku qaadato inuu awoodi waayo inuu helo dhaqaalihii uu ku iman lahaa Magaalada Hargaysa ama inta uu imtixaanka uu sugayo uu ku noolaan lahaa.

Waxa kale oo laga yaabaa in fursada CV-ga lagu xaraynayo lagu kala duwanaado, markaa Qodobka laguma cadaynin qaabka loogu sinaanayo ama in fursad isku mid ah la siinayo Gobolada.

Waxaan soo jeedinayaa in halkaa lagu caddeeyo qaabka isku midka ah ee ay uga wada qayb qaadan karaan Gobolada dalku. Sidoo kale Qodobka 30aad farqadiisa 1aad oo isna sidaas oo kale sheegaya oo aan caddayn. Waxaan soo jeedinayaa in halkaa lagu fursada loogu sinaanayo sida loogu qaybinayo Gobolada ee Gobol waliba fursad ugu helayo inuu ka qayb galo tartanka.

**Qodobka 32aad** Imtixaanka shaqo qorista. Imtixaanka shaqo qorista farqadiisa 3aad qorida shaqaalaha aan aqoonta gaarka ah looga baahnayn, waxa lagu kala xulanayaa waayo aragnimadooda shaqo iyo kuwa gaarka ah jagooyinka shaqaalaha la doonayo.

Waayo aragnimadooda shaqo ma caddaynin shuruudaha looga baahan yahay, waxaan lagu caddaynayaa waayo aragnimadiisa shaqaale ee shaqsigaas. Waxaan soo jeedinayaa inuu qofku la yimaado CV ama document caddaynaya waayo aragnimada shaqadiisa.

**Farqada 2aad ee Qodobku** waxa uu odhanayaa "Marka laba ama in ka badan oo tartamayaal ahi ay helaan natiijo isku mid ah imtixaanka, qofka khibrada badan leh ayaa la xulanayaa" waxay la mid tahay **Qodobkaa 32aad farqadiisa 3aad** oo iyadana aan lagu caddayn khibradaasi waxay noqonayso ama waxa laga doonayo inuu la yimaado.

**Qodobka 35aad Magacaabista Gaarka ah ee Shaqaalaha farqadiisa 1aad** waxay odhanaysaa "Guddida hay'adda Shaqaalaha Dawlada waxay samayn karaan magacaabis iyo shaqo qoris gaar ah, iyaga oo la tashanaya Madaxweynaha" waxay samayn karaan shaqo qoris iyo magacaabis gaar ah, iyaga oo aan sheegin wax shuruud ah oo magacaabistaasi ay ku xidhnaanayso ama shaqo qoristaas. Ma iyaga ayuunbaa saaxiibkood magacaabanaya. Waxaan soo jeedinayaa in lagu caddeeyo shuruudaha shaqo qorista gaarka ah ee lagu sheegay Qodobka 35aad farqadiisa 1aad.

**Md. Cabdilaahi Yuusuf Axmed (19min 30sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha, Mudanayaasha iyo Shaqaalaha Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

Xeerka shaqaalaha Dawlada JSL ee maanta inna horyaala waa xeer aad u mihiimadiisa leh, waa xeer runtii saldhig u ah. Shaqaalaha dawlad waa cududa dawlada mar Iyana lagu darro ciidanka, sidaa daraadeed xeerkani waa inuu saldhig u noqdaa Shaqaalaha. Haddii shaqaaluhu hagaago qarankeenu wuu qurux badnaanayaa, markaa xeerkani shaqaalaha waa inuu u taabtaa caafimaad ahaan iyo dhaqaale ahaanba. Sida ku cad Dastuurka Qodobka 20aad farqadiisa 5aad oo isna sheegayaa in kaalmo caafimaad haddii ay shilgalaa iyo haddii aafo ku timaado inay Qarankooda ka helaan kaalmo caawimaad.

Sidaa awgeed xeerka shaqaaluhu waa in daryeel dhamaystiran u balan qaadaa shaqaalaha dawlada. Dhawr qodob ayaa is dultaagayaa.

**Qodobka 10aad farqadiisa 1aad** oo saacadaha shaqada sheegaya, waxaan soo jeedin lahaa in wakhtiga shaqada 6 saacadood lagu ururiyo haddii uu Qaranka saacado dheeraad ah u shaqaynayo sida 9 saacadood, qayb kale oo shaqada kala wareegayaa ay soo galaan. Sida aynu ka war qabno aanay imika jirin shaqaale gelin dambe soo galaa ama mushahar ku qaata, sidii uu xaqiijiyey Guddoomiyaha Hay'ada shaqaaluhu sheegay in boqol iyo dheeraad shaqaale ahi ay jiraan oo xaga dawlada hoose ka shaqeeya.

Waxaan soo jeedinayaa in saacadaha shaqadu noqdaan 6 saacadood, haddii shaqada Qaranka ee dheeraad ahi jiraana ay shift kale soo galaa. Waxaan sideedii saacadood aan ku soo koobay lix saacadood.

Waxa kale oo aan diiday oo **Qodobka 13aad** ee xeerkan qabyo qoraalka ah ku jirta iyo farqado kale oo dhawr meelood kaga xusan oo ah Hay'ada shaqaalaha ayaa xeer nidaamiyaal soo saaraysa xeerkan loo adeegsanayo. Waxaan ka saaray Qodobada tilaamahaas sheegaya, waxaanan ku bedelay in wixi xeerar ah hay'adu xeerar kale soo curiso oo ay qaab dhismeedkeeda kaga hadlayso oo ay ku soo darto wixii kale ee ay doonayso. Markaa waxaan soo jeedinayaa in farqada sidaas sheegaya laga saaro oo aan lagu dabaqin shaqaalaha.

**Qodobka 24aad farqadiisa 5aad** oo sheegaysa korodhka shaqaalaha iyo mushaharaadkiisa, waxa xeer nidaamiye ku soo saaraya Guddida Shaqaalaha Dawlada ayuu sheegayaa, gabi ahaanba farqadaas waa diiday wanan ka saaray, waxaanan ku bedelay in Guddida Shaqaalaha iyo Guddida dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada iyo Guddida miisaaniyadda ee Xukumadu saddexdaas qolaba ay soo jeedin karaan. Waxaan ka saaray korodhka waayo waxaynu ka warhaynaa muddo dheer Miisaaniyadeenu aad ayey u kordhaysay. Waxa laga yaabaa 10-kii sanno ama 15-kii sanno ee u dambeeyey oo haddii aan tusaale u soo qaato 100/600 ayey korodhay miisaaniyadu.

Iyada oo ay sidaa tahay waxay ahayd in korodhkaa Miisaaniyadda ay Ciidamada iyo Macalimiintu ka muuqdaan. Waxaan ognahay in korodhka Miisaaniyada aanay Ciidamada dawlad aanay ka muuqan, sidaa aawadeed waxaan soo jeedinayaa sanad kasta oo ay korodho Miisaaniyadu oo hadduu 30% Miisaaniyadu ay boqolkiisa shan iyo toban (15%) ay ka muuqato korodhka mushaharka shaqaalaha iyo Ciidamada.

**Qodobka 33aad** oo ka hadlaya Imtixaanka shaqaalaysiinta iyo qaabka loo qaadayo, waxa ku qoran in Guddi Hay'ada shaqaaluhu iska dooranaysaa ay Imtixaanka qaadayso. Waxaan ku kordhiyey si imtixaanku imitixaan daah duran u noqdo oo haddii la qaadanayo oo Wasaaradahu qaadanayaan shaqaale wixii ka badan 10 shaqaale ah lagu jaangooyo lix Gobol ee hore oo wixii 10 ka badan imtixaanka Gobolada lagu soo qaado.

Waxaan soo jeedinayaa Guddida Imtixaanka qaadaysa ee Hay'adda shaqaalaha, in lagu darro saddex xubnood oo ka kala imanaya xubin Jaamacadaha ah oo haddii Hargaysa laga qaadayo ama Boorama xubin Jaamacada Camuud laga qaadanayo iyo Xubin ururada bulshada ah, si daah-furnaanta xeerkani u noqdo in bulshadu ku kalsoonaato.

**Qodobka 41aad** ee ka hadlaya xaqal ciida waxaan jecelahay in aan u caddeeyo Xildhibaanada saaxiibaday ah. Ilaa Dawladdii Maxamed Ibraahim Cigaal Ilaahay ha u naxariistee. Waxa la bixin jiray ha loo dhammaado ama qaybo gaar ah ha la siiyee xaqal-ciidda waa la bixin jiray. Laakiin waxa jira qaab ay u bixiyaan oo la raaci jiray. Waxa jiray Wasaarado iyo hay'ado iyagu bixin jiray xaqal ciid badan oo waxa laga yaabaa in mid qaataa 1200,000 shillin oo helo xaqal-ciid ka badan mushaharkooda oo ah 2,000,000 shillin.

Waxaan diiday oo aan ka saarayaa xaqal ciidka waxa iskala tashanaya Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha iyo Madaxweynaha. Waxaan ku kordhiyey xaqal-ciidada ilaa mudadaas la soo bixinayey may ahayn mid madaxweynaha ama Hay'adda shaqaaluhu jaan-goynaysay. Wasaarada kastaa Miisaaniyadeed ayey qoondayaas ka bixin jirtay. Waxaan anigu halkaas u dhigay Wasaarada iyo Hay'ad kasta iyo macaal shaqaalaheenan Golaha Wakiilada ah in qof kasta oo shaqaale ahi Xaqal-ciidka helo bil mushaharkeed. Labada iidood inuu helo lacag u dhiganta bil mushaharkeed oo hay'ada waliba Miisaaniyadda ay ku darsanayso ay ku darsato.

Xaqal Ciidkani waxa khusaynayaa dhammaan hay'addaha shaqaalaha leh, sida Wasaaradaha, Hay'adaha, Golaha Wakiilada, Golaha Guurtida iyo Dawladaha hoose.

**Qodobka 49aad xarafka (D)** oo ka hadlaya kala guurka haddii baahida shaqaale dawladeed lagu dhimo oo sheegaya in muddo la siiyo oo aanay ku soo caddayn wakhtiga, Qodobkaa waxaan soo jeedin lahaa in mudadaad kala Guurka shaqaalaha la dhimayo lagu ururiyo oo la siiyo muddo lix bilood ah.

**Qodobka 67aad oo sheegayaa fasaxyada dhalmada haweenka, wuxuu u dhigan yahay imika in 150 maalmood la siiyo oo 120 ka dambeeya dhalmada iyo 30 ka horeeya dhalmada halkaas waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo 40 ka horeeya dhalmada iyo 150 ka dambeeya dhalmada.**

**Qodobka 79aad** oo isna sheegaya in la dhaariyo shaqaalaha dawladda. Qodobkaas gabi ahaanba waan diiday maadaama oo Wasaarada iyo hay'adaha ay dhaarto waajib ku tahay. Waxaan soo jeedinayaa in shaqaalaha dhaarta laga daayo oo la raaco ciida dastuurku dhaarta ku waajibiyey oo kaliya.

**Qodbka 64aad,** oo sheegaya fasaxyada qaran oo fara badan oo dhawr maalmood ah waxaan iska dultaagayaa labada ciidood waxaa ku qoran in qofka shaqaalaha la siinayo 2-laba maalmood ciid walba, halkaa *waxaan soo-jeedinayaa in laga dhigo 3maalmood.*

**Qodobka 26aad ee qobyo qoraalka Xeerka** sheegayana agaasimayaasha Guud ee madaxabanaan qodobkaa waxaan soo-jeedinayaa in gabi ahaanba laga mamnuuco siyaasada iyo xisbiyada dhamaan agaasimayaasha Guud, Gudoomiyayaasha Hay'addaha Madaxabanaan iyo maareeyayaasha, waxaa kale oo aan soo jeedinaya in mushaharka la siinayo, laga jarro Gunno xileedkana lagu soo koobo mudo 2sano ah, lana shaqeeyaan Agaasimayaasha ay beddelaan.

Waxaa kale oo aan xeerka ku soo darayaa qofku hadii uu shaqada ka tago shaqada iyo hadii laga eryaha in la siiyo bilmusharkeed oo sanadkastana la siiyo wax cayiman, iyo hadii uuna qaadan fasaxyadii uu xaqa u lahaa in qaranku uu ku beddelo dhaqaale ahaan.

Ugu danbayntii waxaan soo jeedinayaa ian xeerka shaqaalaha dawlada aynu gaar ka dhigno, sidoo kalana xeerka Aas-aaska Hay'adda shaqaalahana gaar aynu ka dhigno, sidoo kale waxaan soo-jeediayaa I shaqaalaha aan dawliga ahayn iyo kuwa dawliga ee xeerkan ku jiraa ay helaan xuquuqo isku mid ah, dhanka kale waxaan soo-jeedinayaa in shaqaalaha ka madax bannaan hay'dda shaqaalaha in ayna shaqo qoristooda iyo shaqo ka eristooda aanay shaqo ku yeelan, waxaan soo-jeedinayaa in ay kaliya ku yeelato in ay tira-koobto si xuquuqdooda ay ula socoto.

**Md. Maxamed Xuseen Maydhane** ***(6min 47sec):-*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, ugu horayn ilaahay ayaa mahadleh inoogu nimceeyay garashada, marlabaadka waxaan u mahad celinayaa Gudoomiye ku xigeenka 1aad ee Golaha, mudanayaasha iyo shaqaalaha Golaha wakiilada waxaan ku salaamayaa salaantanta islaamka Asc.

*Ugu horayn waxaan xildhibaan Guruuje la qabaa in xeerkani iskugu jirro laba Xeer iyada oo markii hore la inoo soo hordhigay xeerkii shaqaalaha dawlada hadana markii aan akhriyay uu ku jirro xeerkii lagu aas-aasayay Hay'ada shaqaalaha dawlada. Ee waxaan soo jeedinayaa in labadaa xeer oo aan isqabanayn waa in la kala saaraa.*

**Qodobka 77aad** ee ka hadlaya Laalista; *Waxa* halkan lagu laalay xeer kasta, xeer-nidaamiye kasta, digreeto kasta iyo go'aan kasta oo maamul oo ka hadlaya maamulka shaqaalaha dawladda oon la jaanqaadayn qodobada xeerkan. *Waxaan soo jeedinayaa in Qodobkaa laga saaro Meesha, waayo waxa uu ka horimanayaa Dastuurka Qodobkiisa 28aad,* sidaa awadeed xeerkasta oo aan dastuurka waafaqsanayna waa waxba kamma jiraan.

**Qodobka 26aad Farqadiisa 2aad** ee shegaysa in; Agaasimaha Guud ay yihiin shaqaale dawladeed (civil servant) waana sarkaalka ugu sarreeya shaqaalaha joogtada ah ee hay'addiisa, waxaanu hoos tagayaa Wasiirka ama Guddoomiyaha Hay'adda. *Waxaan qabaa in uu qodobkaasi yahay sax, waxaanan qabaa in intii dawlad nimadeenu jirtayba qodobkaa la siyaasadeeyay.* Waxaanan leeyahay anagaa toos u soo taabanay taas oo shaqadii qaranka uu u hayay way baaba'aysaa marka shaqada la fadhiisiyo, ka danbe ee yimaadaana garan maayo meel uu ka bilaabo.

**Qodobka 4aad farqadiisa 3aad** oo sheegaysa in xog hayayaasha dawladaha hoose ee dalka laga soo magacaabayo shaqaalaha dawladu waxay ka hor imanaysaa qodobka 8aad ee dastuurka oo sheegaya in muwaadiniinta Somaliland sharciga hortiisa ku leeyihiin xuquuq siman( mid dawlada u shaqeeya iyo mid aan u shaqaynba) hadii la yidhaa yidhaa kooto haloogu xidho shaqaalaha dawlada iyadoo laga yaabo in muwaadiniin ka aqoon badani jaaniska laga hor istaagayo, arintani waxay ka muujinaysaa takoor muwaadiniinta lakala takoorayo waaxanay ka hor imanaysaa dastuurka *waxaan soo jeedin lahaa in muwaadinkasta oo buuxiya shuruudaha booskan uu noqon karo xoghayaha dawlada hoose*

**Qodobka 4aad farqadiisa 7aad** *waxaan soo-jeedinayaa in loo qoro sidan;* shaqaalaha xeerkan lagu dabaqayo halaga reebo shaqaalaha hanti dharwka iyo baanka dhexe

**Qodobka 41aad ee ka hadlaya Xaqal ciidka** wuxuu sheegayaa in hay'adda shaqaaluhu ay sar-goyn doonto qadarka xaqal ciidka ee la siinayo qofka shaqaalaha waxa haboon sharcina ah in xeerkan lagu cadeeyo qadarka xaqal ciidka la siinayo qofka shaqaalaha ah sida horeba loogu cadeeyey xeerka shaqaalaha rayidka ee Somaliland. *Waxaanan ku taageersanahay xildhibaanadii iga horeeyay.*

**Qodobka 43aad** wuxuu ka hadlayaa xuquuqda hawl gabka, waxaan *soo-jeedinayaa in lagu darro* Qodob ka hadlaya xaqsiinta shaqaalaha (hadii uu qofku shaqada ka tago isaga oo mudo shaqaynayey xuquuqda la siinayaa waa intee) xeerka shaqaalaha rayidka ah waa lagu cadeeyey xaqsiinta shaqaalaha kana waa lamid uun waxba kagama duwana ee waa in lagu cadeeyaa intaa ayaan ku soo koobayaa WSC.

**Md. Maxamed Abiib Yuusuf (*10min 05sec):- Mahadsanid*** Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaalba Asc. Mudanayaal sidii uu hore u sheegay Xildhibaan Garyaqaan Axmed Nuur Guruuje, *waxa uu iskugu jiraa laba Xeer oo uu dastuurku sicad u qeexay labadaa xeer oo kala ah Xeerka Aas-aaska Hay'ada shaqaalaha Dawladda iyo Xeerka Hayadda shaqaalaha dawladda sida uu qeexay Qodobka 122aad ee Dastuurka Qaranku.*

Ugu horayn waxaan leeyahay labadaa Xeer isma qaadan karaan, marka la eego culayskooda iyo saamayntooda. *Waxaanan soo jeedinayaa in labadaa Xeer la-kala qaado kuna yimaadaan iyaga oo laba xeer ah Golaha si uu waajibaadkiisa uga guto una waafajiyo mdadax-banaanida hay'ada shaqaalaha dawladda.* Waa hay'ad caddaaladeed oo dalka caddaaladiisa wax ka fulisa oo uu Dastuurkuna awood u siiyay in ay ka mid noqoto Guddida Caddaalada.

Xeerkan ina horyaala ee ay Dawladdu inna soo hor dhigtay gabigiisuba waxa uu ka hadlayaa waajibaadka, sharciyan haddii Meesha waajibaad yimaado waa in ay xuquuqina Meesha timaadaa, waxaanad moodaa in xeerkani uu siyaasadeysan yahay oo cid kasta oo waaxda fulinta ka hortimaada lagu ciqaabo, waayo qaybtii xuquuqaadka waa la yidhi waxaa qeexi doona Hab-raacyo iyo siyaasado ka dheegma xeerkan oo ay samayn doonto hay'adda shaqaaluhu. *Waxaanan qabaa in ay sharci darro tahay taasi,*

*maadaamo oo uu yahay xeer go'aan ka gaadhaya qof muwaadin ah ee waa in uu si waaddax ah u qornaadaa.*

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal waxaad ka-warqabtaan in xaalada shaqaale ee dalkeenu ay aad u adag tahay, in aynu ognahay in mushaharka shaqaalu aad u hooseeyo, sidoo kalana aanay helin xuquuqo lagu kaabo noloshooda, hay'adaha Dawladda oo aad u kala tahay oo sida ay u kala awood badan yihiin ula mushahar badanyihiin iyada oo ay tahay cadaaladdaro aad iyo aad u wayn.

Qofka shaqaale dawladeed ah waa in la yaqaan mushaharkiisa iyada oo loo eegayo grade "A", "B"," C" Iyo "D" marka laga reebo qof shaqo gaar ah loo diray gunno gaar ahna lagu siiyo mooyaane. Sidoo kale waxaynu ognahay in kaadhka shaqaaluhu aanu waxba uga tarin goobaha caafimaadka, goobaha wax-barashada ayna dhacdo dad badan oo dawlada ka mid ahi aanay caruurtooda wax-barasho ka bixin karrrin.

Markaa si aynu u gudano waajibaadka uu Dastuurku ina siiyay, aynanu ugu cadaalad samayno shaqaalaha Dawlada iyo muwaadiniinta Somaliland waxaan adkaynayaa in *xeerkaa Dawladu uu ku yimaado Golaha, sida uu ku yimi Xeerka shaqaalaha Rayidka ahi* ee golihii inga horeeyay wax-ka-beddelka iyo kaabista ku sameeyay.

Mudanayaal waxaan doonayaa in aynu ka taxadarno sida dadkeena caado u noqotay in aynu hay'ada u tolno shaadh leeg iyada hadba cida talada joogta, waana waxyaaba xeerarkeena dib u dhigay ee waa in aynu taa ka taxadarnaa si aynaan cid gooni ah aynaan xaq u siin.

Sidoo aan hore u soo jeediyay *in xeerka laba laga soo kala dhigo, sabab aan qodob-qodob ugu galaa Meesha mataalo, waxaanan si guud uun u taageero mudanayaashii iga horeeyay soo jeedimahoodii, sidoo kale xeerkan kama muuqato baahida loo qabo in la sameeyo. Dhanka kale xeerkani waxa uu laalayaa qodob aas-aasiya oo Dastuurku uu sheegay oo ay ka mid yihiin in Urur shaqaale la samaysan karo.*

Sidoo kale waxa uu laalayaa Qodobka 36aad ee Xuquuda Haweenka ee sheegaya in dumarku wixii xaquuq ah ay ula siman yihiin raga wixii gaar ah ee midkood u gaar-yeeshay mooyaane. Iyada oo ay shaqaalaha dawladu ku kala duwanaan karaan waajibaadka hadana waa in ay isku xuuq noqdaan, xeerkana waa mid kala saaraya.

Hadaba isaga oo xeerkani uu hay'ada shaqaalada hoos keenayo hay'ado uu Dastuurku kala madaxbaneeyay, iyada oo ay tahay ceebaha uu xeerkani leeyahay. Mudanayaal aniga oo aan hadalka idinku dheereenayn *waxaan soo jeedinayaa in Xeerkan lagu Celiyo Hay'adii soo diyaarisay Si ay u soo kala saaraan kana soo dhigaan laba xeer hadii ayna awood u lahayna waxaan leeyahay waa in golahani uu galaa xeerkan isaga oo kaashana sharci yaqaanadiisa* waanad mahadsanyihiin wsc.

**Md. Axmed Maxamed Maxamuud (kaare) (*11min 20sec*): -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, wa bihi-nastaciinu calaa-umuuri Dunyaa Wa-Diin wakhtiga oo inga kooban darteed waxaan halkan ku taaban doonaa dhawr qodob oo aan u arko in ay xeerkan ku tahay god-daloolooyin.

**Qodobka 4aad faqradiisa 6aad** ee Xeerka oo lagu jideeyay in Shaqaalaha Baarlamaanka (Labada Gole) in ***Xuquuqdooda kala duwan ay la mid tahay shaqaalaha dawladda,*** aragtiday Qodobkaasi Waxa uu si toos ah uga hor imanayaa qodobbabada **52aad iyo 63aad** ee Dastuurka Qaranka oo si cad u tilmamay madaxbanadida shaqaalaha labadaa Golle. Waxa kale oo ay ka hor imanayaan **Xeer hoor-saadka labada Gole** oo iyagu nidaminaya ama tilmaamaya Xuquuqaha kala Duwan Ee shaqaalaha Baarlamaanka. *Sidaad daraadeed waxan Soo jeedinaya in qodobka 4aad Farqadiisa 6aad laga saaro.*

**Qodobka 26aad farqadiisa 2aad** oo tilmaamaysa in Agaasimayaasha Guud ee dawladdu ka mid noqonayaa Shaqaalaha dawladda waxaan qabaa in ay si toos ah uga hor imanayso qodobada Dastuurka 90aad farqadiisa 3aad xarafka "KH" sidoo kale waxay ka hor-imanaysaa isla xeerka qodobkiisa 30aad oo timaamaya shuruudaha shaqo Qorista shaqaalaha dawlada, markaa xeerkani waxa uu jidaynaa in qofka shaqaalaha ahi uu yeesho dalacsiin, shaqo dhimis, Abaal-gud iyo anshax marin, markaa Agaasimaha guud waxa uu ka mid yahay dadka la rajaynayo in ay intan fuliyaan, isgana laguma fulin karro taasna way ka horimanaysaa, waxaa kale oo ay ka horimanaysaa xeerka kala xadaynta nidaamka xukuumad iyo hay'adaha madaxabanaan xeer lr. 71/2015 oo sicad u qeexaya shaqad Agaasimaha Guud.

*Sidaa daraadeed waxaan soo-jeedinayaa in aan Agaasimaha Guud aan lagu tilmaami karrin shaqaale dawladdeed uuna ka madaxbanaanyahay shaqaalaha dawladda, sidoo kalana uu leeyahay awood Dastuuriya oo ah magacaabid Madaxweyne. Qodobkaana waa in Meesha laga saaraa.*

***Sidoo kale iyada oo aynu gacanta ku hayno xeerka shaqaalaha Golaha Wakiilada, iyada oo shaqaalaha Baarlamaanka mas'uuliyaddooda iyo hawlaha maamulkooda loo raacaya sida dastuurku jideeyay qodobkiisa 52aad, waxaan soo jeedinayaa in loo daayo sidaa uu Dastuurku qeexay ama cadeeyay***

Dhanka kale Xeerku wuxuu tilmaamay in Xog-hayayaasha Fulinta Ee Gobollada iyo Degmooyinku noqonayaa shaqaale dawladeed, isla maraanau lagu maamuli doono xeerkan. Haddaba, xeerkani wuxuu ka hor imanayaa qodobka 111 (9aad) ee dastuurka, *waxaan leeyahay laguma tilmaami karo in uu yahay shaqaale dawladeed maadaama oo uu leeyahay shaqo Dastuuri ah,* sidoo kale waxa uu ka hor-imanayaa Xeerka Waxak-beddelka Is-maamulka Gobollada iyo Degmooyinka Xeer.Lr.23/2019 oo magacaabistooda iyo xil ka qaadistoodaba uu siiyay Wasiirka Arrimaha Gudaha, sidaa awgeed ka ma qayb noqonayaan hab-raaca loo qaato shaqaalaha dawladda iyo hannaanka loo marayo maamulkooda, *markaa waxaan soo-jeedinayaa in laga saaro oo aanay noqon karin shaqaale Dawladeed.*

**Waxaa saaxiibaday Maxamed Abiib iyo Guruuje ku raacsanahay in hay'ada shaqaaluhu iyo Qodobka 113aad** ee Dastuurku wuxu si cad u sheegayaa in Hay'adda Shaqaalaha Dawladda ka mid tahay hay'adaha Madaxa-bannaan Ee Dawladda, isla dastuurku waxa uu si cad u cadaynaa in hay'ad kasta oo madaxbanaani ay ku aas-aasmayso Xeer iyada u gaar ah, markaa sida ka muuqata xeerka ina horyaalaa waxa uu isku darayaa Xeerkii maamulka shaqaalaha dawlada iyo xeerkii Aas-aaska hay'ada shaqaalaha Dawladda, *Sidaa daraadeed waxaan soo-jeedinayaa in si toos ah loo kala saaro labadaa xeer, oo marka hore aynu ansixino Xeerka ay hay'adu ku Aas-aasantahay, dabadeedna xeerkan dib la inoogu soo celiyo.*

Waxaa kale oo aan intaa raacinayaa Dhawr Qodob oo ay ka mid yihiin **Xadka adeegsiga xeerka** waa in lagu daraa qodobo taxaya dadka aan lagu dabaqayn xeerka shaqaalaha Dawlada 'iyadoo laga tixraacayo xeerka shaqaalaha Rayidka ah.

**Qodobka 8aad xarafkiisa "H"** oo ka hadlaya Waxyaabaha ka reeban shaqaalaha sida sirta Qaranka maxay noqonaysaa sirta qaranku? Waa in lagu cadeey a xeerka dhexdiisa. Si looga hor tago inaan shaqaalaha lagu deg degin. Oo wax la isla yaqaano loogu anshax mariyo qofka shaqaalaha ah oo aan lagu xad-gubin.

**Qodobka 10**aad saacadaha shaqada waa in Lagu xusa saacadaha dheerad ka ah ee "Over time "oo hadii qofka shaqalaha ahi uu shaqeeyo saacado dheeraad ah waan in ay xeerka ka muuqadtaa.

**Qodobka 26aad** oo ka haldaya musharaooyinku madaxda dawladu waxa uu khilaafaya xeerka kala xadaynta mushaharooyinka, markaa *waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa loo raaco xeerka kala xadaynta.*

**Qodobka 57aad faqradiisa 2aad** "waa inuu xukunka ciqaabta ee maxakamadu Soo saarayso ahaado xukun kamma dambays ah maadama qofka xukunsanaha ahi leeyahay xaqa racfaanka sida uu dhigayo Qodobka 27aad ee Dastuurka iyo Qodobka 109' ee Xeerka Habka ciqaabta.

**Qodobka 60aad** u cabashada maxakamadda sare oo sheegaya inuu qofku mudo 60 maal mood ah laba bilood uu ugu Racfaan qaato maxakamada sare waxa uu khilaafsan yahay Qodobada **238aad, 239aad ee xeerka Habka Madaniga** oo jidaynaya noocyada racfaanka iyo xilliga lagu racfaan qaadan karo inay tahay mudo bil ah 30 maal mood. *Waxaan Soo jeedin lahaa inaynu u raacno sida ay dhigayaan xeerarka Garsoorku ku shaqeeyo ugana feejignaano inaynu Soo saarno xeerar ka wada hor imanaya xeerarkii hore ee dalka. Aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin wsc.*

**Md. Axmed Maxamed Hurre (*8min 22sec*):-** *Bismilaahi* Raxmaani Raxiim, Gudoomiye ku xigeenka 1aad, mudanayaasha sharafta badan ee Gole weynahay, shaqaalaha Golaha, iyo Garyaqaanada Martida ah waan salaamayaa,

Iyada oo ay tahay maalintii ugu horaysa ee xeerkan shaqaalaha Dawlada, yahayna mid aad u mihiim ah, Xeerkan waxaan moodaa in uu ka hor imanayo awoodii baahsanayd ee uu qarankani lahaa aanad moodo in ay shaqadii ku soo ururayso Hay'ada shaqaalaha dawlada, sida uu tilmaamayo **Qodobka 4aad farqadiisa 1aad waxay sheegaysaa** in Xeerkan lagu dabaqayo dhammaan shaqaalaha joogta ah ee hay'addaha kala duwan ee dawladda. Halka qodobkan farqadihiisa 2,3,4, ilaa 7aad aad moodo in ay meelo kala aadayaan, sidaa daraadeed *waxaan soo jeedinayaa in qodobadaa sidooda looga saaro waayo waxay ka hor-imanayaan Dastuurka Qodobkiisa 8aad iyo Xeerka kala Xadaynta Nidaamka dawladda iyo xeer 23/2019 kuwaas oo dhaantood timaamayo in muwaadiintu leeyihiin xaquuq siman.*

Sidii kale waxaad moodaa in farqada 4aad ee qadobka uu ku qaatay awoodii fasiraada ee xeerarka, iyada oo fasiiraada ay leedahay maxkamadda Dastuuriga ahi, markaa waxaad moodaa in uu boobayo awood dastuuriga ahayd ee Maxkamadda Sarre.

**Farqada 7aad waxaan soo jeedinayaa in loo qoro sidan; Xeerkan** lagu dabaqi maayo dhamaan hay'adaha Madaxabannaan sida ku cad Xeer-nidaamiyahaya ka xadaynta iyo masuuliyiinta kale ee lagu magacaabo digreeto Madaxwayne *in sidaa lagu soo kooba ayaan soo jeedin lahaa.*

**Qodobka 26aad** ee xeerkani waxa uu sheegay in agaasimaha Guud uu hoostagayo Wasiirka ama Gudoomiyaha Hay'ada, markaa masuul in uu laba meelood hoostagaa waxaan is leeyahay waxay keenaysaa iska hor-imaad, *markaa waxaan soo jeedinayaa in la yidhaa Agaasimuhu waxa uu hoostagayaa Wasiirka oo kaliya waana in laga saaraa ama Gudoomiyaha.*

**Qododkaa 26aad farqadiisa 7aad** ee timaamaya hadii shaqada laga wareejiyo Agaasimaha Guud waxaa uu siinayaa xuquuq dhaqaale oo daba-furan, *Runtii waxaan jeclaan lahaa in farqadaa laga saaro oo hadii masuulka la eryo in aanu wax xuquuq maaliyadeed aanu ku yeelan dawladda waxaanan leeyahay hadii cid laga fakarayo waa in shaqaale hoosaadka laga fakaraa.*

**Qododkaa 27aad ee laalista;** sida uu xildhibaankii iga horeeyay uu sheegay in waxa la laalayaa uu noqdo Xeerkii hore ee ay hay'adu ku shaqaynaysay, laguna cadeeyo in uu haa xeer Lr. 7/96 Xeerkaas oo ay soo saareen wasaaraduhu sida aan filaayo. Waana in aanu baaxadiisa aanu ka bixin.

Xeerkan waxaan moodaa in uu ka yimi Hab-raayadii ama Xeer-nidaamiyayaasha kuwii ugu muhiimsanaa, waxaynu u taaganahay in ay shaqaaleheenu helaan Cadaalada, makaa qodobada tilmaamaya shaqo joojinta, dalacsiinta iyo mushahar kordhintaba in

aanu xeerkan ku soo darin oo uu yidhi waxaa lagu qeexayaa Hab-raacyada ka farcami doono xeerkan, waxaana qabaa in halkan lagu lafo-guro.

*Sidoo kale waxaan la qabaa oo aan waafaqayaa xildhibaanadii iga horeeyay in xeerkani uu laba xeer ka koobanyahay labana loo kala saaro ayaan soo jeedinayaa, sidoo kale mushaharaadka iyo xaqal ciidka waxaan waafaqsanahay mudanayaashii iga horeeyay Qaabkii ay u dhigeen* intaa ayaan ku soo koobayaa wsc.

**Md. Jaamac Aadan Diiriye (*19min 00sec):-*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka, mudanayaasha iyo shaqaalaha kale ee Golahaba aad ayaad u mahadsantihiin, sida aynu ka warqabno waxa weeyi Xeer mar hore ka gudbay Golahan sida ka muuqata lifaaqa Golaha Guurtida ka soo noqday.

Marka ugu horaysa waxaan ku taageersanahay in xeerarka golahan ka baxayaa waxay huwanyihiin sharaftii Golahane waa in ay noqdaan xeerar la hubiyay lanna tafaqyo tiray lagana saaray qaladaadka ku jirra.

Xaga xuduuda shaqaalaha ama qodobka sheegaya in uu Agaasimaha Guud ka mid yahay shaqaalaha dawlada, *anigu ma qabo qodobkaa ee waxaan leeyahay in sidii sii hore loo daayo amadaxweynuhuna uu soo magacaabo, sidoo kale waa in xoh-haya dawlada hoosana laga saaro sidoo kale xilkasta oo siyaasadeed waa in laga saaraa, maadaamo oo aanu ku imanayn si xoriyo xalaah ah ama aanu ku imanayn imtixaan laga qaado ee uu ku imanayo magacaabis qof, lana isku halayn karin dhex-dhexaad nimadiisa.*

Sidoo kale waxaan taageerayaa qodobadii uu soo jeediyay sh. Axmed Dayib ee ahaa in agaasimayaasha xilalka ka tagaa ay qaadanayaa gunooyin iyo mushaharooyin, waxaan qabaa in qay qarankan dhiigbax ku tahay *iyadana waxaan soo jeedinayaa in Meesha laga saarro waayo waxaa kaga haboon in shaale badan oo jooga wasaarada dawladdu kaga haboonyihiin Agaasimayaasha.*

Qodobada fasaxyada kuma qorna Fasaxyada Cibaadadu, waayo qofku hadii uu u baxayo xajka waa in lagu cadeeyaa fasaxyada uu leeyahay waayo xaq ayuu u leeyahay.

Qodobka in uu yahay qof diinta islaamka ku dhaqma ayaa ku filan ayaan qabaa, sidii uu sheegay sh. Axmed Dayib.

Qodobka sheega mudo xileeka Gudoomiyaha hay'ada shaqaalaha waxaan filayaa in aanu mudo xileedba lahay ee uu Madaxweynuhu magacaabo, iyada oo aanu xeerarka dalku sheegayn mudo xileed *waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa mudo xileedka laga saaro.*

**Qodobka 21aad** ee sheegaya kulamada Guddida; waxaan soo jeedinayaa in la tafaqyo tiro waayo qodobada qaar ayaad moodaa in ay soo noqnoqonayaa.

Qaybta darajooyinku waxaad moodaa in aanay aad u cadayn oo aanay tirooyinka Meesha ku qorani aanay is waafaqsanayn, hadii aad eegtaan Qodobka 24aad Xarafkiisa

"E" xagiisa danbe waxaa ka raacsan erayo Af-ingiriisi ah *waxaanan soo jeedinayaa in la faafreebo.*

**Qodobka 27aad** farqadahaa badan ee la tahay waxaan qabaa in lagu soo koobi karo farqado kooban, sidoo kale **Qodobka 28aad** waa la mid waxa uu kaga duwanyahayna ma jirto.

Mabaa'diida Guud ee Shaqaalaysiinta; waxaa lagu sheegay muwaadiniinta in xaquuqahooda, laakiin laguma cadeyn waxa laga yeelayo Ajaanibka. W*axaan soo jeedinayaa in iyana la caddeeyo, oo la yidhaa qofka shaqaale dawladdeed noqonayaa waa in uu noqdaa qof muwaadin hadii loo baahdan waa laga dhigi karaa qof ajaanib ah, oo markii shaqadiisaa laga maar-mo laga joojin karo.*

**Qodobka 31aad farqadiisa 1aad xarafkiisa "D"** waxaa lagu caddeeyey in shaqaaluhu Ugu yaraan Shahaado dugsi hoose ama wax u dhigma haystaa, markaa shaqaalaha kale ee nadiifisooyinka iyo waashmaanadu miyaanay shaqaalaha ka mid noqonayn? Markaa waa in la helaa wax ka hooseeya, waayo qofku isaga oo aan dugsi ka bixin ayuu shaqadaas qaban karaa.

**Qodobka 34aad farqadiisa 3aad** ee loo kala saaray A iyo B waxaan leeyahay waa in hal faqad la isugu geeyaa waayo hadii kale jaha-wareer ayay keenaysaa.

Markii laga hadlayay shaqaaluhu inta ay shaqaynayaa ama waxa la yidhaa shaqada dheeraadka ah (over-time) waxaan qabaa in 8daa saacadood loo daayo mana qabo in 38saacadood laga dhigo, marka aynu xeer samanayno u samayn mayno sida aynu hada u shaqayno ee waxaynu u samaynayaa si mustaqbal leh. Markaa hadii qofku uu shaqeeyo intii loogu tallo galay wax-ka badan muxuu xaq u yeelanayaa, sida shaqaalaha caafimaadka iyo shaqale kale oo loo dirro hawle kale oo loo baahanyahay.

Sidoo kale lama kala cadayn in qofka shaqaalaha ahi uu habeen shaqeeyo iyo hadii uu maalin shaqeeyo sida ay u kala gunno badanayaan iyada oo aynu ognahay in shaqada habeenkii ka dhib-badantahay ta maalintii waana in la kala caadeeyaa.

Dhanka hawl gabka hadii uu qofku xanuunsado ama uu shaqadiisii gudan karri waayo isga oo aan wakhtigii hawl-gabka aanu gaadhin lama sheegin in wax xuquuq ah loogu darayo xeerkan oo sida loogala qayb-qaadanayay Farxada dhibaatooyinka waa in lagala qayb qaataa.

Qofka shaqaalaha ah ee shaqo kale oo dirro waa in hay'ada shaqaalaha la siiyo ogsiin si loo ogaado in qofkani shaqo kale oo qaran loo diray, waana in ay jirtaa cid kaa warhaysa oo hadii qalad yimaado idiin kala gar-soorta masuulkii kaa sareeyay.

Dhagaysiga dacwadaha dadweynaha laga cabano masuul ama shaqaale oo la xidhidha laaluush ama ku tagrifal awoodeed intaa ayay ku kooban tahay markaa *waxaan soo jeedinayaa in lagu darro ama dayacaad masuuliyadeed.*

**Qodobka 55aad** *Gefefka iyo Tallaabooyinka Anshaxmarinta, farqada 2aad xafarkeeda "D"* Ku-xad-gudubka qodobbada 6-aad iyo 8-aad *waxaan leeyahay tixraaca Meesha ku qorani ma jiro meel loo raaco ee waa in la saxaa.*

*Qodobka ugu danbeeya ee aan ku dayaa waxaa weeyi hadii uu ku milmo Xisbiyada, kooxa diimaha, ama uu ku biiro Ururo sharci darro ah, waa in lagu daraa waxyaaba uu ku mutaysanayo Anshaxmarinta.*

**Qodobka 56aad Farqadiisa 3aad** ee u dhiga sidan; Shaqo ka joojinta iyo mushahar ka hakinta ku xusan farqadaha sare ee qodobkan, waa laga qaadayaa haddii lagu waayo gefka lagu soo dacweeyey, ama aanu lahayn khaladka dhacay. *Waa in lagu daraa waa in uu helaa dhamaan wixii xuquuq ah ee ka luntay.*

**Qodobka 75aad** waa in lagu daraa tirada shaqaalaha Dawlada si loo ogaado shaqaalaha loo baahan yahay in la shaqaalaysiiyo.

*Waxaan la qabaa mudanayaashii sheegay in xeerka laga saaro xeer-nidaamiyayaashan badan ee uu sheegayo xeerku oo xeerka dhexdiisa lagu faah-faayiho wixii baahiyo ah ee jira, sidoo kale waxaan taageersanahay mudanayaashii soo jeediyay in xeerka laba loo kala saaro* aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.

Guddoomiye Siciid; Waxa uu sheegay in xeerkani yahay Xeer aad iyo aad ugu mihiim qaranka, iyada oo ay doodiisa isku qoreen mudanayaal tiradoodu gaadhay so 48mudane, waanan ka xumahay in wakhtigii dacay lana gaadhay wakhtigii salaada mudanayaasha hadhay hadhay waxaan dooda siin doonaa maalinta barri ah hadii alle yidhaa, liiskuna waxa uu u socon doonaa sida loo kala horeey barri waa in 8subaxnimo la yimaadaa fadhiguna wuu inoo xidhan yahay.

**Kal-fadhigii 1aad, Fadhigii 11aad**

**Axad 05–August- 2021**

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib.

**Gudoonka: -** Guddoomiye Abdirisaaq Khaliif Axmed

**Ajandaha Fadhiga: -**

- **Doodda Xeerka Shaqaalaha Dawlada, Maalinta 2aad**

**Md. Axmed Cabdi Ibraahim (Timo-jilic)** ***(12min 34sec):-*** Bismilaahi, ASC Dhamaantiin Mudane Guddoomiye, Shir-gudoonka, Mudanayaasha sharafta leh, Shaqaaleheena qaaliga iyo saxaafada.

Ugu horeyn, arrinta ah in dib loo celiyo oo xildhibaanadu shalay inta badan ka hadleen anigu waan ka soo horjeedaa in la celiyo xeerkan, ha lagu celiyo hay'adda shaqaalaha ama meel kale ha lagu celiyo waxaan leeyahay waa qayru dastuuri, waana xil ka aynu inagu leenahay oo ah waajibaadkeena dastuuriga ah, xeerka, mar hadii la soo gudbiyay hab-raacyadii uu soo mari lahaa uu soo maray, la inoo soo gudbiyay, wixii aynu u aragno inuu sixitaan u baahan yahay ee wax ka badal iyo kaabis ah, waxaan qabaa xil iyo waajib inaga ina saraan.

**Qodobka 62aad** ee ka hadlaya hawl-gabka waxaan soo jeedinayaa in inta isku mid laga dhigo inta kale sidiisa lagu dhaafo maadaama aanu Dastuurku aanu xuquuq gaar ah u kala samayn dumarka iyo rag.

**Qodobka 4aad** ee xadka adeegsiga Xeerka ka hadlaya **Farqadiisa 3aad** oo ka hadlaysa *xoghayaha fulinta ee degmooyinka iyo xoghayaha fulinta ee gobolada waxa laga soo dhex xulayaa shaqaalaha dawlada,* waxaan isleeyahay inyar baa ka dhiman, sidii maalintii hore Gudoomiyuhu arrintaas su'aal uga waydiiyay Gudoomiyaha hay'adda shaqaalaha, qodobka aan isleeyahya halka wuu ka dhiman yahay waxa weeye in aqoonyahanka ka diiwaangashan, laga diiwaangaliyo waliba hay'adda shaqaalaha dadka aqoonta leh, waayo bulshada in badan waxay u soo doonanayaan shaqo, in badana waxaan isleeyahay waaba waajib shaqaale ahaan saaran in dadka xirfadlayda ah ee dalka ku nool hay'adda shaqaaluhu diiwaangaliso, marka sanad walba aqoonyahanada shaqo raadiska ah inay diiwaangaliso waa qodob loo baahan yahay in lagu daro xeerka.

Isla **Qodobka 4aad Farqadiisa 4aad** waxaan u kala qaaday anigu waxaan u kala qaaday laba point oo golaha ka codsanayo in si taxadar leh loo eego

a) Dhamaan Shaqaalaha hay'addaha madax-banaan ee dastuurka ku xusan horena loogu sameeyay xeer dhaqangalay xeerkani waxba ka badali maayo.

b) Iyadoo la tixgalinayo xuquuqda shaqaalaha iyo madax-banaanida hay'addaha, waa in shaqaalaha ay qaadato hay'ad kasta nidaamka shaqaalaysiinta iyo shaqo ka joojintaba liis dhamaystiran ugu gudbiyaan hay'adda shaqaalaha.

Marka arrintaasi waxay ilaalinaysaa hay'addaha madaxa-banaan qaran ahaan liiskooda shaqaalaha la ogaado si hadhow wixii xuquuq ay yeelanayaan loo ogaado.

**Qodobka 10aad** ee Saacadaha shaqada Farqada 5aad waxaan leeyahay wakhtiga salaadu wuxuu ka mid yahay saacadaha shaqada maadama aynu dhamaan umad muslima nahay.

**Qodobka 12aad** aassaaska hay'adda shaqaalaha dawlada, halka ay tahay aasaaska, waxaan filayaa xeerkan laba qodob bay u jeedadiisu tahay, labadaas qodob mid waxa weeye horumarinta shaqaalaha dawlada tayadooda iyo aqoontooda, qodobna waa wixii loo yaqaanay personal office-ka, personal office-ka dabcan waynu wada naqaan oo wuxuu ilaaliya xuquuqda shaqaalaha, maadaama oo ay labadaas arrimood tahay ujeedadu kolay xildhibaan badan oo iga horeeyayna way ka hadleen, marka anigu halka aassaaska hay'adda shaqaalaha dawlada waxaan ka dhigay **"ansixinta hay'adda shaqaalaha dawlada"** waxaan isleeyahay hada lama assaasayo oo hay'addani waa mid ku dhisan Qodobka 113aad ee dastuurka, waana hay'addihii u horeeyay ee dalka ka dhaqangalay, marka waxaan isleeyahay qodobka inoo yaal waa ansixin ee aassaas inooma yaallo.

**Qodobka 13aad** waxaan ku soo kordhinayaa hal farqad oo aan ku soo darayaa, kaas oo noqonaya **farqada 2aad** una dhigan sidan **"Tababarada iyo tayaynta waxa dhamaan ka qayb-qaadan kara shaqaalaha Golayaasha iyo shaqaalaha hay'addaha madaxa-banaan ee dawlada/golayaasha"** si aan midnaba takoor ugu dhicin iyagoo madax-banaanidoodii leh, haday arrin maaliyadeed tahay, haday arrin shaqaalayn tahay iyo haday arrin maamul tahayba, laakiin tababarada iyo tayaynta shaqaalaha qaranku inay xaq isku mida helaan baa haboon.

Isla **Qodobka 13aad Xarafka (N)** waxaan isleeyahay awood badan baa la siiyay oo ka muuqata sida xarafka (N) ku xusan, markaa waxaan ka dhigay sidan ***"Diiwaangalinta*** *Jaangoynta iyo ansixinta qaabdhismeedka* ***Shaqaalaha*** *Hay'addaha dawlada"* sidaas ayaan u badalay.

**Qodobka 13aad** waxaan ku daray oo kaliya sidii hore xubnaha goluhu hore ugu soo jeediyeen in markasta oo la tixraaco qodob dastuurka ah, sidaa darteed, waxaan soo-jeediyayin in meelahaa oo dhan lagu darro, Qodobka 114aad ee magacaabista oo sheegaya **"Magacaabista Xeer-ilaaliyaha Guud, Guddoomiyaha Baanka-dhexe, Guddoomiyaha & Guddida Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo Hantidhawraha**

**Guud, waxa soo jeedinaya Guddoomiyaha Golaha Xukuumadda; waxaana oggolaanaya Golaha Wakiilada ka hor intaan xilka loo dhaarin".**

**Qodobka 16aad Xarafka (D)** oo dhignayd *""In uu leeyahay aqoon heer jaamacadeed ah haystana ugu yaraan shahaadada darajada 1aad (Bechelor Degree)"* waxaan soo jeedinayaa in loo badalo sidan "**inuu leeyahay/leedahay aqoon heer jaamacadeed ah hasytana shahaadada darada 2aad (aqoonta maamulka iyo maaraynta dawliga ah 1-2 degree public administration and management, Human Resource Management, Shareeca law experts, public law experts public health, engineering law experts, crime prevention and community policing experts ama aqoon u dhiganta).**

**Qodobka 19aad** ee xilka iyo waajibaadka gudoomiyaha hay'adda shaqaalaha, waxaan ku soo kordhiyay xaraf cusub oo noqonaya Xarafka (j) una dhigan sidan **"wuxuu ka jawaabayaa xidhiidhada dibada iyo gudaha ee ka imanaya muwaadiniinta, tartamayaasha tartan shaqo iyo codsiyada caadiga ah ee muwaadiniinta Somaliland iyo hay'ddaha ay wada shaqeeyan"**

**Qodobka 32aad** ee imtixaan qaadista **Farqadiisa 6aad** waxaan ku daray xaraf ah (a) **"Imitixaan qaadayaasha waxa magacaabaya madaxda hay'adda u baahan shaqaalaha, gudidda hay'adda shaqaalaha dawlada iyo cidii kale ee khusayso maaliyad ahaan shaqadaasi"**

**Qodobka 34aad** ee tijaabada iyo rasmiyaynta **Farqadiisa 2aad** waxaan u badalay farqadaas sidan *"hadii qofka shaqaalaha ah ee tijaabada ku jira aan lagu qancin xil-gudashadiisa, **kana warbixiyeen madaxdii hay'adda uu la shaqeeyay/say xil-gudasho la'aan kasta,** hay'adda shaqaaluhu iyo gudidda ku xusan Qodobka 32 Farqadiisa 6aad (A) waxay joojinaysaa magacaabista qofkaa shaqaalaha ah iyada oo kuwargalinaysa natiijada tijaabada".*

Waxaan intaas ku darayaa, Qodobkaas xuquuqda shaqaalaha waxaan filayaa waxa shalay la soo jeediyay hal bil mushaharkeed, waxaan isleeyahay 23 hay'addood oo madax-banaan iyo 23 wasaaradood oo dalka ka jira, iyadoo laga hadlay Agaasimayaasha iyo xaqal ciidka, **anigu xaqal ciidka waxaan ku soo kordhinayaa halkaa in laga bilaabo shaqaalaha darajada A1 ilaa darajada D9 oo ah qofka ugu hoseeya labadaas la isugeeyo (A1+D9/2) oo laba loo qaybiyay la siiyo shaqaalaha mid kasta labada ciiddood. WSC.**
**Md. Mustafe Axmed Cabdilaahi (Khayreeye)** ***(11min 29sec):-*** Bismilaahi, Mudane Gudoomiye, Mudanayaasha Sharafta leh waxaan idinku salaamayaa salaanta Islaamka ASC, hadii aan gudo galo dooddayda, waxaan ugu horeysiinayaa soo jeedin aan la qabo mudanyaashii iga horeeyay in xeerkan Lr.97/2021 wuxuu koobsanayaa laba xeer cinwaankiisu waa hal xeer oo ah xeerka shaqaalaha dawlada, waxaan anigu soo

jeedinayaa in la kala saaro sidii xildhibaanadu soo jeediyeen, maadaama hay'addu tahay hay'ad balaadhan, waa cadaaladeed oo shaqaalihii dawlada iyo dhalinyaradii aan doonaynayn in shaqo abuur loo sameeyo ee jaamacadaha ka baxay ay hoos tagayaan, marka waa in la sameeyo xeerkii aassaaska hay'adda shaqaalaha.

Mudanyaaal, sidaad ku aragtaan **Qodobka 3aad** ee Xeerkan ujeedooyinka xeerka oo siyaasaddii guud ee xeerka ka turjumaya, wuxuu sheegayaa oo halkan ku cadaynayaa laba xeer, hadaad eegto **Farqada 1aad** *"In la helo xeer aassaasaya qaab-dhismeedka isla markaana faah-faahinaya waajibaadka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda"* halka **Farqada 2aad** odhanayso *"In la helo xeer lagu maamulo guud ahaan shaqaalaha dawladda"* waxaa halka ka cad inagoo hal xeer ka doodayno siyaasadiisuna tahay in laba xeer lagu sameeyo, marka anigoo ka duulaya waxaan soo jeedinayaa inay muhiimada siino xeerka shaqaalaha dawlada, maadaama oo uu tilmaamayo xuquuqo badan, isla markaana waajibinayo shaqooyin badan oo qaranka loo qaban lahaa, Xeerkii Aassaaska Hay'adda Shaqaalahana aynu sameyno.

Isla **Qodobkaas 3aad** ee Ujeeddada Xeerka waxaan soo jeedinayaa in lagu kordhiyo farqad cusub oo noqonaysaa **Farqad 6aad** taas oo ah **"in dawladu u abuurto muwaadiniinta fursado shaqo oo ay si siman oo cadaalad ah ugu tartamaan".**

**Qodobka 4aad** ee xadka adeegsiga Xeerka, sida ku cad **Farqadiisa 4aad** *"Haddi ay dhacdo iska hor imaad u dhaxeeya qodobada xeerkan iyo qodob kasta oo kale oo ku jira xeer kale oo dhaqan gal ah, ama wareegto madaxweyne, ama xeer-nidaamiye, ama qawaaniin kale oo la xidhiidha maamulka shaqaalaha dawladda ama arrin kasta oo ku xusan xeerkan, Qodobada Xeerkan ayaa la raacayaa"* waxa halka si cad loogu xalaalaysanayaa in lagu buriyo xeerar golayaashii hore ka baxay oo dhaqangal ah oo uu ka mid yahay Xeer Lr. 23/2019, Xeer Lr. 91/2020 iyo Xeer Lr. 76/2016kii, kuwaas oo qodobo badan oo madax-banaanaynaya shaqaalahooda saddexdaas xeer farqad lagu burinayo, marka waxaan soo jeedinayaa in Farqdaas laga saaro Xeerka.

Isla **Qodobkaas 4aad Farqadiisa 7aad** waxay tilmaamaysaa hay'addo aan xeerkan lagu dabaqaynin, hay'addahaas anigu waxaan ku soo kordhiyay waxa ka mid ah hay'addaha dawlada ee Madaxweynuhu magacaabo Gudoomiyayaashooda iyo ku-xigeenadooda, Ciidamada qaranka shaqaalaha baarlamaanka (Golayaasha Guurtida iyo Wakiilada), xubnaha garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyayaasha, qofkasta oo lagu shaqaaleysiiyo mudo go'an sida la-taliyayaasha iyo khubarada loo qaato shaqo kooban. Waxaan ku sii daray farqada ah, Shaqaalaha xafiiska Hanti-dhowrka guud ee Qaranka iyo Shaqaalaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

**Qodobka 6aad** ee tilmaamaya waajibaadka shaqaalaha iyo **Qodobka 7aad** ee Xuquuqda shaqaalaha, sidaynu wada ognahay xuquuq iyo waajibaad waxa horeeya xuquuqda oo xuquuda markuu helo ayaa waajib ka dhalanayaa, markaa waxaan soo jeedinayaa in Qodobka 7aad la soo horeysiiyo xuquuqda oo uu noqdo Qodobka 6aad, halka waajibaadka lagu tilmaamay Qodobka 6aad loo raro Qodobka 7aad.

Arrimihii uu ka hadlay Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaaluhu markuu inoo yimi ee ka hadlayay arrimaha siraha, anigu waxaan qabaa hadaan la cadayn arrimahaasi ciidamada ayay ku fiican yihiin ee shaqaalaha dawlada kuma fiicna mar hadii aan la cadayn nooca siraha, marka waxaan soo jeedinayaa waa in laga saaro.

Mudane Gudoomiye, Xeerkii hore ee shaqaalaha dawlada ee law Lr. 96 hadaad eegto wuxuu ka koobnaa 46 qodob, waxaana laga soo dheegtay oo loo tixraacayay Qodobka 130aad farqadiisa 5aad ee Dastuurka, waxaana xeerka laga soo dheegtay 1962 Xeerkii shaqaalaha dawlada markii aynu dawladii hore aynu ka mid ahayn, waxaana waajibnaya qodobkaas 130aad oo sheegayay inaynu xeerarkii hore ku dhaqmayno inta xeerar la mida laga soo saarayo, markaa labadan xeer ee isku jiraa waa 80 qodob, waxaaba adkaanaysa siduu qofka shaqaalaha ahi inuu ka bogto intuu akhrinayo qodobada badan iyo waajibaadka hay'adda shaqaalaha oo waxay ka leexin kartaa xuquuqaadkii iyo waajibaadkii xeerku siiyay inuu tilmaamo.

Waxa halka ka cad in labadani xeer aanay is-dabaqaynin oo is-waafaqaynin, laguma xaalaysan karo xeerkan in la yidhaado hay'addaha maamul wanaaga, komishanka xuquuqal Insaanka iyo hantidhowrka guud ayay xeerarkoodii aassaaska iyo shaqaaluhu wada socdaan, noqona mayso sharci in labadan xeer la is-raaciyo, waxaana u arkaa inay kala miisaan culus yihiin.

Gol-daloolooyinka xeerka waxa ka mid ma jiro qodob sheegaya mudo xileedka gudidda xeerka, iyadoo hadana ay jirto qodobo sheegaya in xubinta geeriyooto ama banaysa xubinimadii lagu soo magacaabay ay xubinta soo badashaa dhamaysanayso muda xileedkii xubinta lagu badalay, mudo xileed qoranina ma jiro, markaa halka waxaad ka arkaysaa in xeerkaasi diyaar ahayn. Markaa yaanu caqab ku noqonin xeer aan diyaar ahayn xeerkii shaqaalaha dawlada ee xuquuqaadkoodu ku xidhnaa.

Dhaliilaha Xeerka waxa kale oo ka mid ah hadaad eegto **Qodobka 19aad** ee Xilka iyo Waajibaadka **Xarafka (E)** oo u qoran "wuxuu socodsiinaya hawlaha maaraynta iyo maamulka ee hay'adda" halka **Qodobk 23aad** ee agaasimaha guud ay tilmaamayso in agaasimaha guud noqonayo madaxa guud ee fulinta hawlaha hay'adda, marka halkaasina {contradiction} bay isku samaynaysaa. Waxayna tilmaamaysaa in xeerkaasi xeer diyaarsan ahayn.

Waxaan la qabaa Mudanayaashii soo jeediyay in **Ciidka shaqaalaha la siiyo bil mushaharkeed**, waayo waxaynu dareen sanahay in bisha mushaharkeedu yahay wax kooban oo aanay marka horeba ku filnayn.

Hadaan ku noqdo **Qodobka 3aad** ee Ujeedooyinka Farqada 3aad ee sheegaysa in la qeexo hab-raaca xulista, hab-raaca xulistu waa eray dhan walba loo adeegsan karo, marka kalmada xulista waxaan soo jeedinayaa in loo badalo "**tartan".**

Aad buu Goluhu u mahadsan yahay qodobadaas uun baan anigu ku soo koobayaa.

**Md. Fu'aad Axmed Diiriye** ***(10min 18sec):-*** Bismilaahi, Mudane Guddoomiye waad mahad-santahay, dhamaan Mudanayaasha iyo Shaqaalaha kale ee Golaha Waan idin salaamayaa ASC.

Waxaan ka hadlayaa dhowr qodob, **Qodobka 14aad** oo ka hadlaya Qaab-dhismeedka hay'adda shaqaalaha, marka qaab-dhismeedkaas waxa uu ku soo koobayaa laba qodob, qodobka kowaad wuxuu qeexayaa gudoomiyaha, ku-xigeenka iyo gudidda hay'adda shaqaalaha, farqada 2aad wuxuu kaga hadlaya agaasimaha, waaxyaha iyo xafiisyada gobolada, waxaan soo jeedinayaa in qodobkaas lagu soo kordhiyo **"Xafiiska Imtixaanaadka shaqo-galinta"** oo xafiis gooniya loo sameeyo iyo gudi gooni ah oo ka kooban 7 xubnood oo la dhaaariyo gudiddaas, ka dibna gudiddaas lagala xisaabtamo qaabka shaqooyinka banaanaada loo shaacinayo iyo qaabka imtixaanka loo qaadayo, hadii gudiddu maalinba cid u saarto waxay noqonaysaa in cadaaladii halka ku fiicnayn, marka qaab-dhismeedka hay'adda waxaan soo jeedinayaa in lagu daro xafiiskaas imitixaanka shaqo-galinta.

**Qodobka 18aad** waxaan la qabaa Xildhibaan Sh. Kucadeeye illaahay khayr ha siiyee in **Farqada 2aad** ee **Qodobkaas 18aad** meesha laga saaro, mar hadii wax muddo ah oo la mudeeyay gudidda aanay jirin oo ku imanayso magacaabis Madaxweyne iyo xil ka qaadis Madaxweyne, marka waa in farqadaas 2aad laga saaro meesho.

**Qodobka 26aad** oo ka hadlaya isna Agaasimayaasha, marka qaabka agaasimaha marka shaqada la saaro inuu sii qaadanayo mushaharkii iyo gunooyinkii kala badh, marka agaasimaha shaqada laga saaro hadii looga saaro xil-gudasho la'aan, marka agaasimaha meesha laga saaray ma mid looga saaro hawlo siyaasadeed baa mise waa mid looga saaray qaab musuq-maasuq oo kale, marka Qodobkaas Farqadiisa 7aad waxaan rabnaa in xoogaa la cadeeyo agaasimaha shaqada laga saarayo, hadii agaasimaha shaqada looga saaro hawlo musuqmaasuq iyo hanti lunsi oo maxkamad horteed lagaga cadeyo inuu aanu wax xuquuq ah ku yeelanayn halkaas, hadiise agaasimaha shaqada laga saaray inuu ka sii mid noqdo shaqaalaha ku wareegaya hay'adda shaqaalaha,.

Maadaama oo dhaqaalihii wadanku noocaas yahay waxaan soo jeedinayaa inuu ka sii mid noqdo muddo hal sano ah, xuquuqaadka uu qaadanayaana noqdo mushaharkiisii

aassaasiga ahaa, laakiin laga saaro badh gunadiisa, markaa halkaasi noqoto inuu sanad ka sii mid noqdo uuna sii qaato mushaharkiisii aassaasiga ahaa oo kaliya. Sidoo kale intaas uu sanadka ah ee uu banaanka joogo hadii uu jabiyo sifihii ka reebanaa ee siyaasada iyo xisbiyada inuu ka muuqdo laga sii saaro inuu shaqaale sii ahaado.

**Qodobka $27^{aad}$** ee muujinaya jaantuska qaab-dhismeedka hay'adda, Farqada 1aad ee tilmaamaysa in hay'ad waliba diyaarinayso jaantus qeexaya qaab-dhismeedka, halkaa isbadal baa imana kara, marka waxaan rabaa in laga dhigo sanadle oo lagu soo kordhiyo in hay'addu qaab-dhismeedkeeda u soo saarto si sanadle ah maadaama ay is-badali karto, miisaaniyadii, maadaama extension lagu sameyn karo oo xafiisyo cusub lagu soo dari karo, inay sanadle u soo saarto hay'addiiba ama wasaaradiiba.

**Qodobka $31^{aad}$** ee ka hadlaya qaybaha shaqaada, qaybahaas A ilaa D, halka ay ka leedahay qaybta **"A"** inuu haysto ugu yaraan shahaado jaamacadeed ama waayo aragnimo u dhiganta, waayo aragnimadaas waxaan isleeyahay gudiddii hadba kay u xaglinayso, marka waxaan soo jeedin lahaa in lagu soo koobo qaybta A shahaado Jaamacadeed, qaybta B Shahaado dugsi sare, qaybta C shahaado dugsi dhexe ah, qaybta D ma bixino shahaado dugsi hoose, markaa qaybta D waa shaqaale hoosaad, inta kalena aynu ka saarno waayo aragnimo u dhiganta.

**Qodobka $32^{aad}$** ee ka hadlaysa Imtixaanka shaqo qorista, **Farqadiisa $5^{aad}$** waxa lagu kala xulanayaa waayo aragtinimadooda ayay leedahay, waayo aragnimadaas xoogaa mad-madaw baa soo galaya, marka anigu waxaan soo jeedinayaa in hadii ay isku natiijo noqdaan laba iyo wixii ka badani in mar labaad imtixaan dib looga qaado cidii darajadooda imtixaanku isku mid noqoto, taas ayaa uga dhaw xaga cadaalad baan isleeyahay.

**Qodobka $14^{aad}$** ee qaab-dhismeedka waxa lagu muujiyay machadyo, machadyadaas wax authority ah oo la siiyay cidii maamulaysay iyo sida loo maamulayo lama sheegin, kaliya waa lagu xusay, shaqaalaha loo sameynayo aqoon korodhsi iyo sida loogu samaynayo lama sheegin, marka machadyadaas hay'adda shaqaalaha waxaan rabnay in qodob gooniya laga dhigo, qodobkaas oo lagu xusayo awoodeeda, cidda magacaabaysa masuulkeeda, qaabka loo xulanayo, shaqaalaha loo samaynayo aqoon korodhsiga sida loo xulayo, marka qodob gooniya in laga dhigo oo lagu xuso maamulkeeda, shaqaalaha iyo qaabka shaqaalaha ay aqoon korodhsi ugu sameynayo iyo siday ku xulaynayso. WSC.

**Md. Maxamed Jaamac Liibaan** ***(11min 02sec):-*** Bismilaahi, Mudane Guddoomiye, Mudnayaasha Golaha Wakiilada ASC, salaam ka dib halkan waxaan ku soo koobayaa qodobada Xeerka shaqaalaha ku yaal xeer lr. 97/2021.

Hadaba, hadaynu is xasuusino inagoo ka duulayna masuuliyada Golahan Wakiilada ee samaynta xeerarka lagu dhaqayo dadka reer Somaliland oo leh duruufo iyo baahiyo kala

duwan, sidoo kale xeerarku u kala muhiimsan yihiin dhamaystirka adeegyada iyo inay adeegyadu wada gaadhaan dalka kuna salaysnaadaan horumar dhan walba ah.

Ugu horeyn, sida mudnayaashii iga horeeyay sheegeen xeerkani wuxuu isugu jiraa laba xeer oo kala ah xeerka hay'adda shaqaalaha iyo Xeerka hay'adda shaqaalaha dawlada oo labaduba ay ku cadyihiin cutubka 3aad ee xeerkan gudihiisa ee asbaabaha xeerka ee la soo xusay.

Anigoo mudanayaasha kala mab'da ah inuu xeerku laba xeer ka kooban yahay, in la cadeeyona ku raacsan, laakiin waxaan soo jeedin lahaa isagoo xeerkan uun ah mudo badana la soo galiyay in isla xeerkan gudihiisa uun lagu xuso inuu xeeku yahay laba xeer oo ah xeerkii hay'adda shaqaalaha iyo Xeerkii hay'adda shaqaalaha dawlada, magaciisuna noqdo "**Xeerka Hay'adda Shaqaalaha iyo Shaqaalaha Dawlada"**. Sidoo kale ka dooddista midba dhinac la iska taago oo labada xeerba laga dooda.

Hadaan ku horeeyo hay'adda shaqaalaha qaab-dhismeedkeeda ee **Qodobka $14^{aad}$** oo ka kooban laba farqadood oo si guud u sheegaya, **farqada $1^{aad}$** gudidda hay'adda shaqaalaha oo ka kooban gudoomiye, ku-xigeen iyo xubnaha gudidda iyo **farqada $2^{aad}$** oo ka hadlaysa agaasimaha, waayo, xafiisyo goboleed iyo machadka tababarka, hadaba qodobkaasi oo sawir guud ka bixinaya qaab-dhismeedka hay'adda shaqaalaha iyo qodobada soo socda ee laba bilaabo Qodobka 15aad iyo Qodobka 23aad si waafiya uma faah-faahinayaan qaybaha ay ka kooban tahay hay'adda shaqaaluhu ee ku cad Qodobkaas 14aad. Tusaale qodobka 15aad wuxuu soo koobayaa laba farqadood oo sheegaya magacaabis iyo buuxinta xubinta banaanaatay.

Sidaa darteed, anigu waxaan soo jeedinayaa in halka lagu daro iyadoo laga duulayo masuuliyada culus ee ah hay'adda shaqaaluhu inay hesho kalsooni ay ku hanan karto shaqadeeda.

- In gudidda Hay'adda shaqaaluhu yeelato muddo xileed aan ka yarayn 5 sanno.
- In xilka qaadista ka horaysa mudo xileedka ee gudidda oo dhan ama xubno gudida ka mid ah ay yeelato asbaab loo raacayo xil ka-qaadistooda oo sababi karra.

Qodobada ku xiga ee **$19^{aad}$ iyo $20^{aad}$** ee ka hadlaya xilka iyo waajibaadka gudoomiyaha iyo gudoomiye ku-xigeenka oo ku kooban xilkooda gudoomiye iyo gudoomiye ku-xigeen oo kaliya, laakiin kuma cad markay gudi ahaan u shirayaan waxa xilkooda iyo waajibaadkoodu, iyadoo qodobada gudidda ka hadlayaa yihiin laba qodob oo kala ah $21^{aad}$ iyo $22^{aad}$ oo iyaguna ku kooban kulama gudidda iyo go'aamada gudida oo kaliya, hadana ay ku jirto go'aanada gudiddu waxay ku ansaxayaan hal-dheeri xubnaha fadhiya oo kaliya.

Laakiin ma cadda awoodaha gudidda iyo waxay gudiddu go'aan ka gaadhi karaan, sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa halka inagu lagu qeexo awoodaha gudidda iyo waxay shaqo qabanayaan sida shaqada ay xilsaaran tahay hay'adda shaqaaluhu ee ay ka mid yihiin nidaamka shaqaalaysiinta, anshax-marinta, cabashooyin, qodobadaas oo ku jiraan gudi baa loo saaraya ay ku jiraan gudidda hay'adda shaqaaluhu, taas oo ay caday xubnaha shaqadaas qabanaysaa in aanay ahayn gudidda hay'adda shaqaalaha.

Sidoo kale, **Qodobka 23aad** ee ka hadlaya xoghayha gudidda oo hadana farqadeeda 1aad sheegayso agaasimaha, marka ciwaanka iyo nuxurka qodobkaasi isma waafaqsana, maaha xoghayaha ee waa agaasimaha guud, marka agaasimaha guud iyo waajibaadkiisa shaqo isna kuma cadda. Sidoo kale Qodobkan waxa ku jira maxahado tababar, lagumana cadaynin qaab-dhismeedka maxahadaadaas, waxa kaliya oo qoran waxay yeelanaysaa maxahado, sidaynu wada ogsoonahay waxa jira machadka tababarka shaqaalaha oo leh agaasime, agaasimhaasna uu wakhtigan soo magacaabo Madaxweynuhu.

Sidaynu dhowaan la soconayna, waxa la aassaasay maxahadka tababarada shaqaalaha dawladaha hoose isna halkan kuma cadda, marka qaab-dhismeedka hay'adda shaqaalaha waa in machadku siduu noqonayo lagu cadaayo. Intaas waxaan kaga gudbayaa dhinaca xeerka hay'adda shaqaalaha.

Dhinaca, Xeerka Shaqaalaha Dawlada aan is dultaago, waxaan xildhibaanadii iga horeeyay waxaan la qabaa **Qodobka 26aad** ee Agaasimaha Guud, sidii la xusay agaasimaha guud awoodiisa magacaabista in madaxweynuhu leeyahay dastuurkay ku cadahay, sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in aanu shaqaale dawladeed noqon mar hadii madaxweyne magacaabayo isbadalkiisuna uu badanayo, waa inuu ku koobnaado liiska siyaasiyiinta oo ha laga saaro shaqaalaha dawlada.

Qodobka 4aad ee xadka adeegsiga xeerka, waxaan xildhibaan timo-jilic ku raacsanahay in adeegsiga xeerka la soo koobo oo laga saaro xeerarka uu burin karo oo ay ka mid yihiin hay'addaha kale ee dastuuriga ee ku xusan Qodobka 113aad ee dastuurka ee kula jira hay'adda shaqaalaha, wixii xeer leh aanu xeeraarkooda burinayn laakiin inta kale uu khuseeyo, marka adeegsigiisa waa in halka lagu soo koobo, waana awood dheeraada oo xeerar kale ku noqonaya gaf iyo iska horimaad.

Qodobka saacadaha shaqada, anigu waxaan soo jeedinayaa in saacadaha shaqada laga dhigo wiigii 40 saacadood oo ku imanaya shan maalmeed shaqo oo midkiiba 8 saacadood yahay, fasixiina laba maalmood laga dhigo oo khamiista iyo jimcaha shaqaalaha dawladu fasax noqdaan.

Waxaan ku raacsanahay xildhibaan Axmed Jaamac Saalax in fasaxa qoyska 7 cisho laga dhigo, xaqal ciidkana bil mushaharkeed.

Waxa kale oo Xildhibaan Sh. Axmed Dayib ku raacsanahay qodobkii horumarinta mushaharka shaqaalaha

Ugu dambeyn, waxaan soo jeedinayaa Xeerkani maadaama sida aan sheegnay uu yahay laba xeer oo isku jira, waxyaabo badan oo aynu xusnay xildhibaanaduna isku raacsan yihiin ururin u baahan yihiin, marka Golewaynuhu Xeerka ka dooda waxaan soo jeedinayaa in gudi gaar ah loo saaro taas oo isku soo hagaajisa.

**Md. Jamaal Cali Aadan** ***(07min 52sec):-*** Guddoomiyaha Golaha Wakiilada, Guddoomiye ku-xigeenada Mudanayaasha Golaha Wakiilada, shaqaalaha, saxaafada iyo marti-sharaftaba waxan idinku salaamayaa ASC.

Mudanayaal, sidaynu ognahay waxaynu ku jirnaa doodda Xeerka shaqaalaha Dawlada oo ah xeer aad u muhiima, xeerkaas inna horyaalo oo ay tahay inaynu ka gudano waajibaadkeena dastuuriga ah oo kaabis iyo wax ka badal ay inoo banaantahay si loo helo shuruuc iyo xeerar haga shaqaalaha dawlada.

Mudane Gudoomiye, Mudnayaal, waxaan halkan idinkula wadaagayaa qodobo aan isleeyahay waxay mudan yihiin wax ka badal, sidoo kale waxaan soo jeedinayaa soo jeedimahayga aan isleeyahay kaabis ha lagu sameeyo qaar ka mid ah qodobada xeerka oo kala ah Qodobada 4aad, 7aad, 14aad, 35aad, 70aad, 71aad iyo 79aad.

Mudane Guddoomiye, Mudnayaal, ugu horeyn sida ka muuqata **Qodobka 12^aad^ Farqadihiisa** waxa muuqata in xeerkani yahay laba sidii xildhibaanadii horeba sheegeen, magaca xeerkana waxa  ka muuqata markaad arkhrido xeerka shaqaalaha Dawlada, waxa la qariyay inuu laba xeer yahay xeerkani, **qodobkaas 12^aad^** farqadihiisa aan sheegayna waxa lagu cadeeyay xeerkani inuu laba xeer kooban yahay oo lagu aassaasayo hay’adda shaqaalaha dawlada, sidaa darteed, waxaan la qaba xildhibaanadii soo jeediyay in laba loo kala saaro.

**Qodobka 4^aad^** ee Xadka Adeegsiga Xeerka, runtii waxaan qabaa halkaas hay’addo kale inuu xeerkani ku xadgubayo, sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa in laga saaro hay’addahaas uu ku xadgudbayo oo waan la qabaa xildhibaanadii iga horeeyay.

**Qodobka 35^aad^** wuxuu muujinayaa hay’adda shaqaalaha dawlada oo ah hay’ad madax-banaan, wuxuu meel kaga dhacayaa madax-banaanidaas hay’adda shaqaalaha dawlada wuxuuna muujinayaa oo gacanta u galinayaa qorista shaqaalaha cid kale ku weheliso, sida darteed, qodobkaas 35aad ee magacaabista gaarka ah ee shaqaalaha waxaan gabi ahaanba soo jeedinayaa in meesha laga saaro farqadihiisa 1^aad^ iyo 2^aad^.

**Qodobka 41^aad^** waxaan la qabaa xildhibaanadii iga horeeyay sidii ay uga hadleen.

**Qodobka 70aad** oo ka hadlaya fasaxyada qoyska, runtii qodobkaas waxaan la qabaa in laga dhigo oo aan soo jeedinayaa 7 cisho in laga dhigo ugu yaraan fasaxa masuuliyada qoyska.

**Qodobka 71aad** sida ka muuqata, waxa muuqata runtii xuquuqaadka shaqaalaha uu xeerkani si wayn uu ugu xadgubayo, shaqaalaha oo aynu ognahay inay yihiin hal-bawlaha uu qarankani ka socdo, iyagoo runtii aad iyo aad u mihiim, marka hadii qodobada xeerka aad qaar eegto waxaad moodaa in si bini'aadmiga aan loola hadli Karin shaqaalaha uu ula hadlayo.

Marka **Qodobkaas 71aad** oo u dhigan *"Madaxa Hay'adda Dawladeed, Baahi shaqo awgeed, wuxuu qofka shaqaalaha ah dib uga soo celin karaa fasaxa sannadlaha ama fasaxa aan caadi ahayn, fasaxa waxbarashada ama fasaxa masuuliyadda qoyska ee ku xusan Qodobada 65, 66, 69 iyo 70, ee xeerkan, iyadoo inta dhiman fasaxiisa mudo kale la siinayo ama loogu bedelayo lacag"* waxa halka ku qoran qof shaqaae dawladeed ah oo fasax ku helay si xeerkan waafaqsan in markii loo baahdo intuu masuul hay'addeed la hadlo haduu doono isagoo dalka dibadiisa wax ka baranaya oo waxbarshadiisa intii u dambeysay ku jira, wuxuu xeerkani sheegaya in laga soo celinayo fasaxa isagoo aan ogolaansho laga helin, sida darteed, waxaan soo jeedinayaa Mudane Gudoomiye, Mudanayaal, in Qodobkaas 71aad gabi ahaanba meesha laga saaro, laguna badalo in shaqadu uu ku soo noqon karo hadii isaga ogolaansho laga helo.

**Md. Mubaarik Xuseen Maxamed** ***(06min 02sec):-*** Bismilaahi, Mahadsanid Mudane Gudoomiye, waxaan ka hadlayaa **Qodobka 4aad** ee Xadka adeegsiga Xeerka **Farqadiisa 3aad** oo sheegaysa xoghayaha fulinta dawladaha hoose degmooyinka leh golayaasha deegaanka iyo xoghayaha fulinta gobolada waxay ka imanayaan waa shaqaale dawladeed, waxaan leeyahay waxay si cad uga soo hor jeedaa xeerka ismaamulka gobolada iyo degmooyinka xeer no 23/2019 Qodobka 49aad farqadiisa 2aad oo xaq siinaya si siman muwaadiniinta Somaliland. Waxaa kaloo baal marsan yahay qodobo dastuuriya oo ay ka mid yihiin qodobka 111 aad farqadiisa 9aad iyo qodobka 8aad ee dastuurka jamhuuriyada Somaliland farqadiisa 1aad.

Markaa mudanayaal waxaan soo jeedinayaa in **farqadan gabi ahaamba laga saaro maadaama ay ka hor imanayso qodobo dastuuriya iyo xeerar dhaqan gal ahba**. Mudanayaal waxaan kaloo soo jeedinayaa **Qodobka 4aad farqadiisa 7aad lagu soo kordhiyo xarafka J oo ay ka mid yihiin shaqaalaha komishanka dooroshooyinka qaranka,** oo aan lagu dabiqi Karin xeer kale sida uu dhigayo xeerka dooroshooyinka guud iyo diwaan galinta cod bixiyayaasha xeer 91/2020.

**Qodobkiisa 22aad** oo odhanaya shaqaalaha komishanku kamma mid aha shaqaalaha dawlada waanay ka madax-banaan yihiin waxaana lagu maamulayaa xeer-nidaamiye ay samaynayaan komishanka dooroshooyinku.

Mudanayaal waxaan kaloo soo jeedinayaa **Qodobka 4aad farqadiisa 7aad** xarafka F eek u cad lifaaqa ay soo caliyeen guurtiddu ee sheegaya inaan lagu dabiqi Karin xeerkan haayadaha madaxa banaan eee ay ka mid yihiin bangiga dhexe wakaalada biyaha iyo dawladaha hoose laga saaro meesha, maadaama wasaarada Cadaalada oo ah wasaarada kaliya ee ku xusan dastuurka Qodobkiisa 106aad shaqaaleheedu ka mid yihiin shaqaalaha dawlada ma jiro xeer ama qodob diidaya in haya' daha madaxa banaan lagu maamuli Karin xeerkan Xeer Lr. 97/2021 marka Sida awgeed, Xarafka (F) ee ku cad lifaaqa guurtiddu soo calisaya looma cuskan karo qodobka 122 ee dastuurka jamhuuriayda Somaliland ee sheegaya in hay'ad kasta oo ka mida haayadaha dawaladu ay yeelanayso xeer gaara oo qeexaya waajibaadkeeda qaab dhismeedkeeda. Xeerkaas ma qeexayo mana sheegayo qaabka loo qaadanayo shaqaalahooda iyo qaabka loo maamulayo toona, waxaa cadaana hadaba in shaqaalaha hay'adaha madaxa banaani ay yihiin shaqaale dawladeed laguna dabaqayo xeerkan.

Mudanayaal waxaan kaloo qabaa **Qodobka 26aad** ee ka hadlaya agaasimayaasha guud in laga saaro meesha sida ay soo jeediyeen mudanayaashii hore.

**Qodobka 41aad** ee sheegaya xaqal iidka waxaan soo jeedinayaa inuu noqdo **bil mushaharkeed labada ciidood**, sida ku cad xeerarka caalamiga ah iyo xeerka shaqaalaha rayidka ah xeer no 31 2020.

**Qodobka 70aad** ee sheegaya fasaxyada waxaan soo jeedinayaa **in fasaxaasi nodo 7 cisho.**

**Qodobka 79aad** ee dhaarta shaqaalaha waxaan gabi ahaanba soo jeedinayaa **in laga saaro** maadaama aanay dastuuri ahayn.

**Qodobka 10aad** ee sheegaya saacadaha shaqada waxaan soo jeedinayaa **in saacadaha shaqada la kordhiyo oo laga dhigo 7 ilaa 2 da 5 cishana la shaqeeyo maalmahan nasashaduna ay noqdaan jimcaha iyo khamiista.**

Mudanayaal ugu dambayntii waxaan soo jeedinayaa in xeerkan lagu soo daro **shaqaalaha aan joogtada ahayn ama ku meel gaadhka ah qodob cadaynaya iyo in xeerkan lagu daro overtime,** waayo meel overtime kaga qoran tahay ma jirto.

Waxaan kaloon soo jeedinayaa **in Xeerkan loo saaro Guddi farsamo** oo soo akhrida oo ku darta doodii mudanayaasha dabadeedna golaha la hor keeno. Sidoo kale waxaan ku raacsanahay xildhibaanadii hore in xeerkan isugu jiro 2 xeer xeerkii aasaaska haayada shaqaalaha iyo xeerkii shaqaalaha dawlada, markaa magaciisana la badalo oo laga dhigo xeerka aasaaska haayada shaqalaha iyo xeerka shaqaalaha dawlada ama laba loo kala saaro, waad mahadsan tihiin.

**Md. Eng. Xirsi Cabdilaahi Xirsi** ***(08min 05sec):-*** Bismilaahi, Mahadsanid Gudoomiye, intaana qodobada u galin waxaan ku raacayaa Mudanayaashii badnaa ee soo jeediyay in Xeerkan loo kala saaro laba xeer, xeerkii hay'adda shaqaalaha gooni loo saaro, xeerka

shaqaalaha dawladana gooni loo saaro, mudanayaal halkan anigu waxaan ku codsanayaa xeerkani muu siinin xaqii shaqaaluhu lahaayeen oo dhamaystiran, sidoo kale muu siinin hay'adda xaqeedii oo dhamaystiran, labadii xeer buu is-dhexgaliyay labadiina yac-yacood buu ka dhigo midba in buu ka soo qaatay.

Hadaan ku horeeyo xaga shaqaalaha, inuu xeerkani kala dhiman yahay waxa kuu cadeynaya markaan xeerkan la akhrido xeerka 31/2004 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah aad buu xeerkaasi uga xeel-dheer yahay Xeerkan, aad buu uga xuquuqo badan yahay, xuquuqaha uu xeerkaasi dheer yahay waxa ka mid ah Qodobkiisa 22[aad] oo ka hadlaya xaqsiinta shaqaalaha, Qodobkiisa 23[aad] oo ka hadlaya kharashaadka shaqaalaha, Qodobkiisa 43[aad] oo ka hadlaya adeega ay goobta caafimaad yeelanayso ee aassaasiga ah hadii dhaawacyo deg-dega ah dadka gaadhaan sida dhiig-joojin oo kale in loo sameeyo, Qodobkiisa 44[aad] oo ka hadlaya caymiska shaqaalaha, Qodobkiisa 45[aad] oo isna ka hadlaya dhaawacyada iyo xanuunada ay sababaan shaqadu oo hadii qof shaqaalaha dhaawac shaqadu u keento muxuu xaq ah oo uu leeyahay.

Dhamaan xuquuqihii shaqaalaha rayidka waa loo qoray, laakiin shaqaalihii dawlada looma qorin, mudanayaal, shaqaalaha dawlada ayaa ka muhiimsan shaqaalaha rayidka ah, marka shaqaalaha dawladu hadaanay ka xaq badnayn yaanay ka xaq hoosayn shaqaalaha rayidka ah, marka intaasba waxaan soo jeedinayaa in laga soo dhex qaado lanna dhex keeno Xeerkan, hadii wax lagu dar-darayona lagu sii daro. Laakiin intaasiba way ka dhiman tahay xeerkan aynu hada gacanta ku hayno.

Sida ka muuqata confusion ama khal-khal baa ka muuqda oo ku jira markuu qofku akhrinayo Xeerkan, khal-khalkaasi wuxuu ka muuqday Golihii hore, Golaha Guurtida wuu ku jira marka loo eego xeerkan, xeerkani maadaamo hay'addii shaqaaluhu markii ay isa soo dhex-galisay shaqaalaha, waxa is-dhex galay yaa hay'adda ka madax-banaan yaanse ka madax-banaanayn? Shaqaalaha hay'dda ka madax-banaani maxay xuquuq leeyihiin?

Hadii aynu nidhaahno hay'ad heblaayo way ka madax-banaan yihiin hay'adda shaqaalaha ma waxay la micno tahay golahani shaqaalahaas waxay ku tuureen xaq la'aan oo golahan baa dambiga la saari doonaa, mise waxaynu ku tumanaa xaqii dastuuriga ahaa oo hay'ad kasta madax-banaanayd waxaynu hoos keenaa hay'adda shaqaalaha sida uu xeerkani qorayo.

Marka halka lafteeda waxaad moodaa inay ciddii xeerkan soo samaysay ay confusion-kaas ugu tallagashay, in dabadeedna la yidhaahdo aynu madaama xeerkani muhiim yahay aynu marka ka eegno wax badan oo dalkeenu ku soo dhaqmayay oo ahaa waa xale xul maaha, laakiin waxaynu maraynaa 2021 waana wakhtigii xulka. Marka xeerkani siduu ujeedaa waa xale waxaan soo jeedinayaa xeerkan waa in la celiyaa, hadii aynu ka

baqayno inuu dhinto aynu gudiddeena hada sameynayno ee Gudidda Arrimaha Bulshada aynu u celino oo iyagu dib ha u qaataan.

Dhowr qodob baan ka sii yara taaban doonaa oo markaa gudiddaas ay taabtaan aan jecelahay inay eegaan.

**Qodobka 10aad Farqadiisa 1aad** oo ka hadlaya in shaqaalaha dawladu shaqeeyaan 8 saacadood maalintii, laakiin qodobku muu sheegin xilimaa shaqada la soo galayaa, xilimaase laga baxayaa, inta badan sida fahamkaygu yahay shaqaaluhu waxay soo galaan 7da ilaa 2da, laakiin ma la shaqeeyaa wakhtiga inta le'eg,wakhtigaasise shaqaalaha muyuu ku badan yahay oo 8da saacadood ma 7ba ayaynu uga dhignaa laakiin ha shaqeeyaan sacadahaas oo rasmiya, marka halka waxaan soo jeedinayaa in lagu daro wakhtigu shaqadu bilaabmayso iyo wakhtiga shaqadu dhamaanayso.

Waxaan ku soo darayaa **Qodobkaas 10aad Farqad cusub** oo odhanaysa **"waa inay shaqaaluhu yeeshaan xaadiris"** ha noqoto warqad la isku qoro ama ha noqoto aalada farta la saaro eh.

**Qodobka 14aad** oo ka hadlaya hay'addii shaqaalaha oo marka gooni loo saaro ayay hoos imandoontaa, **Farqadiisa 2aad (D)** wuxuu ka hadlay machadka tababarka, machadka tababarku wuxuu ku aassaasan yahay inuu ka madax-banaanaado hay'adda shaqaalaha, waayo, wuxuu tababar siinayaa dhamaan shaqaalaha hay'ddaha ka madax-banaan hay'adda shaqaalaha, marka isaga waxaan soo jeedinayaa in lala sugo wakhtigiisa oo uu ka hoos baxo hay'adda shaqaalaha oo uu noqdo hay'ad iyaduna gaar ah oo xeerkeeda leh.

**Qodobka 24aad Farqadiisa 2aad (E)** waxay sheegaysaa oo ku qoran qayb English ah oo is idhi markii la turjumayay ayaan laga saarin, marka intaas ha laga saaro. Isla qodobkaas **Farqadiisa 3aad** waxay sheegaysaa in xeer-nidaamiye darajooyinka lagu cadeyn doono, marka waxaan soo jeedinayaa xeer-nidaamiyahaasi lifaaq ha u noqdo xeerka hay'dda shaqaalaha oo marka isagana arragno isagoo lifaaq ah si aynu u aragno shaqaaluhu siday u kala saraynayaan oo arrintaasi u cadaanaysaa.

**Qodobka 24aad** Qodobkaas waxaan la qabaa Xildhibaanadii iga horeeyay, **Farqada 7aad** ee Qodobkaas oo dhanaysa Agaasimuhu hadii uu ka tago shaqada waa inuu sii qaato mushaharka, waxaan soo jeedinayaa waa in laga saaro oo aanu wax mushahar ah qaadan hadii uu shaqada ka tago oo uu dadkaa kale ee shicibka ah la mid noqdo.

**Qodobka 30aad Farqadiisa 3aad** oo waxay odhanaysaa *"Hay'adda Shaqaaluhu tix-galin gaar ah ayay siinaysaa dadka naafadda ah iyo dadka kale ee laga tirada badan yahay ama kooxaha la-faquuqo"* laakiin waxay sii raacisay waa haday ogolaato Golaha Xukuumadu, marka siday golaha xukuumadu u ogolaanaysaa, halka waxaan doonaynaa in la cadeeyo, waa muhiim in la siiyo tixgalin gaar ah dadka naafada ah, waa muhiim in la siiyo tixgalin

gaar ah dadka laga tirada badan yahay maadaama oo ay shaqaalaha ku yaryihiin, marka waxaan soo jeedinayaa in laga saaro **"hadii xukuumadu ogolaato"** laakiiin ha lagu soo daro waxa loo ogol-yahay, ma boqolkii qof baa tiro go'an looga ogolaanayaa, Marka hadalka tiro cad waa in loogu soo qoro.

**Qodobka 70aad** oo ka hadlaya fasaxa qoyska xildhibaanadii hore ayaan ku raacsanahay in halka saddexda cisho laga dhigo **toddoba (7) cisho**, sida caadiga ah ee aynu naqaano arooska oo kale todobaad bax ay noqoto.

Mudanayaal, waxaan ku soo koobayaa, waa muhiim in aynu xeerkan kala saarno, waa muhiim inaynu xeerkan dib u celino. WSC.

**Md. Cabdilaahi Muuse Cabdi** ***(6min 47sec):-*** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, wa bihi-nastaciinu calaa-umuuri Dunyaa Wa-Diin, iyada oo intii badnayn la sheegay, ugu horay waxaan Qabaa in sidii mudanayaashii iga horeeyay sheegeen xeerkani uu yahay laba xeer *waxaanan qabaa in la kala saaro.*

Sidoo kale waxaa jira shaqooyin ay qabanayso wasaarada shaqada iyo shaqaaluhu, sidoo kale ay qabanayso Hay'adda shaqaaluhuna oo iska horimaad keenaysa, *taasna waxaan soo-jeedinayaa in la kala Xadido wasaarada iyo Hay'adda shaqaalaha oo laga saaraa wixii xeerkan ku jirra ee ay tidhi hay'addani waanu qabanaynaa.*

Waxaa kale oo aan ku raacsanahay mudanayaashii iga horeeyay in *Agaasimaha Guud uu Madaxweynuhu soo magacaabo ee aanu noqon shaqaale dawladeed,* waxaad moodaa in hab-raaca shaqaalaha shaqada laga eryayaa aanu cadayn ee *waxaan soo jeedinayaa in Iyana la Cadeeyo hababka loo marayo iyo cida ka go'aan gaadhaysa.*

Dhanka kale waxaan halkan xeerka ku jirta in mar la leeyahay Hay'adda Shaqaalaha marna la leeyahay Guddida Hay'adda shaqaalaha oo aad moodo in ay jahawareer keenayso, markaa *waxaan leeyahay waa in ay noqotaa hay'adda shaqaalaga ama waa in ay noqotaa Guddida Shaqaalaha, sida guddida qandaraasyada, hay'adda barakacayaasha oo kale waa in ay u cadaataa.*

Waxaan la qabaa mudanayaashii iga horeeyay in Hanti dhawrka iyo komishanka Doorashooyinka qaranka laga reebo xeerka. Doodaydu inahaa ayay ku kooban tahay waad mahadsantihiin wsc.

**Md Mukhtaar Xassan Maydhane** ***(6min 47sec):-*** Bismilaah, Mahadsanid mudane Gudoomiye, mudanayaa anigu inta aan hayo laba qodob ayaan u kala qaadi mid waa Xeerka Guud ahaan, midina waa qodobo ka mid ah Xeerka.

Hadii aan ku horeeyo ta xeerka guud ahaan, sida aan ilaa shalay dhagaysanayay mudanayaasha ka hadlayna ilaa dhawr iyo toban ayay kor u dhaafeen inta isku raacsan

in Xeerka loo kala saaro Aas-aaska Hay'addan iyo Xeerka shaqaalaha dawlada, sida mudanihii iga horeeyay uu sheegayna in labada qayboodba ay qabyo badani ka muuqato, waxaanan isleeyahay in aanu mashruucani u bislayn in dood kali ah lagu dhameeyo.

Sidoo kale waxaan mudanayasha la qabaa in xeerkan Guddi loo saaro hanoqoto Guddiyada la dhisayo hada ama guddi gaar ahba ha noqdaane, si ay xogbadan ula doontaan, waayo waxaa jira su'aalo badan oo aanu ka jawaabayn qodobada xeerka oo kali ahi.

Mudanayaal waxaa la inaga filayaa in aynu 4 wada matalno,

1. waa cashuurbixiyihii oo raba in hantidaa uu bixiyay loo ilaaliyo in wax sax ah ay ku baxday,
2. In si cadaalad ah oo loo simanyahay fursada shaqo helida, fursada dalicida intuba ay ku yimaadaan qaan loo simanyahay, oo aan ku xidhnayn in la kala jeclaysto.
3. In aynu shaqaalaha laftooda aynu xuquuqdooda ilaalino,

Tusaale ahaan waa in aan tiraab ahaan uun loo ilaalin ee waa in macnawiyan loo ilaaliyo. Dhawaan waxaa inala joogay gudoomiyaha Hay'adda shaqaalaha maantana waa Gudoomihii hore ee hay'adda shaqaalaha, markaa waa kursi siyaasi ah oo hadba Madaxweynaha jogaa ku daynayo in uu ka raali yahay, markaa lama odhan karo waa mid ka madaxbanaan dawlada iyo isba'badelkeeda, sidaa awgeed hadii aynu nidhaa hay'adda shaqaalaha ha la hoos geeyo Hanti dhawrka iyo wixii la mid ah waynu arki karnaa halista ka dhalan karta.

4. Waxaa kale oo la inaga rabaa in aynu ilaalino kartida waaxda fulintu ay wax ku fulinayso, oo wax qabadka dadbani ay sugayaa waa waaxda fulinta, markaa waa in aynu ilaalinaa kartidooda si ay wax u fuliyaan.

Intaas oo isku daalacnaasilan ayaa mudanayaal la inaga filayaa, *waxaan xildhibaanadii iga horeeyay la qabaa in xeerka tirsiyadiisu ay noqdaa B, T, J ee aanay noqon A, B, C, iyo in Af-dhigaal ahaan, higaada iyo qaab dhismeedkaba la saxo waan qabaa,* waayo tani waxay inagu dhalinaysaa in aynu aad uga fakarno qaab-dhismeedka inta ay ka fikirayno qodobada gudaha in ka badan.

**Qodobka 2aad Farqadiisa 2aad ilaa 17aad,** waa eray bixintii waxaanay ka simanyihiin, oo eraygii lagu macnaynayo isla qodobkii marka horaba uu tafsiirka u noqon lahaa, hadii aynu eegno Qodobka 2aad farqada 2aad **Derejo"** *waxa loola jeedaa qaybaha ay u sii kala baxayaan qaybaha jagooyinka si ku xusan Qodobka 24aad (2) ee xeerkan*. Waa sharax mareeg ah. Qodobkii ay markii hore fahansiin lahayd ayaa dib loo tixraacayaa, markaa qaabkaa

way ka simanyihiin eraybixinuhu dhamaan *waana in aynu taa ka fogaanaa waayo eraygan waxaynu ugu tallo galnay in uu macneeyo marka qodobka la joogo.*

Maxaa looga jeedaa ciidamada qaranka ee kala duwan, sida ku xusan **Qodobka 7aad xarafkiisa "B"** sidoo kale waxaa iyana u baahan in eray bixinta lagu darro Qodobka 37aad farqadiisa 3aad oo ku jiraan labada eray ee kala Ah **Gunno Xileed iyo Gunno Hawleed** ***waxaan soo jeedinayaa in lagu daro eray bixinta oo la yidhaa waa maxay gunno xileed, maxayse tahay Gunno hawleed.***

**Qodobka 4aad Farqadiisa 7aad** waxaa ku jirta Agaasimaha Guud oo lagu daray shaqaalihii dawlada, *markaa waxaynu leenahay tiraab ahaan Agaasimaha guud waa in anu ka madax banaanaado shaqaalaha Dawladda,* suuro gal maaha maadaama oo uu magacaabayo qof siyaasi ahi eryina karro, waxaan soo-jeedinaya in aanu xeerkani ku dabaqmin sida Golaha Guurtidu soo Celisay dawladaha  Hoose waan la qabaa, hay'addaha kale ee madaxbanaan ee  uu dastuurku xusayana iyo xeerarka kalena waan la qabaa oo ay ka reeban tahay hay'adda shaqaaluhu, sababta aan uga reebayna ay tahay waxaa weeyi uma jidayn karto wax aanay iyadu qaadan hay'addaha kale.

**Qodobka 5aad** oo qeexaya siyaasada xeerka laga leeyahay, oo ah qodob kooban oo aan ka jawaabayn filashadeenii, waxaanan leeyahay kamma turjumayaan siyaasada guud ee shaqaalaha, sidaa daraadeed waa in aynu helnaa Document-kii oo dhan ama waa in la soo beddelaa lagana saaro Meesha.

**Qodobka 6aad farqadiisa 1aad xarafka "A"** *waxaan soo-jeedinayaa in lagu daro shaqo qeexida Qofka. Waana in qof walba yeeshaa shaqo qeexid****a. Isla qodobkaa 6aad farqadiisa 1aad xarafkiisa "F"*** *waxaan la qabaa sidii mudanayaashii iga horeeyay sheegeen in la qeexo sirta aan la faafin karrin ama qodobkaa Meesha laga saaro.* Waayo waxay noqon kartaa wax loogu gabado shaqaalaha.

**Qodabkaa 6aad farqadiisa 1aad xarafkiisa "K" waxaa** ku qoran in uu Ka noqdo hormood himilooyinka horumarka iyo ahmiyadaha dawladda iyo xaaladda dalka Somaliland, waa hawraar aad u wanaagsan laakiin maaha wax shaqaale lagu xisaabiyo oo la yidhaa shaqadiisii ayuu ku gudan waayay la yidhaa maaha. *Markaa waxaan soo jeedinayaa in laga saaro.*

**Qodabkaa 6aad farqadiisa 1aad xarafkiisa "L" in** uu Ka fogaado in uu raadiyo ama gudoomo hadiyado faa'iido shaqsi ah leh, ama faa'iido u ah isaga ama iyada qoyskiisa ama qoyskeeda ama xafiis kaas oo uu ku xidhan yahay, taas badalkeedana lagu helayo is afgarad maamul ama hanaan kale oo isaga dani ugu jirto; *waxaan soo-jeedinayaa in qodobkaa la waadixiyo.*

**Qodobka 7aad** xuquuqda shaqaalaha, *waxaan soo-jeedinayaa in lagu darro qodobo u saamaxaya qofka shaqaalaha ah in hadii uu ku arko masuuliyiinta kasaraysa Meesha uu ka shaqaynayo ka fulinaysa wax sharci darro ah, in uu dacwado sharci ah oo isagana ilaaliya uu gudbin karo ilayn waa qof muwaadin ah'e.*

**Qodobka 7aad farqadiisa 3aad** *waxaan soo jeedinayaa in loo raro Qodobka 13aad.* Qodobka 8aad farqadiisa 1aad xarafka "I" una dhigan in aanu takoor iyo faquuq ku samayn dadweynaha uu u adeegayo. *Waxaan soo jeedinayaa in xaga danbe lagaga darro iyo shaqaalaha uu maamulo*

**Qodobka 12aad farqada 1aad** maadaamo oo ay hay'addani ku Aas-aasantahay Dastuurka, *waxaan qabaa sidii mudanayaashii iga horeeyayba ay sheegeen in laga saaro Xeerka ayay ku Aas-aasantahayda lanna yidhaa waa dastuuri.* Sida inoogu qoran xeerka Xarunta dhexe Hay'addu waa magaalo madaxda ayaa inoogu qoran Xeerka, *mudanayaal anigu waxaan qabaa in laga beddelo xeerarka intooda badan aynu ku qorayno Xaruntu waa caasimada, hadii ay maamul ahaan ay u fiicnaato magaalo kale waa in ay fududahay in la geeyo.*

**Qodobka 24aad** waa in qaynta danbe ee English-ka laga saaro, **Qodobka 26aad farqadiisa 2aad** iyo faqdiisa 7aad waa tii aynu ka soo hadalnay ee ahayd shaqaalaha dawlada. **Qodobka 37aad** waxa uu jidaynaa mushaharooyinka iyo Gunooyinka, waxad moodaa in aynu qabno fikir ah in qayb shaqaalaha ka mid ahi ay shaqaynaso qayna aanay shaqaynayn dabadeedna lagu kala duwayo Gunno, markaa musharku waa in ka dhasho shaqo waajib ah, waayo qofka cashuur bixiyaha ahi waxa uu u bixiyaa in wax loogu qabto ee maaha in qof aan waxba qaban uu qaato. Gunnaduna waa in ay ku timaado shaqo dheeraad ka ah wakhtigii shaqada ee aanay ahaan in wakhtigii shaqada aanu gunno ku helin.

**Qodobka 77aad waxaan soo jeedinayaa in laga saaro ama waa in xeerarka Gudohoosa Qodobada uu laalayi la cadeeyo ee aan si caajisa ah aan loogu qorin. Aad ayaad u mahadsantihiin.**

**Md. Cabdikariin Hugur Cabdi** ***(6min 47sec):-*** Bismilaah, Mahadsanid Mudane Guddoomiye, shirgudoonka, xildhibaanada, shaqaalaha, Saxaafadaba iyo Martisharaftaba waan salamayaa Asc. Doodan ku saabsan Xeerka shaqaalaha Dawlada Xeer Lr. 97/2021.

Ugu horayn waxaan ku raacsanahay xildhibaanadii iga horeeyay ee soo jeediyay in xeerkan laba loo kala saaro, iyada oo uu cadaynayo Xeerkan Cutubkiisa 3aad in ay yihiin laba xeer oo isku jira, sababta aan u cuskanayo oo ah in aan cadeeyo madax-banaanida

hay'addaha Dastuuriga ah iyo sugida Xaquuqda Aas-aasiga ah ee shaqaalaha dawlada. Sida Qodobka 113aad ee Dastuurku uu sheegayo.

Sidoo kale Qodobka 122aad ee Dastuurku waxa uu sheegayaa in hay'ad kastaa ay yeelato Xeer Gaar ah, sidaa daraadeed waxaan ku raacsanahay mudanayaashii iga horeeyay in loo kala saaro laba Xeer.

Dhanka kale waxaan soo jeedinayaa in aan xeerkan intan lagu dayn ee loo saaro Guddi iyo cidii kale ee aynu kala maarmiweyno si loo-naaqisho, maadaama oo uu jaaniskiisu maanta taaganyahay. Iyada oo xeerkan lagu dhaqi doono shaqaalaha Dawlada ee dalka oo dhan.

**Qodobka 10aad farqadiisa 7aad, waxay sheegaysaa in Bisha rabadaan waxaa Saacadaha shaqada laga jarayaa hal saac.** *Waxaan soo-jeedinayaa in halkaa laga dhigo in laga jarro laba Saadadood (2saacadood). Waxaa kale oo aan xildhibaanadii iga horeeyay ku taageerayaa qodobka 41aad ee xaqul iidka ka hadlaya in bil mushaharkeed la siiyo shaqaalaha, bishaana in laga dhigo bisha ramadaan.*

**Qodobka 59aad** ee talaabooyinka Anshaxmarinta in uu qofka shaqaalaha anshax-marinayaa aanay halkan ka muuqan *Iyana waxaan soo jeedinayaa in ay halkan xeerka ka muuqato. Sidoo kale waxaan mudanayaashii iga horeeyay ku taageerayaa fasaxa dhalmada 150 maalmood oo ay 20tan ka horeeyaan 130na ha danbeeyaan halkaa waxaan soo jeedinayaa in 40tan ka horeeyaan 150na ka danbeeyaan*

*Sidoo kale waxaan soo-jeedinayaa sidii mudanayaasha badankoodu sheegeen in **qodobka 77aad** Meesha laga saaro,* intaa waxaan ku kabayaa wakaaladaha Biyaha Hargeisa waxaa magacaaba Madaxweynaha, *markaa waxaan soo jeedinayaa in uu Madaxweynuhu uu magacaabo gobolada kale iyo Gabilayba. Wsc.*

**Md. Xuseen Aadan Cabdi (5min 01sec):- Md.xuseen Aaden Abdi**: Bismilaahi raxmaani raxiim guddoomiyaha golaha wakiiladda, dhamaan xubnaha golaha iyo shaqaala weynaha waxaan ku salamaya salaanta islaamka asalaama calaykum waraxmatu laahi Wa barakaatu

Anigoo ixtiraamaya soojeedintii guddoomiyaha ee ahayd in lasoo koobo dooda Anigoo insha Allah soo koobi doona inyaroo soojeedina baan ka horaysiinayaa sidaynu ognahay ama ka war hayna oo mudanayashiii iga horeeyey ka dhawaajiyeen waxaan soojeedinaaya in lakara saaro siyaasada iyo shaqaalaha, waxaynu ognahay in agaasimaha guud inta badan in uu siyaasadii kujiro uu kamid yahay digreetooyinka madaxweynuhu ku magcaabayo masuuliyiinta hayaddaha, sida ku cad

**Qodobka 90aad** ee dastuurku shuruudaha madaxweynaha ee **farqada 3aad** xarafka **KH** Ee agaasimaha guud ee wasaaradaha iyo haayadda wuxuuu kamid yahay madaxda sare ee dawladda sida ku cad dastuurku madama uu kamid yahay agaasimaha guud madax sare waxa fiican inay kala duwanadaan shaqaalaha iyo agaasimaha guud madama agaasimaha guud yahay cajladii wareejinaysay dhamaan shaqaala weynaha dawladda,kana mid yahay masuuliyiintii siyaasada ee xaga dawladda .sida ku cad xeerkan hada ina hor yaala ee shaqaalaha dawladda **farqadiisa 5aad** waxay sheegaysaa jagada agaasimaha guud waxay noqonaysaa mid joogta ah waana ka mid maamulka oo aan ahayn mid siyaasadeed ,sidaa daradeed halkana wuxuu ugu jiraaa inaanu ahayn mid siyaasadeed xaga dastuurku iyo Qodobka 90aad wuxuu ugu jira inuu yahay xukuumadii iyo maamulkii sare ee dawladda sidaa daradeed waxaanu leenahay agaasimaha guud waa inuu ku koobnaado uun siyaasada madama uu kamid yahay maamulka dawladda ee sare ee uusan shaqaalaha marka uu janiskiisa siiyo wixii aan shaqa ahayn

**Qodobka labaad** ee aan raacinayaaa waxa weeye

**Qodobka 26aad** ee agaasimaha guud farqadiisa **6aad** ama **7aad** sida mudanayaal halkan iga horeeyey ay soo jeediyeen hadii agaasimaha guud uu katago shaqa ama laga joojiyo ama halagaga joojiyo hab hawl gabnima ah oo uu shaqadiisa gudan wayey ama halagaga joojiyo eris kale oo madaxweynuhu ka joojiyo,madama uu shaqada ka tago agaasimaha guud waxaan laqabaaa gunadaa badhka ah iyo gunada uu qaadanayo agaasimuhu iyadana in dhamaan ba laga joojiyo madama uu shaqadii kategay oo laga eryay sidaa lagaga joojiyo ,waayo intaas oo agaasime intaaso xukuumadood oo kala horaysay ama kala damaysay ay erido hadii dhamaantood ay mushahar iyo guno usoo xadiraan waxaa cadhiidhi noqonaya hantidii qaranka iyo habsami usocodkii hantida dalku usocodsiin lahayd wixii baahiya ah ee dalka u yaala sidaa daradeed waxaan leeyahay qodobkaasina sidaas halagaga saaro oo halaga joojiyo agaasimaha guud.

**Md. Maxamuud Faarax Jaamac** **(6min 14sec):-** Bismilaahi raxmaani raxiim guddoomiyaha waad mahadsantahy, guddoomiyaha xildhibaanada guud ahaan, shaqaalaha barlamaanka iyo ka qaybgalayaasha ama garyaqanada martida inaga u ah dhamaantood waxaan ku salamaya salaanta islaamka asalaama calaykum waraxmatu laahi Wa barakaatu.

Mudane aanu wuxu uun ban toos uga hadlaya habka shaqada iyo shaqaalaha loo qoro, aad ban hawsha iyada ah uga hadlayaaa, halkan waxa kuqoran xeerka

**Qodobka 30aad** oo sheegaya habka shaqada loo qorayo waxa weeye shaqaalaha qoristoodu, shaqaalaha dawladda waa in loo fuliyaa laguna saleeya tartan cadaalada iyadoo ay uwada simanyihiin dhamaan muwaadiniinta reer Somaliland waa sax

waxaana ku biirinayaa oo lagu darayaaa,imtixaanba laga qaadayaa waa sax waxa imtixaanka waa laga qaadayaa balse caasimadii waxkasta lagu qaadayaa goboladana waxaa loo furay xafiisyo yaryar oo la yiri wasaaradaha yaryar ee gobolada ku yaala hadii waxka banaanadaan haku tartamaan lakin shaqaalaha miisaanka leh ee boqolaalka gaaraya waxaa laga qoraaa caasimada,waxaan soo jeedinayaa in imtixaanka caasimadda hadii agaasime waaxeed loo baahanyahay in dhamaan gobolada lawada gaarsiiyo oo imtixaanka gobolada ka qayb qaataan taasi waaa qodob .

**Qodobka 2aad**waxaa weeye imtixaanka imtixaanka cida qaadaysa waxaan soojeedinaaya iyadana haayada shaqaluhu inay samayso si uu sheegay xildhibaan fuaad in loo sameeyo gudi gaara oo dhowr xubnood ka kooban xul ah oo si fiican looga baraan degay oo imtixaan garsoor caadiya qaada dhamaan gobolada hal mar kawada qaada oo aan kala horaysiin hal maalin kawada qaada si aanu imtixaanku ufashilmin.

Waxa jira xildhibaan iga horeeyey oo sheegay, waxaan ku raaacsanahy mudane xildhibaan qaasim in shaqaalaha dawladda lagu kala badan yahay qaarna aanay cidiba ka joogin,qaarna ay tira qayral caadiya ku joogaan ,sidaa daradeed in loo baahanyahay in laysu dhelitiro shaqaalaha dawladda miisaanka lasaaro haayada shaqaluhu na ay samayso xafiis ugaara isu dheelitirka shaqaalaha iyo isasoo gaarsiin oo muhiima,waxaan kaloo maqlaayey maalintii dhoweyd ee guddoomiyaha hayadda shaqaluhu inala joogey waxa uu guddoomiyaha haayadda shaqaluhu inoo sheegay in agaasimayaasha guud iyo xoghayaasha dawladda hoose laga qaadan doono shaqaalaha dawladda ee kujira pyrolka taasi waxay dabar iyo xanib ku noqonaysaa muwaadiniin badan oo wax bartay oo aan shaqaalaha dawladda kujirin,qodobkaa waxaan doonayaa in meesha laga saaro oo uu noqdo mid imtixaan oo ay dhamaan agaasimayaasha guud iyo xoghayaasha dawladda hoose waa in imtixaan looqaado.waxaa halkan ku cad oo ay ognahay in shaqaalaha dawladda dad badani kamaqan yihin oo haday la maqan yihin aanay fursadaaa ka helaynin in cidi kasoo qorto halkaa waxaan soojeedinaaya mar labaad in fursada shaqada la balaariyo loona gudbiyo dhamaan muwaadiniinta Somaliland ee gobolada joogta oo dhan.

xilka agaasimaha guud hadaynu niraahno siyaasi buu noqonaysaa siyaasi ma noqonayo mar hadii madaxweyne magcaabayo mar walba isaga uun buu ushaqaynayaa,mar walba isaga uun buu ujooga waxaan soojeedinaaya siyaasigiisa udaaya,shaqaalaha dawladana yaan lagu darin agaasimaha guud ha ahaado kaa wasiirka oo kale mar hadaanu ka xoroobayn udaaya siyaasadiisa ha raace mudanayashiii hore waxay soo jeediyeen waxyaalo badan oo ku saabsan fasaxyada iyo xaquul ciidka iyo kuwa kalo badan intaaba iyagaan ku raaacsanahy.

**Qodobka 13aad** ayaa wuxuuu sheegaya in waajibaadka haayadda shaqaluhu samaynayso in lagu xoojiyo qaybta imtixaanadka, qaybta isu dheelitirka iyo qaybta sinaanta in loo simanyahy shaqaalaha dawladda.

**Md. Maxamed Jaamac kood-buur** ***(6min 47sec):-*** Mahadsanid mudane Gudoomiye shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salaamayaa, ***Sidda mudaneyaashii iga horeeyay ay tilmaameen, Xeerkani waa laba xeer oo isku jira, waxaanan qabaa in la kala qaado oo laga dhigo laba xeer, sidda ku cad qodobka 4aad iyo ka qodobka 12aad, farqadiisa 1aad. Oo cadaynaya in uu xeerkani yahay laba Xeer oo isasa saaran una baahan in la waafajiyo xuquuqda shaqaalaha iyo Aas-aaska Hay'adda*.**

Xeerkani waxuu xadgudubayaa sida ay aniga ilatahay ku yahay oo aan la qabaa mudanayaashii hore shaqaalaha dowlada iyo hayadaha kale, Tusaale ahaan; marka shaqaaluhu galaan khasaare waxa xeerkani uu sheegayaa in ay magdhaw bixiyaan taasi oo aan u arko in ay tahay gaf laga galayo shaqaalaha, sidoo kale waxa uu ku xadgudbayaa hanti-dhowrka, commission-ka oo shaqaalahoodii la hoos geeyey Hay'addan, taasina waxay dhaawacaysaa dhex-dhexaadnimadii haydan commission-ka.

Waxaa jirta cabashooyin badan ka imanaya qaabka shaqaalaysiinta iyo maamulka darajooyinka shaqaalaha hayadan, markaa waxaan qabaa in xeerkan gabi ahaanba uu xadgudub ku yahay shaqaalaha oo aanu xuquuqdoodii u sugayn si buuxda sidaa daraadeed *Waxaan soo jeedin lahaa in xeerkan guddida ku haboon oo dhamaystirta loo saaro si ay u waafajiyaan xeerarka caalamiga ah ee shaqaalaha Dawlada. Sidoo kalana Xog ururin badan ka sameysayso shaqaalaha dhexdooda ee aan dib loo celin*.

Mudaneyaal waa Layna dhowrayaa, waana la inna eegayaa waxaynu ka yeelo xeerkan iyo shaqooyinka la inoo igmaday, gaar ahaan shaqaalaha uu khuseeyo xeerkani, waxaanay Marti inooga yihii Xeerkan in aynu aad uga fiirsano maadaama oo aanu xeerku buuxinayn dhamaan xuquuqaha iyo daryeelka aas-saaiga ah ee shaqaalaha dawlada. Sidda ku cad Dastuurka**, Qodobka 113aad** iyo xeerarka kale ee hay'addaha madaxa banaani oo muujinaya maamul wanaaga iyo Halbeegyada caalamiga ah. Ee Madax banaanida hayaduhu yeelanayaan waa mid maamul iyo mid maaliyadeed (Management and Financial Independence).

Xeerka kala xadaynta Nidaamka Xukuumada iyo Hay'adaha madaxa banaan xeer **Lr.71/2015** qodobkiisa **65aad faqradiisa 1aad;** waxaa uu qeexayaa heerka ay gaadhsiisantahay Madaxbanaanida Hay'addaha gaar ahi, sidoo kale waxaa isna si cad u qeexaa Qodobka **113aad ee Dastuurka**.

Qodobada kale ee aad dooayo in aan wax ka idhaa waxaa ka mid ah **Qodobka 3aad ee Ujeedooyinka Xeerka farqadiisa 2aad**_In la helo xeer lagu maamulayo guud ahaan shaqaalaha dowlada ee joogtada ah, *halkaa waxaan soo-jeedinayaa in lahu daro* **shaqaalaha**

**ah, kuwa aan joogtada ahayn iyo kuwa shaqaalaha shaqo qaran oo ay iyaguna xeerka ka muuqdaan, Farqada 3aad ee isla Qodobkaa 3aad waxaan soo-jeedinayaa In lagu qeexo habraaca xulista sidoo kale waxaan xaga danbe ka sii raacin lahaa, TABABARADA. Iyada oo aan soo-jeedinayo in labadaa farqadood la isku darro.**

**Una dhigmaysa in la helo xeer lagu maamulo dhamaan shaqaalaha dawlada, laguna qeexayo hab-raaca shaqo qorista.**

**Farqada 4aad ee isla qodobka 3aad una dhigan sidan "In lagu jideeyo habka maaraynta xogta shaqaalaha dawlada"** ***waxaan soo-jeedinayaa in aad loo faah-faahiyo***

**Qodobka 4aad Farqiisa 2aad una dhigan** Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu waxay dajinaysaa siyaasadda lagu hirgalinayo nidaamka shaqaalaysiinta shaqaalaha dawladda oo ku salaysan tartan iyo daah-furnaan, iyadoo fursad isku mid ahna la siinayo dhammaan tartamayaasha. *Waxaan soo jeedinayaa halka laga isticmaalay Erayga Siyaasada, Eraygaa waxaan ku beddeli lahaa Habraac.*

**Qodobka 4aad farqadiisa 4aad** Waxaan soo-jeedin lahaa in laga saaro xeerka waayo waxay dabrayaa xeerar kale oo dhaqan-gal ah.

***Waxaan soo jeedin lahaa in qodobka 4aad lagu darro farqad 8aad u dhigmaysa siddan:*** *Dhamaan shaqaalaha commission-ka doorashooyinka qaranka, heerarkooda kala duwan in loo raaco maamulkooda xeerka guud ee doorashooyinka iyo diwaan gelinta cod-bixinta. Xeer Lr 91/2020*

Markaa xeerkan lagu dabaqin mayo komishanka Doorashooyinka, waayo taasi waxay suurto gelinaysaa in yeeshaan madax banaani buuxda, si ay dhex uga noqdaan markay shaqadooda gudanayaan.

**Qodobka 6aad Faraqiisa 1aad** in aanu diidin wajibaadyo shaqo oo ay darajooyinkoodu ka duwan tahay darajadiisii shaqo (ta waxay horseedi karta Gudoomiyu isuu saybeeriya ciduu doono u diro) markaa in la faahfaahiyo si loo xakameeyo awood ku takrifalka. Waana in loo daayaa qofka shaqaalaha ah shaqada u qoran ee uu masuulka ka yahay.

**Qodobka 7aad Xuquuqda shaqaalaha Faraqadiisa 1aad xarafkiisa "B" waxaan ku dari lahaa** *(in shaqaaluhu ogaado macluumaadka la xidhiidha nabadgelyada sugnaanshaha goobta shaqo (khatar guud iyo mid caafimaadba) iyo Ka qayb qaadasha go'aamada saameynaya nabadgelyada goobta. Inay helaan Xaqa diidista shaqo waxyeelo ku ah nabadgelyadooda (mid guud iyo mid caafimaadba) ku leh.*

**Qodobka 8aad waxa ka reeban shaqaalaha Faraqadiisa 1aad xarafkeeda" J" waxaan ku dari lahaa** *(in aanu bixin, qaadan ama sababin laaluush toosa ah ama daahsoon oo u ku fulinaayo shaqo la xidhiidha shaqadii uu hayey. Inaanu iibin, qaadan, wareejin, xog qoraal, muqaal iyo sawir ah oo ku saabsan xogta shaqada uu hayo hadday noqoto ta shaqaalaha kale iyo kuwa uu u adeegayo.*

**Qodobka 9aad Khasaare Bixinta Faraqa 1aad** ma qabo in shaqaalaha laga qaado khasaare bixin ama magdhow, ee se haddii si badheedh ah uu khasaare u gaysto waa in si kale loo ciqaabo, si aan loogu xadgudubin xuquuqda shaqsiga ah.

**Qodobka 16aad Shuruudaha Maagaacbista.** ***Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro***

*I) In aanu hore ugu sifoobin musuq maashuq iyo laaluush qaadasho*

***Gabo-gabadi Waxaan soo jeedinayaa*** Si deegaanada dalka oo dhan si siman shaqaalaysiinta, shaqaaalaha dowladu u wada gaadho waa in xeerka lagu daro habraac ilaalinaya shaqaalaysiinta heer Gobol iyo heer Degmoba, Haddii uu jirana waa in laynoo soo gudbiyaa.

Waxaan soo jeedinayaa in Guddida Hay'addan la kordhiyo laguna soo xulo aqoon sidoo kalana laga soo xullo Gobolada dalka oo dhan, si metelaad iyo, talloba ku yeeshaan shaqaaalaysiin iyo habraac mushaharka.

Waxaan kale oon soo jeedin lahaa in la sameeyo Guddi ka madax-banaan Hay'adda oo ku dhisan Gobolada dalka oo u qaabilsan anshax marinta iyo cabashooyinka shaqaalaha.

Sidoo kale waxaan soo-jeedinayaa in xeerkan lagu xuso shaqaalaha ajaanibka ah ee qabta ama qabandoona shaqooyinka kale duwan ee dowlada sidda loo maamulaayo iyo sidda xaqooda loo dhowrayo, way iga dhantahay.

**Md. Cabdiqani Maxamed Aadan (4min 30sec):-** Bismilaahi raxmaani raxiim mahadsanid Guddoomiyaha waxaa doonayaa inaan ka hadlo dhowr Qodobka,

**Qodobka 75aad** ee xeerkan shaqaalaha wuxu xusayaa halkaa waxaa ka qoran saddex Qodobka marka wuxu odhanayaa xeerkaasi hayadda shaqaluhu waxay diyaarinaysaa warbixin sanadedka oo ka saabsan wax qabadka sanadka dhamaaday iyo caqabadihii hawlihii ay lakulantay isla markaasna waxa qorshaysan in madaxweynaha loo gudbiyo, halkaa waxa lagu darayaa in loo gudbiyo madaxweynaha iyo golaha wakiiladda, waxaana laga saarayaa Qodobka labaad ee odhanayaa waxaa loo gudbinkaraa.

**Qodobka 87aad** ee ka hadlaya kaydka iyo xogta shaqaalaha waa afar qodob waxaana lagu darayaa hal qodob oo shan qodob lagaga dhigayo, qodobkaasina wuxu odhanayaa hayadda shaqaalaha dawladda waxaa ku waajiba inay hirgeliso nidaamka xogta cududa shaqaalaha ee heer gobol waayo waxa halkan ku cad heer wasaaraded, heer Wasaradeedna goor walba ma ahaanayo qofka gobolada fogfog jooga sida ceerigaabo iyo awdal, dee qodobkaasina wuu ku adkaanaya inuu goor walba hargeisa yimaado, waa in layiraahdo xogta cududa shaqaalaha dawladda ee heer gobol.

Waxaan kaloo doonayaa inaan ka hadlo

**Qodobka 79aad** oo dhaarta shaqaalaha ka hadlaya ,qofka shaqaalaha dawladda waa in la dhaariya intaanu shaqada dawladda bilaabin ka hor, halkaa waxaynu ognahay oo wada ogsoonahy in ay badantahy dad badan oo shaqaala dawladeed ah oo aan shaqayn dabadeed mushaharka iska qaata isla markaasna dadkii xaqa u lahaa shaqada ee wasaradda dhex joogey inay ku dulman yihin oo tabaruc ugu shaqeeyaan,marka si loo adkeeyo macnaha shaqaalaha dawladda,qofkastoo shaqaala dawladeed ah waa in lamariyaa **Qodobka 79aad** ee ku xusan heer qaran iyo heer gobolba.

Hayadda shaqaluhu markay shaqaala cusub qaadato waa in la dhaariya, waayo waxad arkaysaa tusaale hadii gobol laga shaqalaysiiyo 20 qof wasaradda caafimaadku ninka agaasimaha maamulka iyo lacagta gobolka ahi ayuunba lacagta siinaya isagoon dhaarin marka waa in la dhaariya heer qaran iyo heer gobolba, si ay u adkaato macnaha shaqalaysiintu

Qofkuna uu yeesho qof damiir leh oo Allah ka baqaya oo og in la dhaariyey, Si uu waajibaadkiisa uguto.

Waxaan kaloo ku darayaa **Qodobka 53aad** gudiga anshax marinta ee heer wasaaraded iyo heer haayadeed ba, Waxaan doonayaa in lagu daro qodob odhanayaa ama ka hadlaya gudiga anshax marinta ee wasaardkasta iyo haayad kasta waxaa magcaabaya wasiirka ama guddoomiyaha hayadda waxayna ka koobnaanayaan ugu yaraan saddex xunood baa qoran sidaa darted waa in lagu daraa qodob lixaad oo sheegaya in lasameeyo gudiga anshax marinta ee heer gobol oo ka kooban saddex xubnood waayo hayadda shaqaalaha iyo shaqada gobol walba isu duwe bay ku leedahay hadii isuduwihii gobolku aanu roolba ku lahayn xuquuqihii shaqaalaha oo lagu cadeeyo heer wasaaraded dee arintaasi waxay soo kordhinayso maleh marka xaga gobolada waa in lagu xuso si ay cududa shaqaluhu taya uyeelato .

Waxaan kaloo ku darayaa **Qodobka 4aad** xadka adeegsiga xeerka taas Waxaan ku taageersanahy xildhibaanadii hore ka hadlay.

**Md. Khadar Cali Xassan** **(15min 16sec):-** ASC**,** Mudane Guddoomiye Aad ayaad u mahadsantahay, Guddoomiye intii doodu ay socotay waan dhagaysanayay anan way nagu cid leeyeen, marka dooda ayaan hore u galayaa, *Waxaan dooda ku raacsanahay mudanayaashii iga horeeyay oo ay ka mid yihiin, Xildhibaan, Xirsi, Maydhane, Jamaal iyo xildhibaanadii kale ee sharafta lahaa ee doodaha quruxda badan soo bandhigay.*

Mudane Guddoomiye **Qodobka 22aad** ee Dastuurku waxa uu sheegay in aanay jiri karin hay'ad aan lahayn xeer ay ku Aas-aasantahay, sida aynu ka warqabnan hay'adda shaqaaluhu ma laha xeer ay ku Aas-aasantahay, xeerkana sida ay xidhibaanadii hore

sheegeen waxa uu isugu jiraa Xeerkii Aas-aaska Hay'ada iyo xeerkii shaqaalaha dawlada *waxaanan soo-jeedinayaa in labadaa xeer la kala saaro.*

Sidoo kale mudane Guddoomiye waxaynu ansixinay in inta aan xeerka la inoo keenin la inoo keeno siyaasadiisa, halka qodobka 5aad farqadiisa labaad ee xeerkana ay tilmaamayso in ay samayn doonaad siyaasada shaqaalaha dawladda, *waxaan soo jeedinayaa in siyaasada shaqaalaha dawladdu ka soo horayso xeerkan. Sidii aynu ku ansixinay Xeer-hoosaaka Golaha wakiilada.*

**Qodobka 6aad** Waajibaadka Shaqaalaha. Waajibaadka Shaqaalaha Dawladdu waa 20 Waajib (20 Faqradood oo tilmaamaysa waajibka lagu leeyahay) halka Xuquuqda shaqaalahana lagu soo koobay 11 Faqradood, halkaasi waxay tilmaamay waajibaadka laga sugayaa inay ka badantahay Xuquuqihiisa, *markaa waxaan soo jeedin lahaa in xuquuquhu ka bataan waa jibaadka laga rabo.*

Mudane Guddoomiye **Qodobka 6aad, Faqradda (D)** waxaan soo jeedinayaa in lagu kordhiyo "in haddii qof shaqaale ah laga bedelo goobtiisa oo loo bedelo meel kale oo looga maarmi waayey in Dawladdu ka caawiso kirada Guriga iyo qarashaadka Aas-aasiga ah ee kusoo bixi karra".

**Qodobka 6aad faqradiisa (R)** waxay tilmaamay inaanu qofka shaqaalaha ahi u isticmaalin Xilka uu hayo majaro habaabin bulshada iyo faafinta Xog isagoo isticmaalaya qalabka warbaahinta noocyadeeda oo dhan iyo gudbinta ra'yi cabirkiisa, **qodobkan wuxu u baahanyahay in la faah-faahiyo, qodobkani waa inaanu ka hor iman qodobada Caalamiga ah ee ilaalinta cabiridda ra'yiga qofka, qofkastaa xaq ayuu u leeyahay inuu ra'yigiisa cabbiro, sidaa awgeed shaqaalaha Dawladdu waa bani aadam. Lama Cabudhin karo, laguma adoonsan karo dhawr million oo lasiiyo waa in loo ogolaado inay cabiri karaan ra'yigooda.**

**Qodobka 2aad faqradiisa 2aad;** wuxu ka hadlayaa qiimaynta iyo dalacsiinta shaqaalaha Dawladda, waxaynu u baahanay in laynoo keeno siyaasadda shaqaalaynta Dawaladda oo dabcan qodobkani ku qoranyahay isagoo faah-faahsan.

**Qodobka 8aad;** faqradiisa 1 aad (e) spelling error, inuu ku kaco Xataayo, halaga dhigo Xatooyo.

**Qodobka 9aad**, faqradiisa 5aad; marka qofka shaqaalaha ahi masuulkiisa siiyo amar aan sharci ahayn, halkan waxaan soo jeedinlahaa in lagu caddeeyo nooca amar. *Waxaan soo jeedin lahaa in amarka sharciga ahi uu noqdo mid qoraal ah oo aan ahayn mid af ah, waayo amarka afka ah waa lagu murmi karaa ama masuuliyadda ka dhalata ayaa dhib keensanaysa.*

**Qodobka 11aad, faqradiisa 4aad;** qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha dawaladda waxa loo diri karaa hawl qaran oo ka baxsan shaqadiisa marka ay yimaadaan duruufo looga maarmi waayo si uu u guto waajibaadkiisa wadaniyadeed, ***maxaa loola jeeda (Hawl-***

***Qaran), ma hawl difaac qaranbaa? Halagu qeexo qaybta qeexinaha eray bixinta, sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in halkaa aad looga firsado waayo hadii qofka loo dorro shaqo ciida isaga oo aan khibrad u lahayn khasaara ayuu soo kordhinayaa, hadii laga maarmi waayo waa in wakhtiyada fasax ah tababaro la siiyaa.***

**Qodobka 15aad, faqradiisa 1aad,** magacaabista Guddida Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, waxa jideeyey Dastuurka Qodobkiisa 114aad ayaa siinaya in uu uu magacaabo Madaxweynuhu Guddidan, laakiiin awoodda madaxweynuhu waa soo jeedin, Golaha wakiilada ayaa soo jeedinta diidi kara ama yeeli kara, waxa wanaagsanayn in qodobkaa Dastuuriga ah wax ka bedel lagu sameeyo lagana dhigo in 2ka mid ah Golaha Wakiilada, 2ka mid ah Golaha Guurtida, 1ka yimaada Ururada Bulshada Rayidka ah, iyo 2ka yimaada Madaxweynaha, si loogu dhawaado in cadaalada la ilaaliyo.

**Qodobka 24aad, Faqradiisa 2aad;** waxa ku jira qoraan Engliish ah oo u dhigan "There are also 10 steps with in each Grade". Qoraalkan Wakiiladii hore way ku ansixeen, Golaha Guurtiduna wuu ku ansixiyey markaa ma khalad madbaci baa mise waa macne xeerka ka mid ah.

**Qodobka 26aad, Faqradiisa 2aad;** Agaasimaha Guud waa Civil Servant kawarama Maareyeyaasha Haayadaha Madaxa banaan? Halays waafajiyo maadaama oo shaqadoodu tahay Maamulid. Waxaan soo-jeedinayaa in loo daayo booskiisa siyaasiga ah.

**Qodobkaa 26aad Faqradda 6aad;** waxay tilmaamay in Madaxwaynuhu jaangoynayo mushaharka iyo Gunnooyinka agaasimayaasha Guud, *waxaan soo jeedin lahaa in aynu u samayno Xeer ama la helo Xeer nidaamiye jaangooyo, hadii madaxwaynuhu kuu jecelyahayna wax badan u qoro mid kalena wa yareeyo side Xaalku noqon, si aynu cadaalada ugu dhawaano.*

**Qodobka 26aad Faqradda 7aad** waxay sheegay haddii aan qofka shaqaalaha ah looga eryin shaqada Xil gudasho la'aan waxa la wareegay Haayadda Shaqaalaha Dawladda, faqraddan faah-faahin ayay u baahantahay.

**Qodobka 30aad; Faqradiisa 2aad;** waxay tilmaamay in Xeerkan loo raacayo shaqo qorista Qaranka JSL, SUAASHU WAXAY TAHAY Xafiiska Shaqo Qaran oo hadda qabta shaqo qorista Qaranka xeerkani meela kumuu xusin, waa side Xaalku? Markaa waxaan soo jeedin lahaa in xafiiskaa la dhigo waax ka tirsan hay'adda shaqaalaha dawladda.

**Qodobka 30aad Faqradda 3aad** ee qodobkan waxa ku cad in Hay'adda Shaqaaluhu tixgelin Gaar ah siin doonto shaqaalaysiinta Dadka Naafada ah iyo kuwa lahayb sooco, halka danbe waxa laga raaciyey "Haddii Golaha Xukuumaddu sidaa Go'amiyo", miyaaan Haayaddu madax banaanayn ma Golaha Xukuumadda ayay shaqadeeda u daba fadhidaa, *waxaan soo jeedinayaa in laga saaro intaas danbe.*

**Qodobka 32aad,** waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **faqrad 11aad** oo u dhigan sidan "Xulashada shaqaalaha dawladda waxa si siman looga soo xulayaa dhammaan Gobolada iyo Degmooyinka Dalka, itaxaankana waxa lagu qaadayaa 6 Gobol ee JSL, waanan ayidayaa doodii Xildhibaan Qaasim.

**Qodobka 35aad, faqradiisa 1aad** waxay tilmaamay in Guddoomiyaha Hay'adda Shaqaaluhu samayn karto shaqo qoris gaar ah ayna latashandoonto madaxwaynaha halkaas *waxaan kusoo kordhinayaa in arintaas ay usoo gudbiyaan Golaha Wakiilada dabadeed ay go'aamiyaan xaaladda Hay'adda Shaqaaluhu sheegatay marka u danbaysa madaxwaynuhu ku raaco golaha ama ku diido*.

**Qodobka 37aad, faqradiisa 3aad;** waxay tilmaamay in shaqaalaha Dawladdu yeelanayo Gunno, *waxaan soo jeedin laaha in halkaas la raaciyo Gunnooyinka shaqaalaha Dawladda ee isku mansabka, aqoonta iyo shaqada ahi qaataan gunno isku mid ah, agaasimayaasha guud ama madaxa goobta shaqeedna hubiyo in si cadaalad ah ay Gunnada u qaataan shaqaalaha uu maamulaa*.

**Qodobka 45aad, faqradiisa 5aad;** waxaan soo jeedin lahaa in halkan xeerka lagu xuso in Guddida Anshaxa Wasaaraduhu ku sheqeeyaan si cadaalad ah.

**Qodobka 48aad, faqradiisa 1aad** oo tilmaamaysa shaqo dhimista Qaranka, waxaan soo jeedinlahaa in lagu koobsado qudha faqradda e oo tilmaamaysa Dhaqaale Xumo qudha.

**Qodobka 49aad, faqrasiisa 2aad** waxay sheegay in soo jeedinta Shaqo dhimista ay ogolaanayaan Golaha Wasiirada, *halkaas waxaan soo jeedin lahaa in lagu bedelo Golaha Wakiilada*.

**Qodobka 62aad, faqradiisa 1aad;** waxay sheegaysaa Da'da Hawlgabka, waxana ku jira sinaan la'aan raga iyo dumarka waxaan soo jeedin lahaa in Da'da Hawlgabka la mideeyo oo laga wada dhigo 65 sano.

**Qodobka 64aad, faqradiisa 2aad;** Jadwalka fasaxyada shaqaalaha Dawladda; waxaan soo jeedin lahaa in maadaama oo qarankani shaqo badan u baahanyahay in la sheqeeyo maalmaha 1May, 1Muxaram iyo 1Jan, bedelkeedana shaqaalaha lasiiyo Gunno loogu bedelayo maalmahaas, si aynu nafeheena iyo Caalamkaba u tusno inay inaga go'antahay in aynu Dalkeena u dadaalayno.

**Qodobka 65aad**, waxaan soo jeedinlahaa in lagu daro **faqrad 7aad** oo sheegaysa qofka u baahan inuu qrankiisa u sheqeeyo maalmo dheeraada uu fasaxiisa uu xaqa leeyahay qaranka u ku darsado lasiiyo bil mushaharkeed oo dheeraada oo ah dhiiriglin.

**Qodobka 66aad,** spelling error qaybta u danbaysa qodobkan oo u qoran qaab isku dhexdaadsan "saddex bilood saddex sano".

**Qodobka 75aad,** Warbixinta sannad laha ah iyo qorshayaasha, waxaan soo jeedin lahaa inay usoo gudbiyaan Golaha Wakiilada JSL.

Qodobka hoose wuxu sheegayaa usoo gudbin karaan laakiin waa in laga dhigaa usoo Gubininayaan.

**Qodobka 77aad; LAALIS.** *Waxaan soo jeedinayaa in Qodobkan Gebi ahaantii laga saaro Xeerka.*

**Qodobka 79aad** Dhaarta Shaqaalaha. *Waxaan soo jeedinayaa in Dhaarta Shaqaalaha Dawladda laga dhigo qaab qoraal ah isla markaa lagu lifaaqo heshiiska dawladdu la gelayso qofkaas lagu qoro inuu balan qaado inu daacad u yahay qarankiisa iyo umaddiisaba dadkana ugu adeegayo daacadnimo iyo sinaan*.

**Qodobka 80aad**, waa in qoraal ahaan lasaxaa oo laga saaraa 7xagga hore ka raacday, waad mahadsantihiin**.**

**Md. Sh. Siciid Maxamed Ismaaciil (Sokeeye)** **(2min 00sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, {Amiir allmuminaan cali binu daalib wuxu yidhi maa-bunyaa calaa-khada'a wahuwa khada'a} waxa kastoo lagu dhiso waxaan sax ahayn natiijada katimaada waa waxaan sax ahayn, dhamaan teen waxaynu isla waafaqsanahay mashruucan horteena yaala ee kusaabsan shaqaalaha dawladda iyo hay'adda shaqaalu huba inuu mustawij yahay oo uu isku jiro, ahaydna in mid waliba inuu yeesho xeerkiisa ugaarkaa isaga oo aanay is dhexgelin.

Sidaa la'ajligeed waxaynu dhamaanteen kawada dhawaajinay, inay jiraan qodobo Dastuuriya oo mashruucan aynu manta kadoodaynaa uu baal-marsanyahay, sidaa la'ajligeed, sida ay saaxiibadaydii iga horeeyayba ay sheegeen *waxan ku talinayaa ama aan soo-jeedinayaa in mashruucan isaga ah, inlakala qaado oo loo kala qaado sida uu ukala qaad sanyahay oo ah, xeerka hay'adda shaqaalaha Dawladda iyo xeerka Aas-aaska Hay'adda Shaqalaada Somaliland.*

Sidaa la'ajligeed waxa aan arkaa in qodobkaa kadoodistiisu, inaanay man-fac lahayn maadaama uu masdarkiisu uu markii horeba khalad ahaa, laguna celiyo halkii uu kayimi, si uu ugayimaado isagoo sax ah, inaga doodeenu ay noqoto mid kudhisan caqli iyo macrifad. Salalaahu calayhi wasalam.

**Md. Barkhad Jaamac Xirsi Batuun** **(13min 28sec)** Gudoomiyaha Golaha iyo mudanayaasha golaha oo dhan waan salaamayaa, si kooban aragtida guud ee xilibaanada golaha Ayaan laqabaa xeerkani inuu ubaahanyahay, in dad khaas ah gudoomiye loo saaro, in wakhti dheer lageliyo maaha waayo dhaliilo fara badan ayuu leeyahay, dhawar qodob baan doonayaa inaantaabto.

**Qodobka 12^aad farqadiisa 3^aad** iyadoo oo aan xilibaanada laqabo Ayaan si gaar ah is leeyahay utaabo xarunta guud ee shaqaaluhu waxay noqonaysaa caasimada jamhuuriyada Somaliland, waxayna laamo kafuran karaysaa gobolada dalka iyo degmooyinka waa ikhtiyaar way ka furan kartaa laakiin waajib maaha.

Waxaynu ka dheregsanahay nidaamka shaqada ee shaqaalaha dawlada inay inta badan imtixaanadooda iyo qaada shadoodu ay sal-dhig u tahay caasimada,  oo inanka Awdal degan iyo inanta sool katimaadaa waxay imtixaanka ku galaan Hargaysa, markaa waxa muuqata xarumaha hayada shaqaalaha iyo fursada shaqo ee gobalada galbeedka iyo bariga inuu aad u xadidanyahay, markaa iyadoo dheeli-gaasi jiro in xeerka hadana lagu muujiyo hanaanka shaqaalaha iyo imtixaanadkooda iyo hay'adda ugu weyni noqonayso hargeysa uma arko inay tahay mid cadaalada.

Markaa bartaa waxan isleeyahay dhaliil weyn baa kamuuqata qodobkaa, qodoka labaad aan isleeyahy inaynu dulistaagno waxa kamida.

**Qodobka 14^aad** qaab dhismeedka hay'adda shaqaalaaha , farqada 1aad waxa uu leeyahay Gudoomiyaha Guddida ku-xigeenka iyo shan xubnood oo kale saasuu dhigayaa ,markaa hayad {public station} tahay dee sidaas noqon maysee gudoomiye uunbuu madaxweynuhu u magacaabayaa iyo kuxigeenkiisa iyo agaasime ,laakiin halkan waxa lagu dhigay qodobkaa 14aad inay tahay {national commission }oo kumishan qaran inay tahay taladuna waxay ka godaa gudoomiyaha iyo kuxeenkiisa ,{structure} ma waafaqsana {public station, national commission}, markaa iyadana waxan isleeyahay isma waafaqsana qaab kuu qodobkani udhigan yahay iyo shaqada dhabtaa {structure} keedu markaa iyadana bartaasaan isleeyahay kudhaaf .

Waxa kale oo sharuudaha magacaabista xubnaha Hay'adda shaqaalaha oo ahayd sidaan hore usheeegay in laga dhigo komishanka shaqaalaha qaranka hadii aynu doonayno in xeerka sidiisa u dabaqno, qodobka {H} ee ugu danbeeya inuu maskax ahaan iyo jidh ahaanba ugudanayo xilka waa takoor waxay takoor kutahay daka naafadaa qofka naafadaa waxaynu ognahay inuu furiskiisa shaqo ee Hay'addaha bareefadkaa iyo kuwa gaarka inay aad cidhiidhi ugutahay ,masalan waxan saa uleeyahy haduu qofku gacanta midig qabo ,oo gacanta bidix uu go'anyahay maskax ahaana u caafimaad qabo taa micnaheedu wuxu yahay degreetada uu madaxweynuhu soo magcaabayo inuu iin uu leeyahay xubin xubnihiisana kamida ay maqantahay ,laakiin shardi maaha inuu labada gacmood la'yahay waa inuu gacanuun layahay markaa qodobkaasi wuxu ka hor imanayaa xuquuqda daka naafadaa oo ay tahay in ilgaara loo yeesho inuu curyaan yahay ,uu lug keliya ka naafaynayo hadii uu il uu qabo ilna uu la yahay dee kuwaasoo dhan kam reebikarayaan xuquuqda muwaadin iyo inuu shaqaysto.

Markaa digreeto madaxweyne kusoo bixikarayo xeerkaasi wuxuu horseedayaa inuu xaquuqo farabadan oo naafa ahi oo daka reer Somaliland kamid ahi ay waayaan xuquuqdooda.

Inaguna waxaynu ku dhaaranay inaynu dadka iyo dalka iyo diintaba cadaalad ugu shaqaynayno markaa waxan leeyahy qodobadaa dadka nafadaa ka hor imanaya xuquuq doodana aan sii nayan inaynu horseed kanoqono maaha taana waa in aynu hoos u eegno.

**Qodobka 20aad** xilaka iyo waa jibaadka gudoomiye ku xigeenka ,waa inu caawiyo gudoomiyaha inuu kusimo markuu maqanyahay uuna qabto shaqooyinka loo igmaday xuquuq dhan oo loo igmaday oo baarlamaan ah oo digrayto madax weyne ku magacaaban masuul qarana in sadexdaa lagu ururiyo shaqadiisa ,sidii gabadh gudoomiyaha nadaafadiisa uqaabilsan xafiiska markuu kamaqanyahayna hagaajisa markuu waraaqo ubaahdana ukeenta markuu shaah ubaahdan u keenta markaa shaqada dhan ee gudoomiye ku xigeenka dhan ee shaqaalaha qaranku ay noqoto waxan u arkaa nusqaan ,iyo si guudba gudoomiye ku xigeenada Hay'addaha dalka iyo xuquuqo farabadani ayay la'yihiin , hadii waa jibaad intan kabadan gudoomiye kuxigeenka lasiinayo axsan .

Waxa isaguna jira qodobka 30aad firqadiisa 3aad Hay'adda shaqaalaha waxay tixgelin gaar ah siinaysaa dadka naafada waa sax, oo xuquuqaa ka maqan iyo dadka laga tirada badan yahay ,waxaan isleeyahay ereyadaa tiro badnida horta meel laysku tiriyay majirto, waxayna horseedaysaa boog iyo nabar bulsho dhan oo karaamo iyo sharaf dalka ku leh oo muwaadiniin ah, xirfad yahano ah laga gelayo weeye , inagoo Golihii xeer dejinta dalka ahna in ay qodobo noocaas ah laynoo keeno oo aynaan dhugan hoosna u eegin, waxaan u arkayaa ilduuf, waxaan qabaa eray bixinta sharci iyo ta Soomaaliyeed inaynu il gaar ah siino oo nidhaahno dadka laga gardaran yahay, laakiin laga tirada badan yahay xaqdaraa jirta, umad dhan oon idinla diina in la af-la deeyo, Somaliland oo shaqooyin xirfadyahana qabta oo dalka kaalin muhiima kaga jira ayaa waxay xuquuqaad kooda ku la yihiin waxaan sal iyo raatoona lahayn.

Markaa tira badnaantaa iyo ereyadaa xun lagu celcelinayo, waxay niyad jab ku tahay qabiil dhan oo han iyo himilo leh oo meel sare hiigsanaya, waa dad magacyo fara badan leh waa dad reeraha kale ee Somaliland la siman waxaana ka mida, Tumaalada, Anaasta, wardheeraha, Muusa dheriyada, madhimaanka, waana dad sida beeluhu beela u yihiin beela u ah, markaa maqabo in ereyadaa lagu celceliyo,

Waxan gola weynaha ka codsanayaa inuu noqdo xeerka tirtirida takoorka bulshadaa laga gardaranyahay iyo bulshada kale naafada ah iyo cidii kale nugulba ee xaquuqaha farabadani ay kamaqanyihiin, ay xeerashu aanay siinin, ee xad gudub yadaasi

kudhaceen, waa inaynu noqonaa golihii uhoreeyay ee go'aan ka soosaara xeerkaa, gole weynuhuna iga aqbalo idinkuna Taladda kudarsataan soojeedimahayga.

Waxan is leeyahay **Qodobkaa 35aad** magacaabis gaar ah side buu usamayn karayaa gudoomiyaha shaqaalahu ama hay'adu cida magacaabista gaarka ah loosamaynayo tusaale idinka iyo cali jaamac xaamud markaad golaha latashataan laakiin awood gaaraa idin siisay inaad waxna magacaabi karaysaan waxna eryikartaan ,laakiin magacaabis khaasa madax weynahaa lala tashanayaa , marhadii hay'ad dawladeed oo dadaka iyo dalkaba lagarabo, gudoomiyaha lasiinayo magacaabis gaar ah lasiiyo ,markaa gudoomiye kasta oo lamagacaabo wuxu uyeedhi doonaa ilmaadeeradii ,ilmaabtiyadii ,markaa qodabkaa inlagu soodaraaba xaaraana xuskiisa mooyaane oo golaha la horkeeno oo golaha horyimaada .

Laba qodob baan ku gabagabaynayaa oo aan leeyahay ,waana Qodobkaa 79aad qofka 1milyan qaata oo xafiis maamulin oo masuuliyad qaran oo weyni saarnayan ama karaaniya oo u soo shaqo tegay caruur fara badan oo laydh laga rabo oo aan dawladu laydh siinayn ,oo guryo dawladu leedahay aanay kujirin oo iskuuladu bilaash u ahayn, gola ahaana aynu sharciyayno waxan u arkayaa xaqdaro kale , waxan is leeyahay waxay ahayd inaan iyaga utudhno dhaartuna cuquubooyin baa kadhasha cuquubooyinka kadhashana waynu garanay naa sharciyan.

**Qodobka 60aad** wuxu leeyahay qofka shaqaalaha ahi wuxu leeyahay cabashuu uqaadan karaa maxkamada sare ,qofka shaqaalaha ahi mushaharkiisa waanu ognahay xaaladii saynu lasoconaa waa milyankaa waxaan dhaafsanayn looyarku markuu kiiska gelayo waa kiisaka qaarbaa lagu qaataa 5000$ marka xuquuqo madaniya laga hadlayo lacag fara badan bay qaataan qofkan racfaanka qaadanaya ma awoodikarayaa inuu looyar qabsado ,mise qareen dadweynaa looqabanayaa oo bajadkeeda wasaarada cadaalada bixinaysa mise qofkaa iska bixinaya waxan u arkayaa xad gudub kaloo qofku xaquuqdiisa kuwaayi karo lacag uu warqado kuqortana mahaysto looyarkuna lacagbuu kushaqeeyaa taa laftirkeedana in lasaafo oo laqeexo Ayaan qabaa.

Gudoomiye waxan ku gaba gabaynayaa in doodaa maalinkasta golaha 82xubnood looqaybinayo waxan u arkaya tacab inay noqonayso wakhtigeena inay cunayso waxan u arkayaa inuu qofkastaaba uu yidhi intuu ninka kale uu yidhi uu odhanayo markaa wixii oo shilinta lagasooguray sifo sharciya lagu eegay mid dhaqaale lagu eegay xeerar lagu eegay dalaka jaarkeena lagu eegay oo bisil inay golaha horyimaadaan waxan soo jeedinayaa in xeeraraka ugu badan ee dalka lagu maamuli doono inay fulin tooda iyo maamulkoodaba yeeshaan golaha wakiiladuna u unoqdo xeer abuure xeerar farabadani ay naga baxaan.

Waxan kudarayaa garyaqaano fara badan in ilaa toban qof laga dhigo Shan sharci yaqaan oo xeerasha caalamigaa iyo Shan sharci yaqaan oo sharciyada islaamka yaqaan iyo laba aqoon dheer u leh dhanka Af-soomaaliga, iminka markastoo xeerka akhriyayno lagayaabaa hal eray oo soomaali ah uu koobsanlahaa. dhaw qodob oo xeerka kamida markaa shir gudoon ahaa iyo gole ahaan waxan usoo jeedinayaa si culayska xeeraraka iyo culays kooda ay uyaraato, gudi kastoo xeer loodiro halagu kaabo garyaqaano uu goluhu leeyahay miisaaniyada 1aad aynu ku daesano hanoqoto golaha oo aqoon sharci leh oo ay kadhaxlaan kana soobaxaan golaha oo doodaha qaar qayb kanoqda oo shuruucda islaamka Bhd kahaysta.

**Md. Cumar Jaamac Faarax (1min 43sec):- Qodobka 32aad** imtixaanka shaqada ,markaa waxa inagu maqaala ah in shaqadu inta badan aanay hufnayn oo marka wasaarad ama hay'ad dawladdeed shaqaalo ubaahato ,layidhaah daa wasaaradaa iyo hayada shaqaalahaa kala qaybsada waxaynu ubaahanahay in lagu daro in laxayaysiiyo warbaahinta dawlada oo kale marka shaqo loo baahdo, wasaaradaha lagu dhejiyo markaa dadka loo tartansiiyo imtixaanada ay qaadaan dad lagu kalsoonyahay si loo helo daah furnaan taas qodobkaa waan ku kordhin lahaa ,in la isticmaalo meelaha lagu xayaysiiyo booska banaanaada sida warbaahinta qaranka,joornaalada taasi waa qodob .

Si loo ilaaliyo hufnaan ta iyo kalsoonida dadka shaqada lehna loosoo celiyo dhamaan, ardayda jaamacadaha kabaxay.

**Qodobka 26aad D**astuurka farqadiisa 90aad farqadiisa 3aad waxay sheegaysaa in ay agaasimaha guud uu madaxweynuhu maga caabikaro isagoo kala tashanaya wasaarada shaqada ku leh, markaa halkan wax inta badan leh in wasiirku shaqada kajoojiyo agaasimaha guud isagoo aan latashan madax weynaha ,markaa haduu wasiirku uu fahmiwaayo markuu shaqada kajoojinayo iyadana waa inuu madax weynaha kala tashado , mararka qaar si khaladaa lays kugu dhicikaraa iyada aynu intaa kudarno Ayaan soojeeinlhaa aad baad umadsantihiin.

**Golihii 5aad Kal-fadhigii 1aad Fadhigii 12aad**

**Isniin 06–August- 2021**

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib.

**Gudoonka: -** Gudoomiye Abdirisaaq Khaliif Axmed

**Ajandaha Fadhiga: -**

- **Doodda Xeerka Shaqaalaha Dawlada Maalintii 3aad**

**Md. Aadan Cismaan Xarbi (3min 01sec):-** Mudane gudoomiye doodeenu waxay ku saabsanayd xeerka shaqaalaha Xeer Lr.9/2021 Qodobka 1aad hadii aan eego waxa inoogu qoran in Xeekan loogu yeedhayo xeerka shaqaalaha dawladda , meeshaa markaan u fiirsaday waxaan ku arkay hadalkiina intii badnayd waxaa la isla qaatay in ay laba xeer meeshaa isku guda jiraan. Xeerka shaqaalaha dawlada iyo xeerka hay'adda shaqaalaha, *markaan dhinac walba ka eegay waxaan soo-jeedinayaa in labada xeer lakala saaro, oo xeerka Hay'adda marka hore la horaysiiyo ka Hay'addu marka uu samaysmo, kadibna xeerka shaqaalahana lasameeyo.*

**Qodobka 130aad** ee Dastuurka Qaranku wuxu sheegayaa in Hay'adda shaqaalaha dawlada, Hanti dhawraha dawladda, Xeer-ilaaliyaha guud iyo Bangiga dhexe, markaa Hay'addahaa kale waxay leeyihiin Xeerar u gaar ah oo golayaashii hore sameeyeen

Markaa laba xeer loo kala saaro aynu dib ugalno Ayaan soo jeedinayaa, Hay'addahaa kale ee dawladu waxay leeyihiin xeerar u gaara oo Golayaashii hore sameeyeen, Xeerkan oo horana loo Ansixiyay Hay'adda shaqaalaha dawlada oo ilaa intaana wadanka soo maamulaysay wax xeera looma samayn iminkana waxa la dhexgeliyay xeerka shaqaalaha dawlada , markaa waxay ku wanaag santahay inay Hay'adda lafteeda dhismaheeda iyo xeerkeeda la dhamaystiro dadka ay xukumayso, xeerkeeda hasoo diyaariso, markaa iyada marka hore xeerkeedii ladiyaariyo.

Qodobada kale oo inoogu sii xiga in marka xeerkaa shaqaalaha dib loosoo abaabulo oo hawshiisiina la galo, Sidoo kale waxan jeclahay inaan guda gelin xeerar kale si aynaan ugu sii rafanin intaa ayaan ku soo gabo-gabaynayaa.

**Md. Cabdirashiid Cabdilaahi Muuse (7min 02sec):-** bismilaahi raxmaani raxiim, ugu horayn gudoomiyaha mudanayaasha xilibaanada iyo shaqaale weynaha Golaha Saxaafada dhamaantiin asalaamu calaykum, Mudane Gudoomiye iyo mudanayaal waxan kahadlayaa.

**Qodobka 1aad farqadiisa 8aad** oo dhanaysa hay'dda dawladeed waxa loola jeedaa qaybaha kaladuwan ee Hay'addaha kaladuwan ee Maamulka Gobolada, Degmooyinka

iyo hay'add kasta oo fulineed oo aan ahayn waaxda xeer dejinta, Baarlamaanka iyo Garsoorka halkaas oo aan ku dari lahaa Hay'addaha aan kamid ahayn Hay'addaha dawlada, Hanti-dhawrka guud, Baanka dhexe, Xeer-ilaaliyaha guud iyo Hay'adda shaqaalaha iyo kominshinka doorashooyinka qaraka.

Sida uu tilmaamayo Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland **Qodobka 113aad** iyo xeerarka hanti dhawarka guud 76/2016 dhaqan galay iyo xeerka doorashooyinka qaranka 91/2020 waxay tilmaamayaan dhamaan inay Hay'addahasi dastuurka iyo xeeraka kaleba ay madaxbanaan yihiin.

Hay'adda shaqalaha waxad moodaa runtii in hay'ado badan oo madax-banaani dastuurku siiyay iyo xeerarka dhaqan galka ahba inay ku tilmaaman yihiin Hay'adda shaqaalaha waxan soo jeedin lahaa in laga saaro oo aanay kamid noqonin Hanti-dhawarka guud, Baanka dhexe, xeer-ilaaliyah guud, iyo Guddida Doorashooyinka Qaranka.

**Qodobka 10aad farqadiisa 1aad** waxay tilmaamaysaa saacadaha shaqada waxay leedahay todobaadkii waxa lashaqaynayaa 6 saacadood oo udhiganta 48sacadood.

**Qodobka 24aad farqadiisa** A, B, C, D, waxay sheegaysaa Qaabka Darajooyinka shaqaalaha ay kushaqaynayaan ay kala duwanyii, sidaa si lamida maadaam oo lasheegay wiigii intay shaqaynayeen, saacadahay shaqaynayeen iyo tarajooyinkoodiiba, **waxan soo jeedinlahaa in lagu cadeeyo musharkay qaadanayaan si loogu cadeeyay saacadahay shaqaynayaan iyo geredhis kooda in lagu cadeeyo musha haraad kooda darajooyinkkoda walba.**

**Qodobka 4aad** farqadiisa waxay tilmaamayaan fulinta Degmooyinka Golaha deegaanka iyo xog-hayaha fulinta ee gobolada dalku, waxay kamid yihiin shaqaalaha dawlada waxan laga soo dhex xulanayaa shaqaalaha kala duwan ee Hay'adda shaqalaha dawlada iyadoo loo raacayo magacaabistooda xeerka ismaamulka gobolada dalka iyo degmooyinka ee Xeer Lr. 23/2019 xeerka ismaamulka iyo goboladu waxay sheegeen Qodobkiisa 49aad wuxu sheegayaa shuruudaha lagu soo dooranayo, masheegayo inuuyahay shaqaale dawladeed, sidaa awgeed waxan soo jeedin lahaa inaan xog hayaha fulinta dawladaha hoose iyo goboladuba aanay kamid noqonin shaqaala ha dawlada.

**Qodobka 26aad farqadiisa 7aad** waxa uu sheegayaa agaasimaha guud in marka shaqada laga wareejiyo oo shaqada aan looga eryin xil gudasho la'aan ama denbi uu galay waxa uu kuwaregayaa Hay'adda shaqaalaha dawlada waxana uu qaadanayaa mushaharkii Aas-aasiga ahaa oo buuxa iyo kala badh guno xileedkiisii sida kucad,

**Qodobka 90aad** ee dastuurka Somaliland ee awoodaha madax weynaha kamid tahay waxyna Iyana soojeedinlahaa inuu kahor imanyo dastuurka qodobkiisa 90aad inaanu kamid noqonin shaqaalaha dawlada laga soo xusho.

**Qodobka 30aad farqadiisa 3aad** Hay'adda shaqaluhu waxay tix gelin gaar ah siinaysaa dadka naafadaa iyo dadka laga tirade badan yahay ama kooxaha kale ee lafaquuqo waxan jeclaan lahaa inay qodobka ku cadaato oo aanay noqonin madax weyne iyo xukuumadi go aamisee xaq ayleeyihiin oo halkan kuqoran uu noqdo.

**Qodobka 40aad farqadiisa 3aad** qofka shaalaha dawladeed waxa lasiin karaa horu marin mushahara hadii ay hawli kutimaado , xaalado ay kamid yihiin xanuun ama geeri qaraabadiisaa ama xaalada kale oo sababa horu marinta xadiga ugubadan ee horumarinta mushaharkaa inuuna kabad naanin bil inaanay kabad naanin isla markaana uu ku sooceliyo afar bilood waxan soojeedin lahaa runtii sida farqada koowaadba ku xusan , qofku markuu xanuun sado ama qaraabadiisii ay geeri kutimaado ama ay duruufi kuyimaadan aad bay u kooban tahay in layidhaahdo bil halasiiyo , waxan halkaa soojeedinlahaa maadaama lagayaabo in debeda looqaado ama dalaka jaarkaaba ,waxan soo jeedin lahaa in halkaa laga dhigo in sanad loo qadimo si uu daruufihiisa loo xaliyo , sidoo kale

**Qodobka 41aad** waxa uu sheegayaa xaqul ciidka shaqaalaha waxan soojeedinlahaa, in maadaama ay sanadkii ku jirto laba ciidood, *waxan soo jeedin lahaa in bilkasta lasiiyo musharka badh kiis, sidoo kale qodob waxan laqaaba muda nayaashii soo jeediyay*.

**Qodobka 70aad** oo sheegaya in fasaxa masuuliyiinta qoyska ayaa waxa uu sheegayaa in sadex cisho lasiiyo, taana waxan laqabaa muda nayaashii hore ee til maamay in lasiiyo 7cisho aad iyo aad baad umahad santihiin.

**Md. Maxamuud Xayir Ducaale (7min 05sec) -** Asc. Waad mahadsantahy guddoomiye.

**Qodobka 10aad** oo ka hadlaya saacadaha shaqada farqadiisa **4aad** iyo **5aad** siday u qoranyihiin ban ku taageersanahy, tan labaad farqada **7aad** oo sheegaysaa bisha Ramadan waxaa saacadaha shaqada laga dhigayaa hal saac, taas anuu wanka bedelayaa oo waxaan leeyahay waa in laga dhigaa 5saac.

**Qodobka 14aad** farqadiisa labaad xarafka **A** oo sheegaya agaasimaha guud oo noqonaya xogyaha gudiga labadaa waa in lakara saara, oo uu agaasimaha guud agaasime guud noqdo gudiga loo magcaabo xoghayaha, xarafkiisa **C** oo sheegaya shan xubnood oo gudi ah ma qeexna gudigaasi awooda ay leedahay iyo shaqadeeda waxaan leeyahay waa in la qeexa awooda ay leedahay gudigaasi iyo shaqada ay qabanayaan

**Qodobka 16aad** farqada **1aad** xarafka ***G, D*** oo ka hadlaya inuu leeyahay aqoon heer jamacadeed ah haystana ugu yaraan darajada kowaad

**G,** anuu leeyahay xirfad shaqo oo aan ka yarayn shan sano waxaan leeyahay waa in labadaa xaraf laysu geeyaa hadii uusan haysan shahaado waa inuu leeyahay khibrad shan sano ah

**Qodobka 17aad** xarafka **C** oo ka hadlaya asbabaha xubinimada gudigu ku bananan karto waa in lagu daro hadii uu kabaxo diinta islaamka, isla qodobka xarafkiisa E hadii uu gudankari waayo xilkiisa sababo caafimaad daro awgeed, bukaan baskaxeed awgeed oo ay cadeeyeen gudi dhaqatiir ah gudigaasina waa inay ahaata gudi madaxbanaan,

**Xarafka 21aad** ee sheegaya kulamada gudiga joogta ah todobaadka hal mar, halka kuwa joogta ahyn laqabankaro markuu codsado guddoomiyaha gudiga ama ay codsadaan xubno aan ka yarayn saddex xubnood, waxaan leeyahay waa in taas laga dhigaa bishiiba hal mar.

**Qodobka 41aad** ee ka hadlaya xaquul ciidka madama ay tahay maalinta ciidu maalin farxadeed waa in loo sinaadaa xaquul ciidka ka usareeya shaqaalaha iyo Kan uhooseeya waa in lasiiyo wax isku mida oo noqonaya marka laysu geeyo mushaharka **A+b+c/3** maxsuulka kasoo baxa in lasiiyo shaqaalaha maalinta ciidka.

**Qodobka 1aad** xarafka **97** oo sheegaya xeerka shaqaalaha iyo

**Qodobka 12aad** oo sheegaya xeerka asaaska shaqaalaha dawladda labadaa qodob waxaan ku raaacsanahy sidii ragii hore ka hadleen waa laba qodob waxaan raaacsanahy in lakara saaro.

**Qodobka 34aad** oo ka hadlaya gudiga imtixaanka shaqaalaha waxaan ku darayaa in gudigu noqoto gudi dhaarsan, waxaan kaloo leeyahay in gudigaasi ka koobnaata dhamaan gobolada dalka. Waxaan kalo soo jeedin lahaa in lagu daro xeerka qodob odhanayaa dheelitirka shaqaalaha gobolada dalka.

**Md. Cali Jaamac Carraale (Cali Qaran)** **(9min 26sec):-** bismilaahi raxmaani raxiim

Ugu horayn guddoomiyaha golaha, dhamaan mudanayaasha xildhibaanada waxaan leeyahay asalaama calaykum.

Doodayda awalkeeda runtii waxaan ku raaacsanahy labadan xeer ee aad moodo in si laysugu soo hoos qariyey waxaan qabaa sidii xildhibaanadii iga horeeyey ay sheegeen in lakara saaro

Xeerka shaqaalaha iyo xeerka haayadda shaqaalaha, oo laba xeer oo golaha yimaado ay noqdaan iminkana iminkana aynu ku koobnaano xeerka shaqaalaha.

**Qodobka 4aad** farqadiisa **1aad** ee page ka 11aad waxaan ku raaacsanahy xildhibaanadii iga horeeyey e Mubarak muse iyo saleban goox, waxa uu dhigayaa qodobkaasi xeerka waxaa lagu dabaqayaa dhamaan shaqaalaha joogtada ah ee dhamaan haayadda kala duwan ee dawladda

Qodobkaasi dhamaan wuxu koobsanaya in hayadahii dawladda ay haayadda shaqaluhu maamulayso, marka waxaan qabaa waa qodob dhamaan lagu suulinayo xeerarkii kale ee ka horeeyey marka waxaan qabaa in laga saaro ama la cadeeyo hayadaha uu xeerkani khuseeyo, halkana aynu ku koobno hayadaha dawladda kuwa madaxa banaan in laga saaro.

**Qodobka 4aad** farqadiisa **2aad** page ka **11aad** waxaa ku yaala xoghayaasha dawladdaha hoose inay kamid yihin shaqaalaha ay maamulayso hayadda shaqaluhu marka waxaan qabaa in lays waafajiyo Qodobka kuyaala,

Qodobka lambarkiisu yahay **23/2019**

**Qodobkiisa 73aad** oo quseeya xeerka maamulka iyo degmooyinka oo runtii sheegaya in haayadda shaqaluhu ay maamulayso dawladda hoose shaqaalaheeda marka Qodobka waxaan qabaa in lagu bedelo

**Qodobka 4aad** farqadiisa **4aad** ee isla page kan oo dhigaya hadii dhacdo iska hor imaad dhex yaala qodobada xeerkan iyo qodobo kale oo dhaqan galay waxaa suulinayo isla xeerkan, marka waxaan qabaa in halkaa laga dhigo oo lugu koobo oo quraa

**Qodobka 23/2019**

**Qodobkiisa 73aad** inuu meesha kasaarayo madama aan qabo in shaqaalaha dawladda hoose inan kamid noqonayn shaqaalaha ay maamulayso haayadda shaqaluhu.

**Qodobka 4aad** farqadiisa **3aad** page ka **12aad** wuxuu dhigayaa xoghayaha fulinta dawladda hoose in uu kamid noqdo haayada shaqaalaha waxaan ku raaacsanahy xildhibaanadii iga horeeyey in aanu kamid noqonin oo uu ka madaxbananado si ay fursad u helaan dhamaan shacabka Somaliland ee danaynaya in ay ushaqeeyaan dawladda si muwaadinintu ay fursad uwada helaan.

**Qodobka 8aad** farqadiisa **2aad** page ka **15aad** waxa uu odhanayaa shaqaalaha dawladeed ee ku sifoobay waxyaalaha ku xusan farqada **1aad** ee qodobkan waxa uu mutaysanaya talaabooyinka anshax marineed, anuu waxaan qabaa in farqada loo raroo la yiraahdo,

**Qodobka 55aad** sababto ah halkan wuxu mutaysanaya kuma qorna madama xaga dame ee **qodobka 55aad** ay kuqoran yihin dhamaan shaqaala weynaha anshax marintoodu halkaa waxaan qabaa in halkaa loo raro oo la yiraahdo ee waafaqsan **qodobkan 55aad** ee isla xeerkan qodobkiisa **1, 2, 3**

**Qodobka 23aad** farqadiisa 7**aad** page ka **24aad** ee dhigaya agaasimayaasha guud inay kamid noqdaan shaqaala weynaha qaranka waxaan laqabaaa xildhibaanadii iga

horeeyey oo ka saarayey inay kamid noqdaan shaqaalaha oo umadax bananaysiinayey inay qayb ka noqdaan siyaasada.

**Qodobka 50aad** ee kala saraynta shaqaalaha dawladda farqadiisa **3aad** page **34aad** ee waxa uu dhigayaa hadii shaqaalaha darajadoodu isku mid tahay isla markaasna ay taariikh isku mida heleen darajada waxaa loo eegayaa dhinaca waaya aragnimada waxaa saraynaya midka waaya aragsan,hada hadii ay isla waya aragnimada ay isku mid noqdaan anuu waxaan qabaa in loo eego da,da waxa lagayaba in laba mudane oo kamida shaqaalaha inay isku wakhti yimaadeen ,darajadana isku wakhti qaateen isku waaya aragnima yihin waxaan qabaa in loo eego oo halkaa lagu daro waa in loo eega da,dooda.haba ka da,da weyni in uu kaga maamulka sareeyo.

**Qodobka 6aad** farqadiisa **2aad** page ka **14aad** waxa uu dhigayaa hayadaha shaqaalaha dawladu waxay dejinayaan habraaca iyo siyaasada lagu qiimaynayo shaqaalaha si loo ogaado in ay fuliyeen waajibaadka shaqaalaha ee ku xusan qodobkan,waxaaan u arkaa in xeerkan laga sheexaday qodoba kala saarayey ,waxay ahayd inaan halkan ku cadayno,

**Qodobka 30aad** farqadiisa **1, 2** runtii labadaa qodob waxaan jecelahay in laysu soo raro oo hal qodob laysaga dhigo,

**Qodobka 30aad** waxa weeye shaqa qorista shaqaalaha dawladda waa in loo fuliyaa laguna saleeya tartan cadaalada iyadoo ay uwada siman yihin dhamaan muwaadiniinta reer Somaliland,

**Qodobka 3aad** wuxuu dhigayaa wuxuu kasoo horjeeda qodobkan iyadoo taa layiri waa cadaalada iyo sinaan hala siiyo shaqaalaha ayaa hadana qodobkan, dad gaara ayaa laga saaray sinaantii iyo cadaaladii marka waxaan odhanalaha labadaa qodob halaysu raro halaga dhigo hala raaciyo sidookale waxaa tixgelin gaara lasiinayaa dadka baahiyaha gaaarka qabaa,waxaan odhanlahaa meesha halaga saaro,dadka laga tirade badanyahay sababto ah qodobkan laftiisa takooorid ku keenaya dadkii dadka qaar takoorid kukeenaya waxaan qabaa mar hadii muwaadiniinta Somaliland ay simanyihiin in aan shaqada dhexdeeda aan lagu takoorin oo la odhan shaqaala hebel oo shaqada tartan usoo galay waa laga tira badanyahay silo sinaado oo cadaaladii utimaado waa inaan lagu darin dadka laga tirade badanyahy marka labada qodob halaysu raro ban qabaa oo hal qodob halaga dhigo,sido kale.

**Qodobka 3aad** waxaa ku laran golaha xukuumadu siday goaamiyaan taasina waxaan qabaa inay tahay qodob aan tafsiir lahayn isagana meesha laga saaro labadaa qodob hal qodob layskaga dhigo

**Qodobka 31aad** farqadiisa kowaad xarafka **a** waxaa uu dhigayaa qodobka a ugu yaraan shahadada jaamacada ama waaya aragnimo shaqo oo udhiganta, halkana madama tii hore layiri wax udhigma tana ladhaho wax udhigma, waxaan qabaa

**cutubka 8aad** waxa uu qoraya anshaxa shaqaalaha maal allaale meel ay kaga jirto majirto shaqaluhu haduu soo cawdo oo isaga laftiisa cabasha soo muujiyo qaabkuu ucaban lahaa cabashadiisana ugudbin lahaa marka waxaan odhanlahaa halkaa aynu qodobada cabashada shaqaalaha aan ku kordhino dhowr qodob oo ka hadlaya qaabkay shaqaluhu usoo caban lahaayeen iyo cabashadoodu halkay marin lahaayeen,sidokale waxaan la aragti ahay xildhibaan xasan ogaal iyo abdirashiid oo kudaray hadii shaqaalaha ay xaalad ku timaado geeri ay ku timaado qaabkay uheli lahaayeen xaq muujinaya inlagala qayb qaato geeriyaha dhaca haday iyagu geeriyoodaan waxay heli lahaayeen familayadoodu helilahayeen in qodobkaana aan ku darno oo aan ku kordhino xeerka shaqaalaha.

## Golihii 5aad Kal-fadhigii 1aad, Fadhigii 13aad

**Sabti 11–August- 2021**

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib.

**Gudoonka: -** Guddoomiye Abdirisaaq Khaliif Axmed

**Ajandaha Fadhiga: -**

- **Doodda Xeerka Shaqaalaha Dawladda Maalinta 4aad**

**Md Saleebaan Nuur Warsame (5min 42sec):** Busmilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha, Mudanayaasha, Shaqaalaha iyo Saxaafadaba Asalaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

Guddoomiye doodu waa mid muddo badan inoo soo socotay xildhibaano badana ay ka hadleen meel wanaagsan inoo maraysay, waxaan si leeyahay waa meelihii ugu dembeeyey. Waxaan soo qaadanayaan oo aan dooda ku taageerayaa xildhibaanadii iga horeeyey. Arrintii ugu horeysay sida Qodobka 4aad ama 26aad oo ka hadlaya kala saarista xeerkan oo laba isugu jira, waxaan taageersanahay xildhibaanadii sharafta badan ee soo jeediyey in la kala saaro Xeerka Shaqaalaha Dawlada iyo Xeerka Hay'adda Shaqaalaha Dawlada.

Waxa kale oo aan soo qaadanayaan Qodobka 10aad oo ka hadlaya saacadaha shaqada. Sida aynu ognahay saacadaha shaqada waxaad moodaa inay dadweynuhu baahiyo badan u qabanaa, isla markaana marka saacadu soo gaadho 12 duhurnimo in qofka wer-wer badani ku dhaco masaafo soo socday ee wadaayinka oo fiicnahay. Waxaan iyadana raacsanahay in qaynu kordhino saacadaha shaqada oo Qodobkan 10aad ma sheegayo xiliga shaqadu bilaabmayso iyo xiligay dhammaanayso, laakiin 48 saac ayuu soo qaadanayaan wiigii, waxaan soo jeedinayaa in aynu sheegno wakhtiga shaqadu bilaabmayso iyo wakhtiga ay dhammaanayso, isla markaana wakhtiga shaqada la kordhiyo.

**Qodobka 10aad farqadiisa 6aad** waxa ku qoran "Muwaadinku haddii uu shaqadiisa ku iman waayo 24 saacadood inuu keeno warbixin" waxaan qabaa waddan balaadhan ayeynu joognaa wakhtiguna wuu ku kooban yahay 24 saacadood. Qofka muwaadinka ah wax kasta dhici kara inay ku yara koobantaan qabaa fikir ahaan. Waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo 48 saacadood.

Waxaan xildhibaanada ku taageersanahay in hay'adda Madax-bannaan ee Dastuurku sheegay inay Iyana sidooda uga madax-bannaanaadaan. Qodobka

113aad ayaa qeexaya sida xeer-ilaaliyaha Guud, Hanti Dhawrka Guud, Bank dhexe iyo kuwo la mid ah iyaguna inay ka Madax-bannaanaad xeerkan.

**Qodobka 30aad ilaa 31aad** ee shaqaale qorista oo Xildhibaano farabadani ka hadleen, waxaan soo jeedinayaa Goboladeena baahida way ku kala duwan yihiin xagga shaqaalaha, Horumarinta iyo Dhaqaalahaba intaba way ku kala sareeyaan. Isla markaana xeerku ma sheegayo sida caalamka ee loo shaqaalayso ee loo soo kiciyo Gobolka oo Gobolba Gobolka ka hooseeyo shaqaalaha loo badiyo xeerkeenan ma dhigayo sidaas.

**Waxaan soo jeedinayaa in aynu ka dhigno xeer isku dabraya shaqaalaha oo soo kormarinaya Gobolada shaqaalahooda iyo Dhaqaalahooduba yar yahay. Marka hayadda shaqaalahu qaadanayso 100 shaqaale ah, waxaan soo jeedinayaa in lagu darro qodob isku dabraya Shaqaalaha Gobolada.**

**Md. Nuur Cismaan Guuleed (5min 38sec)**:- Bismilaahi Alxamdulahi Rabil Caalamiin Wasalaatu Wasalaamu Calal Ashrafil Musliim, Sayidunaa Muhamed Wa Calaa Aali Wa Saxbihii Mursaliin. Guddoomiyaha, Guddoomiye ku xigeenada, Mudanayaasha, Shaqaalaha, Saxaafadaba iyo Marti-sharafta Asalaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

Doodani muddo badan ayey socotay oo wakhti badan ayey qaadatay, waxa ka hadlay Mudanaayaal badan waxaan ku taageersanahay wixii wanaagsanaa ee ay ka hadleen, anigu waxaan is dultaagayaa dhawr Qodob oo marka horeba laga hadlay.

Xeerku **Qodobkiisa 1aad** oo Magac bixinta ah waxa uu leeyahay “Xeerka Shaqaalaha Dawlada Somaliland”.

**Qodobka 3aad** waxa isna ka hadlayaa U jeedooyinka Xeerka. U jeedada xeerka waxa uu ku bilaabay waxa ka mid ah, halkaas waxa ka cad inoo xeerkani u jeedooyin badan leeyahay, waxa ka mid ah oo uu ugu horeysiiyey “In la helo xeerka asaasaya Qaab-dhismeedka, isla markaana faah-faahinaya waajibaad Hay’adda Shaqaalaha Dawlada. Halkaas waxa ka cad u jeedooyinkiisan iyo Magaciisu in aanay is waafaqsanayn, sidaa awgeed waxaan Xildhinaan Guruuje ku waafaqsanahay in xeerkan la celiyo oo ciddii shaqada ku lahayd soo kala saarto oo aynaan inagu isku hawlin kala saarkiisa. Sababtuna waxay tahay hawl badan ayaa inoo taala oo ciddi shaqada ku lahayd ha soo kala saarto oo ha soo hagaajiso.

**Qodobka 4aad farqadiida 7aad** waxay sheegaysaa **“Xeerka laguma dhaqi karo”** kolkaas wuu soo tiriyey Hay’addaha Madaxa-bannaan ayuu soo sheegay;

Xubnaha Garsoorka, Xeer-ilaalinta. Waxaan ku darayaa "Waaxda Garsoorka iyo Dawlada Hoose" oo anigu kuwa la hoos keenayo Hay'adda shaqaalaha kuma dareen Dawlada hoose.

**Qodobka 26[aad]** wuxuu ka hadlayaa Agaasimaha Wasaaradaha. Xildhibaano badan ayaa ka hadlay anigu waan kaga duwanahay. Agaasimaha Wasaaradaha Madaxweynaha ayaa magacaaba Xeer baana u jideeyey inuu Magacaabo, isla markaana haddana waxa uu ka mid yahay shaqaalaha joogtada ah ee Dawlada. Agaasimuhu waa ijiinkii dhaqaajinayey Wasaarada hadbana sida uu u shaqeeyo ayey u socotaa Wasaaradu, sidaa darteed haddi Madaxweynaha xeer siiyey, anigu waxaan odhan lahaa Agaasimaha ha loo daayo Shaqaalaha joogtada ah inuu noqdo oo Madaxweynuhu xaqbuu u leeyahee ha magacwdo,laakiin waxaan ka dhigi lahaa anigu in hal sanno haddii wax lagu eryaa aanay jirin inuu laba sanno oo kale la hayo oo uu wasaaradaas joogo, waxa uu tarayana uu taro Mushaharkiisii iyo Gunnadiisiina uu qayb qaato, sidaas ayaa odhan lahaa oo kii shaqo tagayaa uu iska tago.

**Soo jeedintaydu waxay ku saabsan tahay xeerkan inna horyaala ee labada qaybood ah in ciddii lahayd loo celiyo, ciddii lahayd ay qaadato oo iyadu ka soo shaqaysato wakhti aynaan iskaga lumen iyada oo hawsha inoo taalaa ay badan tahay.**

**Md Yaxye Cabdilahi Amin** **(11min 1sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiyaha, Guddoomiye ku xigeenada, Mudanayaasha Golaha Wakiilada, Xoghaynta, Shaqaalaha iyo Saxaafadaba, waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka Asalaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

Muddo dheer ayeynu soo wadnay doodan, markaa waa la yidhi wixii aan odhan lahayn. Waxaanse ku raacayaa Qodobo ay Xildhibaandu aad isku dultaageen ama ay ka hadleen iyo dhawr Qodob oo kale oo aan ku darrayo.

Waxaan ku raacsanahay Xildhibaandii soo jeediyey in la kala saaro Xeerka Shaqaalaha Dawlada iyo Xeerka Hay'adda Shaqaalaha.

Xeerka shaqaaluhu aad ayuu u kooban yahay waxyaabo badan ayaa ka dhiman faah-faahin badana way u baahan yihiin Qodobada qaarkood, markaa waxaan soo jeedin lahaa sidii ay Xildhibaanadii horena ay sheegeen in dib loogu celiyo hay'addii ka soo shaqaysay wax ka beddelna ku soo samayso soona celiso.

Waxa kale oo aan ku raacsanahay in Agaasimaha Guud Madaxweynuhu soo magacaabo, isaga oo eegaya takhasuskiisa mushaharkana maadaama oo mansab

siyaasadeed uu yahay oo Madaxweynuhu soo Magacaabayo Wasiirka wixii laga yeelo ayuu isna la xeer noqonayaa. Haddii takhasuskiisa ay Wasaaradu u baahan tahay inuu ku noqdo shaqadiisii uu marka horeba uu hayey.

**Qodobka 6aad Waajibaadka Shaqaalaha Farqadiisa 1aad** " In aanu diidin inuu ka shaqeeyo goob kasta oo loogu dirro shaqo, sidoo kalena aanu diidin inuu si ku meel-gaadh ah u guto waajibaadka shaqo oo darajadoodu ka duwan tahay darajadiisa, kuwaas oo ay dhici karto duruufo daruuri ah awgeed in isaga ama iyaga loogu xil saaro" waxaan odhan lahaa in Qodobkan la qeexo oo shaqooyinka nin kasta waa la garanayaa takhasuskiisa looga baahan yahay ama looga baahan doono, si aanu uga faa'iidaysan Madaxaasi oo kolay shaqaaluhu u sinaan maayaane qaarna culays ku saarin oo aan meel aan loo baahnayn u dirin. In la qeexo oo la ilaaliyo xuquuqda qofka shaqaalaha ah oo la waafajiyo Qodobkaas 6aad farqqadiisa 1aad. B) Inuu ku shaqeeyo Goob ku haboon oo abni ah, meel aan caafimaadkiisa wax u dhimayn oo dhibaato ku ahayn in la waafajiyo.

Waxa kale oo aan ku darri lahaa **Qodobka 7aad** in Shaqaaluhu uu helo daryeel Caafimaad oo haddii dakhtarada dawlada uu ka waayo in kuwa gaarka ah laga daweeyo. Haddii uu u baahdana dibedda loo dirro, iyada oo loo eegayo darajadiisa iyo boosiishanka uu hayo in percentage shaqaale walba oo u baahda in dibed loo qaado laga bixiyo.

**Qodobka 7aad farqada 1aad** saacadaha shaqada. Saacadaha shaqadu waa 48 saacadood ugu badnaan maalin kasta 8 saacadood. Sida Xildhibaankii iga horeeyey sheegay lama xusin wakhtiga la bilaabayo duruufaha jira, waxaan haboon xiliga shaqaalaha Dawladu soo galayaan iyo xiliga shaqaalaha gaarka ahi galayaan in la kala saaro oo shaqaalaha Dawlada 9 subaxnimo laga dhigo si sabsanku u yaraado iyada oo aynu ognahay in jaam jiro oo umaddu subixii isku soo baxdo. Wax badan ayaa is bedelay oo waxa lagu soo jeedaa social media ama qaad cunistii ayaa lagu soo jeedaa soo kicistuna way adag tahay, waxaanad Guddoomiye ka garan kartaa Golaheenan.

Waxaan soo jeedinayaa in shaqaalaha Dawladu shaqada soo galaa 9 subaxnimo ilaa 4 galabinimo, halka shaqaalaha rayidka ahina soo galaa 7 subaninimo. Dhawrkii usbuucii dhawayd 12 ayaa la shaqaynayey oo xitaa waanu tagi karri weynay bankii, markaa shaqada ha la soo galo 9 subuxnimo si hawlaha loo qabsado.

**Qodobka 4aad** Shaqaalaha Shirkdaha ka shaqeeya ama kaayeysiga xuquuq ka duwan shaqaalaha caadiga ah ee maalintii shaqeeyey ayey leeyihiin. Waxa la cadeeyey shaqaalaha kaayeysiga ama shiftiga shaqeeyaa dhanka caafimaadka Macaanku wuu ku badan yahay, wadne xanuunku wuu ku badan yahay, markaa gunooyin gaar ah ayaa la siiyaa. Waxa kale oo uu leeyahay haddii usbuuc shaqeeyo shifti waxa la siiyaa laba casho oo fasax ah. Taasina way ka maqan tahay in lagu darro ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 9aad Khasaare Bixinta:** Qodobkani waa technical waa industrial oo xeerka xuquuqdiisii kuma dhamma wuxuu baalan yahay xeerar badbaado (safety regulations) habraacyada badbaada (safety procedures) oo ah qalabka badbaadada, Hantida iyo nafta ka shaqaynaysaba. Xeerkaasi wuxuu u baahnaanayaa qodobo leeg kan aynu hayno, markaa intaasna meesha la soo galiyo oo aynaan dulmin shaqaalaha oo aan la odhan khasaare bixi adigu, laakiin loo sameeyo habraaca bad-baadada (safety procedures) oo u baahan in aad loo darso, haddii loo baahdana laga soo qaato caalamkaa horumaray.

**Qodobka 11aad farqadiisa 1aad** "qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha dawlada waxa loo xil-saari karaa duruufo jira awgood in si ku meel-gaadh ah u sii guto hawlo shaqo oo aan ahayn waajibaadkiisa shaqo ee rasmiga ah". Waxaan odhan lahaa taas in la faah-faahiyo oo la qeexo Wasaarada kasta iyo Hay'ad kasta way garanaysaa takhasuska ay uga baahan tahay shaqaalaheeda, si aanu uga faa'iideysanin ninkaas madaxda ahi oo aanu shaqaalaha ku dulmiyin.

**Qodobka 4aad** "Qof kasta oo ka mid ah Shaqalaha Dawlada waxa loo diri karaa hawl Qaran oo ka baxsan shaqadiisa, marka ay yimaadaan duruufo looga maarmi waayey. Si uu u guto waajibaadkiisa Waddaniyadeed. Taas waxaan u fahmi haddii loo baahdo waa inuu dagaal geli karaa, taasna waa inuu tababarkeeda qabaa oo tababar la siiyaa shaqaalaha si uu waajibkaa u guto.

**Qodobka 32aad farqadiisa 1aad** "Shaqaalaha waxa lagu magacaabi karaa darajada bilawga ah ee qaybta khusaysa, iyada oo lagu tartan imtixaan furan iyo haysashada shahaadooyin waxbarasho sax a". Halkaas waxa ku darri lahaa iyo waayo aragnimadiisa haddii uu soo shaqeeyey hal sanno ama laba sanno.

**Qodobka 32aad farqadiisa 9aad** "Marka lagu dhawaaqo ciddii ku soo baxday imtixaankii tartanka shaqo qorista ee loo qaatay jagadiisa, waa inuu shaqada ku bilaabaa muddo ugu badnaan toddab casho gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta lagu dhaqaaqo natiijada". Taas shaqada waa loo siman yahay

maadaama yahay nin Somalilander ah ama qurbo ha joogo ama Waddanka Gudahiisa ha joogee. Haddii dadka Gobolada fog fog joogaa ama qurbuhu ka soo qayb-galaan waa in wakhti la siiyaa. Sida caalamiga ah qofka marka la waraysanayo ayaa a wadiiyaa shaqada inta uu ku bilaabo karo/karto oo heshiisku dhacayaa bil ama laba bilood, laakiin haddii usbuuc la yidhaa waa laga faa'iidaysan karaa tobbadii hadduu uu ku iman waayo ciddii la doonayo ayaa la gelin karaa. Halkaas waa in wax laga bedelaa.

Intaas ayaan ku soo koobayaa, Asalaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

**Md Xasan Axmed Cilmi (3min 26sec):** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Waad nahadsan tahay Guddoomiyaha, Shir-guddoonka, Mudanayaasha Golaha Wakiilada, Shaqaalaha iyo Saxaafadaba aad iyo aad ayaan idiin salaamayaa Asalaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

Runtii doodani muddo dheer ayey soo socotay Qodobadeedana aad ayaa looga hadlay. Kolay anigu qodobo badan oo aan ka hadli lahaa Xildhibaanada ayaa aad u faah-faahiyey. Markaa in aan aad ugu noq-noqdaa muhiimad weyn ma sii laha, laakiin waan second-gareeyey.

Haddii aan wax yar jar ka taataabto. Sideedaba waan taageersanahay in la kala saaro xeerka Hay'adda Shaqaalaha Dawlada iyo Xeerka Shaqaalaha Dawlada. Markaa siday xildhibaanadu hadalkooda ugu badiyeen waxaan la leeyahay haba la kala saaro gebi-goodaba.

Sida uu sheegayo **Qodobka 9aad** ee xeerka shaqaaluhu. Waxa uu sheegayaa in qofka shaqaalaha ahi uu masuul ka yahay wixii khasaare ah uu si badheedh ah u gaysto una mag-dhabayo sida xeerka ku qoran. Haddaba maadaama uu qofkii shaqaalaha ahaa khasaaraha uu gaysto uu u gaysto si badheedh ah kaba soo qaad, bacdamaaba laga mag-dhabayo waxa jirta iyaduna **Qodobka 20aad Dastuurka farqadiisa 6aad**, waxay sheegaysaa habka taakulaynta Caymiska iyo bad-baadinta shaqaalaha. Taas oo ay xuquuq u siinayso in qofkii shaqaalaha uu caymis yeesho haddii uu khasaare ka gaadho shaqada uu hayo.

Maadaama qofkii shaqaalaha ahaa Dastuuriyan loo siiyey caymis, haddaba kuma cadda xeerkan in qofka shaqaalaha ahi uu caymis leeyahay, markaa waxaan leeyahay halkaas ka ku caddaato.

**Waxaan soo jeedinayaa in la is waafajiyo Qodobka 9aad ee xeerka farqadiisa 1aad iyo Qodobka 20aad ee Dastuurka faqradiisa 6aad.**

**Waxa kale oo aan soo jeedin lahaa xuruuf farabadan ayaa si khaldan u qoran, markaa tafo-tir ayuu u baahan yahay maadaama oo uu noqon doono xeer dhaqan galaya. Waa dib loo eegaa inta aanu dhaqan-gelin ayaan soo jeedinayaa.** Asalaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

**Md Saalax Maxamed Diiriye (9min 47sec):-** Bismilaah, Alxamdulilah, a-sanaa'u lilaah, Asalaatu Wa salaamu calaa rasuuli lilaah Salalaahu Calayhi wasalam, Asalaamu Calaykum Warax-matulaahi Wa Barakaatu. Amaa Bacad.

Ugu horeyn waxaan mudanayaasha aan la qabaa in xeerkani uu ka kooban yahay laba xeer, magaciisuna uu yahay mid qudha, waxaanse kaga duwanahay Xildhibaanada waynu ka doodnay ka shaqaalaha iyo ka hay'adaba sabab aynu ku celinaa iima muuqato, waxaanse soo jeedin lahaa in magaca laga dhaxaysiiyo labada xeerba, oo tusaale ahaan la yidhaa **"Xeerka Shaqaalaha Dawlada iyo Hay'adda shaqaalaha".**

**Qodobka 10aad** ee saacadaha shaqada ka hadlaya, waa muhiim in Qaranka loo shaqeeyo. Waa muhiim qofka Qaranka u shaqeeyaa waxa uu ku mushahar qaadanayo. Ka diin ahaan masuulka shaqada dawladu inuu hubiyo in shaqadaas la qabtay. Markaa waxaynu is dhex-dhexaadinaynaa daryeelka shaqaalaha iyo shaqo gudashada.

Shaqaalaha ma siino mushahar ku filan inay shaqeeyaana waa laga doonayaa. Waxaan soo jeedin lahaa inay shaqadu noqoto 7 saacadood, 7 subaxnimo soo galo oo qofkii salaada subax tukadaa isaga oo soo quraacday oo soo labistay ayuu shaqada bilaabi karaa. Dabeedna uu shaqada bilaabo 7 subaxnimo ilaa 1 duhurnimo si qofkii gelinka dembe shaqo kale oo noloashiisa uu ku kabo ama waxbarasho uu u raadsado.

Insha Allaah marka aynu khayraadkeena la soo baxno ee mushahar wanaagsan aynu helno xeerka waa la beddeli karaa, laakiin waxaan soo jeedin lahaa si kumeel gaadh ah si dadka noloshooduna furaaqo u helaan ay noloshooda ku kabaan oo shaqadana ku gutaan oo 7 saacadood laga dhigo.

**Qodobka 16aad** shuruudaha Magacaabista farqadiisa 1aad xarafka (H) wuxuu sheegayaa in qofka shaqada la qorayaa maskax ahaan iyo jidh ahaanba uu fayaw yahay. Maskax ahaan waa sax, laakiin qof ill la' ama gacan la' ayaa wali shaqada ka adag inay sii qeexnaato oo qofka wheelchairs lagu riixayo aan la odhan maskax ahaan ayuu udhaawacan yahay ayaan soo jeedin lahaa.

**Qodobka 24aad Xilalka iyo Darajooyinka farqada 2aad xarafka (G)** wuxuu odhanayaa darajooyinka D siday u kala baxayaan, marka darajada 4aad oo u qoran hadda D15 ilaa D10 waxay sax ku tahay D15 ilaa D11.

**Qodobka 26aad** Agaasimaha Guud ka hadlaya, sida xildhibaanadii hore ka hadleen laguma sheego wareegtada Maxdaxweynuhu xilka kaga qaadayo, sababta looga qaadayo iyada khilaaf jiyo oo xil gudasho la'aani jirto ayaan haddana lagu sheegin, markaa lama caddayn karo maxaa qofkaa xilka looga qaaday wixii wax qoran oo xeer gelaya ayey noqonaysaa.

Waxaynu ka soo hadalnay dhaqaale xumada inna haysata ee aan hadda lahaa saacadaha ha loo dhimo, sidaa darteed waxa kale oo iyana jirta isagoo agaasimaha guud yahay laf-dhabarta hay'adda uu ka tirsan yahay ama Wasaarada uu ka shaqeeyo ah, haddana shaqadiisa mid la mid ah oo xubno kaleba qabtaan ayaa jira, xeerkana aanu xaq gaar ah siinin. Sida Guddoomiyahaasha Hay'addaha, sida Wasiirada. Markaa waxaad moodaa qofka xil Agaasime loo magacaabay oo si uun loo eryey muddo yar oo kooban in xeerkani siinayo inuu benshan waligii ahaado mushahar qaata, taasna caddaalad maaha in la siiyo dhaqaale ahaana ma awoodno, markaa waxaan in aanay ahayn in mushaharkaa loo qoobdeeyo.

**Qodobka 31aad** shurudaha shaqo qorista shaqaalaha dawlada xarafka (D) waxay sheegaysaa inuu qofkaasi ugu yaraan uu haysto shaqaado dugsi hoose. Dadweynaha Somaliland in ka badan 60% ayaan waxna qorin waxna aan akhriyin, isla markaana noqon Kara shaqaale dawladeed oo wax khibrad ah looga baahnayn, sida waashmaanada, Shaah kariyayaasha, dareewalada iyo nadiifiyayaasha. Waxaan odhan lahaa ha laga saaro shardigaa meesha.

**Qodobka 40aad** ee ka hadlaya horumarinta mushaharka, waxaan ku raacsanahay Xildhibaan Sheekh Axmed Dayib in horumarinta mushaharka laga dhigo saddex bilood. Waxyaabihii uu ku sababeeyey ayaan la qabaa.

**Qodobka 41aad** xaqal ciida shaqaalaha. Si looga hortago khiyaamo dhacda, si sanadkii shaqaaluhu ugu xisaabtamaan si loogu saleeyo misaaniyadda oo wasaaradu u qoondeeyaan, maadaama oo aynu ka soo hadalnay in mushaharka la siiyaa aanu ku filnayn shaqaalaha markooda horeba oo sanadkii laba jeer oo qudha ay tahay, waxaan soo jeedin lahaa in qof kasta in mushaharkiisa leeg ciidda loo siiyo.

**Qodobka 48aad** shaqo dhimista **farqada 1aad Xarafka (E)** si loo sugo caddaalad eexdana looga hortago tuhunkana lagu saaro, haddii aqoonta iyo waayo

aragnimada ka sinaadaan shaqaaluhu shaqaalaha la dhimayo, waxaan soo jeedin lahaa qori tuur lagu kala saaro oo sharciga Islaamku ogol yahay.

**Qodobka 64aad fasaxyada:** Waxa xeerkan ku jira maalmo badan sanadka gaalada oo ay u nisbeeyaan dhalashadii Nebi Viise Calayhi Salaam oo aan sugnayn, waxa ku jira Israa wal miciraash oo sharciga Islaamku aanu qabin, waxa ku jira Mawlatul Nebiga Salahalu Calayhi Wasalam iyo maalmo kale. Waxaan soo jeedinayaa inuu Fasaxu noqdo oo kaliya Labad ciidood.

Mudane Guddoomiye dooda xeerka intaas ayaan ka odhanaya, laakiin waxaan ka hadlayaa arrin in badan Xildhibaanadu kuu cel celiyeen oo xagga shareecada aan ka eegayo, shacabku inoogu yeedho, meelo badana Dastuurkeena kaga xusan. Ereyga "Sharci Dejin" Ilaahay ayaa sharciga dejiya isaga ayaa leh. Nebiyullaahi Muxaamed Calayhi salaam oo ah mubaliqii Risaalada inna soo gaadhsiiyey, mayinkii Risaalada caddeeyey. Wax badani ku banaanaayeen dhaqankiisa wax badani ku banaanaanayeen Sisaaladiisa. Mufasirkii Qur'aanka ahaa ayaa mar mar lagu tilmaamaa shaaric, laakiin ma bannaana qof kale oo sharci dejiye ah in lagugu magacaabo. Ma diidani oo waaban u dooran nahay oo shaqadeena ayaa ah in aynu xeerar curino, ansixino. Waxaynu diinteena ka qaadanay iyo waxaynu salaynay ilaahay ayaa og, laakiin waxaan diinahay erey bixinta Sharci dejin, xeer-dejina kama foga. Waxaan soo jeedinayaa in la inoogu yeedho Golaha Wakiilada, shacabkana sidaas lagu ogaysiiyo, meelaha Dastuurka ee ay ku qoran tahayna laga bedelo, aniga waxaan codsanayaa oo waliba soo jeedinaya in fiqiya masaladan loo eego oo haddii aan ku saxsanahayna la igu taageero, haddii aanan ku saxsanayna la iiga nasteexeeyo. Asalaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

**Md. Jaamac Axmed Oogle (9min 26sec):- Bismilaahi**, Aadbaan u salaamayaa Shir-gudoonka iyo Xubnaha Baarlamaanka dhamaantood iyo shaqaalaha suxufiyiinta dhamaantood waan salaamayaa.

Waxan ku bilaabayaa, inkastoo oo aan ahay dadkii ugu dambeeyay oo hadalku in badan soconayay qodob kastoo halkan ku jirana laga soo hadlay, soomaaliduna waxay tidhaahdaa hadalka anaa u hadhay maaha ee waxa layidhaah daa maxaa hadhay, waxa kastoo oo aan odhan lahaa ragbaa sii yidhi, laakiin waxan ku bilaabayaa cutubka 2aad maamulka shaqaalaha dawlada siyaaasada guud ee shaqaalaha wuxuu leeyahay Farqadiisa 1aad qofkasta oo jamhuuriyada Somaliland u dhashay waxa uu xaq u leeyahay inuu noqdo shaqaale dawladeed si waafaqsan xeerkan, waxaana reeban takoorkastoo ku salaysan sinji, midab, qabiil fikir,

cadaalad caafimaad, qodobkaa markaan is dultaago waxa in badan jirta in qodobo kuwan ka mid ah aynu aragno iyagoo ka socda xeerka shaqaalaha dawlada.

Waxaan anigu odhan lahaa, wasaarad walba xeerkastoo la qorayo marka hore waa inaynu dabagal u samaynaa, waa inaanu noqon xeer intii la qoro laga dhaqaaqo ama aynu ansixino, hada wasaaradeheenoo kale ama dhulka shaqooyinkoo kale ninkastoo masuulaoo fadhiya waxa inta badan wasaaradiisa ku urursan reerkiisa ama qabiil kiisa, taasi waxay ka hor imanaysaa qodobkaa qabiil inaan wax lagu qoranin.

Waxa kale oo jira inaan qodobkan kan ku-xigaa uu sheegayo qofku inaanu siyaasad gali karin qofka shaalahahi, misna halkan waxa ku qoran inaan loo qaban karin fikir kiisa , markaa taana waa in lakala cadeeyaa siyaasaduna waa fikir, qofka fikir kiisa siyaasadaa ka mida halakan fikirkiibaa ku qoran siyaasadana magelin karaa qoran labadaana in lays waafajiyo, waayo inbadan waxaynu aragnaa qof maskiina oo Facebook shaqadii looga eryaya inuu mid like u saaray ama qof wax soo qoray comment ka bixiyay iyadoo loo cukanayo siyaasad baad gashay misna waxaynu arkaynaa gudoomiyihiisii shaqaalaha ama masuuliyiintii dawlada ee ka waaweynad inay iyagu siyaasadii ku dhex jiraan, markaa taa waxan odhan lahaa, halkaa wax halaga bedelo , xeerkan yuu noqon mid qabta oo keliya qofka maskiinkaa ee shaqaalaha ah .

Laakiin hanoqdo mid ay usiman yihiin kamiis kiinkaa iyo ka gudoomiyaha u ah, tusaale ahaan markaynu ololaha aynu wadnay dadka qaarna way kujireen qaarna shaqadii waxa lagaga eryay inay calan qaateen am xisbi ay taageereen baa shaqadii lagaga eryay, isagoo kiisii gudoomiyihiisa ahaa ama kii kawaynaa am wasiirkiisa ahaa ay ololaynayaan, taa waxan odhan lahaa ka baaar lamaan ahaan wixii shaqaalaha loogu cadaalad samayn lahaa waa inaynu wax ka ogaanaa.

**Cutubka 3aad qodobka 12aad** wuxu sheegayaa inay ha ada shaqaaluhu noqoto caasimada , taa qudheeda waxan leeyahay soo jeedin ahaan , aniga waxay ila tahay waxkastoo ay dawladi leedahay ina caasimada lagu kobo halkaa dulmi baa kujiraya oo cadaaladii gobolada baa kabaxaysa anigu waxan odhan lahaa maadaama ay hay adan ay tahay hay adii shaqaalaha ayna tahay hay ad dhex dhexaada anigu waxan odhan lahaa hay ada xarunteeda hala geeyo gobolada kale sanadba mid hala dhigo oo yaan lagu soo koobin caasimada keliya , taasi waxay keenaysaa inay hay ada shaqaaluhu inaya xogogaal unoqoto duruufaha

kugadaaman gobolada kale ee fog fog ee aan hay ada shaqaaluhu joogin taana intaasaan kusoojeedin lahaa ,takale .

**Qodobka 19aad** ee kahadlaya awooda gudoomiyaha hay ada shaqaalaha runtii qofwalboo masuula ama wasiir hanoqdo am waxkale hanoqdee marka uu wax sooqorayo waxa uu wax usooqoraa sidii uu meesha weligii joogayo si uudadka ugu xukumo in aniga waxay ilatahay in awooda loosiiyay ay tahay madax weyne yar ,taana soojeedinteeda waxan odhan lahaa qodobkaa halagu noqdo gudoomiyaha oo hala muujiyo doorkii gudida kale kulajirta ama gudoomiye kuxigeen ama gudidu waa inay {rooll}kulahaataa shaqaalaha laqorayo la eryayo waa inay ahaataa wax gudi kasoobaxay waa inaanay noqon wax qofkeliya kasoobaxay ama markay qof isqabtaan uu siduudoono ueryikaro ama siduudoono kayeelikaro .

**Qodobka 15aad firqada 2aad** wuxu sheegayaa inuu madax weynuhu ansixiyayo gudoomiyaha isguna uu eryikaro anigu soojeedin ahaan waxan odhan lahaa gudoo miyaha kominshinka iyo qaar kaloo aykamid yihiin sida gudoomiyaha max kamada sare ,inlaga bedelo sistamkaa ah inuu madax weynuhu soodoorto aya dadka dhex uyihiin waayo waxay noqonayaan shaqaale uu madax weynuhu keensaday hadii uu xilka ku salluugo oo uu siduurabay uqaban waayaan waa uu eryayaa hadiikalena waadaynayaa taa wuxu ku khasbanyahay gudoomiyaha maxkamada sare iyo hay ada shaqaaluhu inuu uhugaan sanaado madax weynaha iyo siyaasadiisa ama sax ahaato am khalad ahaato ,taasna waxan soojeedin lahaa in wax laga bedelo hadii ay suura galtahay ,

Aad baad umahad santahay sidaa aad iigu saxday hadii madax weynuhu marka hore uu soojeediyo uu baarlamaanku uu ansixiyo waa in uu baarlamaanku ogaadaa sababta lagu eryay ninkan inay tahay sabab saxa oo cadaa lada ama aya tahay kahor imaad uu ka horyimi xukuumada talada haysa markaa waa soojeedin.

Arinta xog hayaha saaxiibaday baan kala mid ahay waxana aamin sanahay in loodaayo in wasaarada arimaha guduhu aysoojeediso , waxa kaloo oo aan halkan ku qornayn oo aan doonayaa inaynu ogaano agaasimayaashu waxay inta badan shaqada kajoojiyaan shaqaalaha kuwa gobolada jooga iyo kuwa halkan joogaaba waxay qoraan shaqo kajoojin halkana waan kawaayoo inooguma qorna markaa qofkan agaasimaha ah iyo kan shaqaala ah way isku dhicikaraan ,awoodan uu agaasimuhu kaga joojinayo qofka shaqaala ah uu shaqada kaga joojinayo hadii ay

kujirto in laygu saxo hadii aanay kujirina hadii aany kujirina in lagu soodaro sababta uu uga joojinayo .

**Qodobka 52aad firqadiisa 1aad** waxa ku qoran in wasaarad kastaa oo dawladeed waxay leedahay gudi anshax marineed oo kamasuul noqon doonta dhegaysiga anshax marineed ee wasaarada ,halakan waxa ku qoran gudida anshax marinta waxa maga caabaya gudoomiyaha hay ada , waxan soojeedin lahaa in lacadeeyo am uu wasiirku soomaga caabo am ay haydau soomaga caabto macadam hada ka awooda leh ee soomagacaabay ,takale anigu waxan odhanlahaa anshax marinta inay anshax mariso qofka shaqaalah ah gudida shaqaalha oo aan gudoomiyaha keliya ahyne oo isku dhan inay anshax mariso baan taana soojeedinlahaa .

**Qodobka 65aad** firqadiisa 1aad oo kahad laya fasaxa shaqaalaha waxa uu sheegayaa shaqaaluhu inuu 30 cisho xaq uleeyahay aniga soojeedin ahaan waxan odhan lahaa qofku duruufo badan buu yeelan karaa anigu waxan odhan lahaa haloo kordhiyo oo halaga dhigo 60 maalmood hadii aany suura gelay waakii caafimaad ahaa, kii kale ee xanuunsanayay waalag reebay gabadhii umulaysay waalaga reebay haloo kordhiyo

Qodobkan siguud markaan uga hadlo waxa uu iskugu jira siada ay ragii horeba sheegeen gurejiyo nuur iyo ,waxan odhan lahaa marka hore shaqaalaha dawladu waa soojeedin hadii xeerkan aynu ansixinayno daba gelayn oo aan la ogaanayn sida cadaalada uu kusocday oo wasiir walba am agaasime walba oo meel jooga ,uu reerkiisa kabuuxinayo oo uuqoranayo anigu waxan odhan laha saami qaybsi beelaha ah ba halaga dhigo intii kan laga guuraba waasoojeedin takale , waayo waxajira reero dhan oo aan shaqaalaba lahayn reera dhan oo aan wasiirba lahayn reera aan agaasime lahayn baajira markaa waalays kudulmanyahay hadii aan cadaalad lahelay oo ay sidan kusiisocotana aynu markhaati kanahy ,markaa waxan odhan lahaa si aanay reerna uqadin saami qaybsi halaga dhigo reerwaliba intiisa qalyay hakuqaato oo hasii qayb sado taasi waa soojeedin takale qodobkii agaasimaha mushaharka waxan odhan lahaa agaasimaha keliya maaha laakiin rag badan oo qaranka shaqo usoo qabtay oo marka shaqada laga eryo suuqa busaaradi kudishay baa jirta markaa waxan odhan lahaa taa siwacan halooga hadlo markaa hader marka gudoomiyaha maxkamada sare shaqada laga eryo suuquu fadhiisanayaa oo sirtii dawladoo dhan buu hayaa ,hadeer hadii inagan lay nagu

dhaho dareera inaguna shaqaale baynu noqonaynaa oosuuqaynu fadhiisanaynaa markaa waxan odhan lahaa taa sifiican halooga fikiri  asalaamucalykum.

**Md. Faysal Yuusuf Jaamac.** **(9min 26sec):- Bismilaahi** raxmaani raxiim mahad sanid mudane gudoomiye shirgudoonka mudanayasha saxafada iyo shaqaalaha golaha waan salaamyaa dhamaantiin ASC.

Mudane kolay hadalkii intii badnayd waa layidhi xeerkana inbadan baynu kadoodaynay kolay waa inaan ku waafaqaa mudanayaashii hore oo kahadlay xeerkan xeerka oo iskugu jira laba xeer, xeerka hay ada shaqaalaha iyo xeerka shaqaalaha dawlada markaa waxan odhan lahaa hala sookala saaro siday mudanayaashii hore sheegeen.

**Qodobka 30aad farqadiisa 3aad** mabaadiida guud ee shaqaalaysiinta hay ada shaqaaluhu waxay tix gelin gaar ah siinaysaa dadka naafadaa iyo dadka kale laga tirade badan yahay am kooxa ha lafaquuqo hadii golaha xukuumadu sidaa go aamiyo ,qodobkaasi wuxuu ka hor imanyaa qodobka 5aad farqada 1aad oo ah qofkasta oo jamhuuriyada Somaliland udhashay waxa uu xaq uleeyahy inuu noqdo shaqaale dawladeed waxan reeban takoorka oo kusalaysan jinsi midab qabiil fikir ama xaalad caafimaad markaa labadaa qodob way iska hor imanayaan ma na ah inagoo ah golahii wasiirada ineryo noocaasa naloosooqoro oonala horkeeno wax laga xishooda weeyaan .

**Qodobka 8aad** waxyaabaha kareeban qofka shaqaalaha ah dawlada qofka shaqaalah ah waa inaanu yeelan wax balwad ah ,waynu ognahy bahal qaad ah baa laynu ku aafeeyay qofka shaqaala ah haduu qayilo shaqadiisii waxbaa udhimay ,soojeed iyo qaadiro waxbuu yeelanayaa markaa farqadaana in lagu soodaraan jeclaan lahaa inaanu yeelan wax balwad ah si ay shaqadu nadiif unoqoto ,waxajira waxyaabo yarayr oo iska khaldan haday noqoto xaga xuruufta in iyadana lasaxo intaasaan kusoo koobi lahaa asalaamu calaykum .

**Md. Cabdikariim Adan Cali (8sec 21min)** Bismillahi Raxmani Raxiim, Wabihi Nastsciinu Calaa ummuri dunyaa wa-diin, Mudani Gudoomiye, Mudane Gudomiye Ku-xigeen, Mudanayasha Golaha, Xoghayeyaasha, Shaqaalaha Golaha iyo Saxaafada maanta halkan inala joogtaa ASC.

Mudane Guddomiye, Waxa maalmahanba inoo socday dooddii Xeerka Shaqaalaha Dawladda Xeer lamber 97/2021 oo aynu joogno gabagbadii ugu danbaysay.

Mudane Guddoomiye, waxaan doonayaa in aan si guud uga hadlo xeerkan aniga oo ka bilaabaya distuurka kana duulaya Qodobka ugu muhiisan ee distuurka ku jira kana hadlaya arrimaha shaqada iyo shaqaalaha oo ah **Qodobka 20aad, Qodobkan farqadiisa 1aad -4aad** waxay shaqaalaha uga hadlayaan si guud, mana u kala tilmaamayaan shaqaale dawladeed iyo mid rayid ah.

Halka **farqadaha 5aad iyo 6aad** ay ka hadlayaan, xuquuqaha shaqaalaha dawladda iyo xubnaha ciidanka qalabka sida xuquuqahooda la xadhiidha gunnooyinka hawlgabka, bukaanka iyo caymis.

Mudane Guddoomiye iyo mudane yaal waxaan soo jeedinayaa in:

1. Xeer lambar 79/2021 loo kala saaro laba Xeer.
   a. Xeerka lagu dhisaayo Hay'dda Shaaqaalaha taas oo shaqaalaha oo dhan la hoosgeeyo haddii uuyahay mid dawaldeed iyo mid rayid ahba.

   b. Xeerka Shaqaalaha dawladda (Xeer Lr.97/2021).

2 In lsoo celiyo oo dib loo furo Xeerkii Shaaalaha Rayidka ah; Xeer Lr 31/2020.
3 In Labada xeer lasku daro oo layskaga dhigo hal xeer oo ah Xeerka Shaqada iyo Shaqaalaha.
4 In loo saaro xubno khubaro ah oo ka kooban xubnogolaha laga soo xulo iyo Farsama yaqaano sharci oo k u habaoon si labada xeer si falsan laysugu habeeyo l ana waafajiyo shuruucda qaranka; shareecada, dustuurka iyo xeerarka shaqaalaha ee caalamiga ah.
5 In xeerkan cusub noqdo xeerka keliya ee dhex dhexaadinaaya Xaquuqda iyo waajibaadyada kala duwan ee ka dhasha suuqa Shaqada, kuwaas ay kala yeelanayaan Shaqaalaha iyo Looshaqeeyahu (Employee and Employer) iyada oo aan loo kala eegiin nooca Shaqaalaha iyo nooca loo shaqeeyaha midna.
6 In Hayadaha Dawladda ee ay ka mid yihiin hay'daha hoos ku qoran loo aqaansado hay'ado dawladeed oo aan madax banaanayn.

   a. Hanti Dhawrka guud
   b. Baanka Dhexe

c. Haydda shaqada iyo Shqaalaha
d. Xisaabiyaha Guud
e. Xisaabaadka guud
f. Agaasinka guud ee wasaaradaha iyo haw'daha dawladda.

Hay'adahani lama odhan karo way madax banana yihiin mar hadii. Sida ku cad qodobka 90aad ee distuurka, faradihiisa b, t, j,x,kh ay yihiin hay'dao dawladeed oo aanmadax banaanayn Madaama uu madaxdooda sarsare Madax waynuhu magaacab eryana isga oo aan u baahnayn in uu cidkale kala tashado.

7 In xeerka shqaalaha lagu daro qodobo dabraaya in madaxda hay'dahaasi ka qayb galaan siyaada, olole, xisbi iyo taageero kale midna.
8 In an si siyaasadaysan looga qaado shaqada madaxda ugu sarraysa hay'dahaas aynu soo sheegnay. Gaar ahaan wakhtiga doorashooyinka lagelaayo iyo marka laga soo baxo muddo kusiman hal sano.
9 In ansixinta madaxda hay'dahaas iyo shqa ka qaadistoodaba Golaha Wakiilada laga ansiiyo.
10 In haddii shaqada looga saaro siyaasad ahaan amaba lagu qasbo in ay olole siyaasadeed ka qayb galaan ay dacwad u soo qoran karaan golaha shacabka.
11 In wasaaradda Shaqa gelinata, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska. Lagu soo koobo Arrimaha Bulshada iyo Qoyska, si ay xoogga u saarto u adeegista bulshada balladhan ee ay la shaqaynayso oo ah: Bulshada, qoyska iyo carrurta.
12 In la abuuro Maxkamadda Shaqada (Employent Tribunal). Taasi oo ay usoo dacwoon karaan shaqaalaha iyo loo shaqeeyuhuba, kadib marka ay ku heshiin waayaan habka cabashooyinka iyo inshax marinta ee goobta shaqo.
13 In haddii Maxkamada shaqadu xallin waydo gaar ahaan dacwadaha la xidhiidha ciqaabaha, jisiga, gacan qaadka, xuuquuqaha maqan, takorka ku salaysan cunsuriyadda, wax yeelo wayn oo loo gaysto goobta shaqada iyo arrin kasto oo ka dhalanayo denbi 3 sano iyo wax ka badan ah.
14 Machadka shaqadu uu horumarin iyo taba barro u sameeyo shaqalaha iyo loo shaqeeyaha labadaba kuna taba baro xirfdaha shaqo, xuquuqaha iyo waajibaadka labadaba.

Gaar ahaan in maxadku taba baro dhamaan loo shaqeeyey yaasha heer kastaba kuna taba baro arrima ha waajibka shaqo ku ah oo ay ka mid ka yihiin:

a. Ilaalainta iyo daryeelka caruurta iyo dadka nugul (Safeguarding Children and Vulnerable people)

b. Xuquuqaha iyo waajibaadyada ka dhalanaya sinaanta iyo kala duwanaanshaha dadka (Equalities and Diversities).
c. Faya qabka iy nabdoonaanta goobaha shaqo (health and safety at work).
d. Siyaasadda iyo habraaca cabashooyinka iyo anshaxmarinta (complaints and disciplinary policies and procedures).
e. Maamulka iyo habraaca lacaga (Financial management policies and procedures).
   Waa in mushahaarada lagu bixiyo bangiga oo keliya, laguna bixinin gacanta amaba in qof kale loogu dhiibo.
f. Siyaasda iyo Habraaca shaqa qorista hufan (Safe recruitment policies and procedures).
g. Samata bxinta dabka (fire Safety policy and procedures).

8. Meelo Badan oo ay ku qorantahay dadka laga tirade badan yahay, waxaan ku bedeli lahaa: laga sad bursaday.

9. Shaqaalaha in loo sameeyo higsi shaqo iyo waxa qabad ku salaysan waxsoosaar iyo maxsuul shaqo (production and outcomes, impact) si loo xaqiijyo horumar joogta ah oo bulsho iyo dhaqaale.

Ugu dembayn waxaan soo jeedinayaa in xeerka shaqalahan lagu darro qodobadan hoos ku xusan:

in la dhiirri geliyo shaqaalaha in ay samaystaan Ururro shaqaale oo madax banaan sida;

- Ururka shaqaalaha dawlada.
- Ururka shaqaalaha rayid ka ah.
- Iyo urur hoosaadyo kale oo iskood isu abaabulia Kara danahoodana metela

**Md. Cabdikariim Maxamed Muxumed** **(14min. 01sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka, Mudanayasha, Saxaafada iyo shaqaalahaba waan salaamayaa. Xeerkan *waxaan la qabaa mudanayaashii iga horeeyay in Xeerkan laba loo kala saaro, lagana dhigo Xeerka Aas-aaska Hay'adda Shaqaalaha iyo Xeerka shaqaalaha dawladda.*

Cutubka 3[aad] ee ka hadlaya Hay'adda shaqaalaha *waxaan soo jeedinayaa in laga saaro si xeer Gaar ah loo soo curiyo, hay'adda shaqaaluhuna ay soo curiso, isla markaana uu Golaha marlabaad u soo maro. Inta kale ee xeerka kana hadlaysa Shaqaalaha Dawladyuna uu u noqoto Xeer gaar ah.*

Run ahaantii Shaqaalaha Dawladdu waa udub dhexaadka hay'addaha Dawladda, waxaanay masuul ka yihiin khayraadka bulshada iyo bixinta Adeega bulshada, sidaa daraadeed muhiimad gaar ah ayay inoo leeyihiin in la helo xeer ku haboob, oo si cadaalad ah loogu maamulo dhamaan shaqaalaha dawlada loo helo.

Waxaa kale oo aan jeclaha in aan doodaydan kaga hadlo ama kaga dhiibto **Qodobka 4aad ee ka hadlaya Xadka Adeegsiga Xeerka farqadiisa 3aad oo ka hadlaysa** Xoghayaha fulinta ee degmooyinka leh golayaasha degaanka iyo Xoghayaha fulinta ee Gobolada dalku waxay ka mid yihiin shaqaalaha dawladda waxaana laga soo dhex xulayaa shaqaalaha ka diiwaan gashan Hay'adda shaqaalaha dawladda iyada oo loo raacayo magacaabistooda Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka Xeer Lr. 23/2019.

W*axaad mooda in qodobkasi uu burinayo* **Qodobka 8aad** *ee Dastuurka Jsl ee sinaanta Muwaadiniinta oo odhanana "Muwaadiniinta Somaliland iyadoon lagu kala saarayn midabka, qabiilka, dhalashada, luqada, lab iyo dhedig, hantida, mudnaanta, afkaarta iwm, waxay sharciga hortiisa ku leeyihiin xuquuq iyo waajibaad siman."* Sidaa daraadeed in ay muwaadiniintu ay u sinaadaan magacaabista kaalmaha shaqo ayna ka iman karaan muwaadiniinta kale iyo shaqaalaha Dawladdu labaduba, masuulka magacaabistaa u xilsaarana ee wasiirka Arrimaha Guduhuna uu ku tixgaliyo qof aqoontaa iyo xirfadaa leh uu magacaabi karro Xoghaya, waana in aan lagu koobin shaqaalaha Dawladda iyada oo loobaahan yahay in fursada la siiyo muwaadiniinta kale si ay fursad ugu heleen in ay qaranka u adeegaan.

**Qodobka 4aad farqadiisa 4aad** Haddi ay dhacdo iska hor imaad u dhaxeeya qodobada xeerkan iyo qodob kasta oo kale oo ku jira xeer kale oo dhaqan gal ah, ama wareegto madaxweyne, ama xeer-nidaamiye, ama qawaaniin kale oo la xidhiidha maamulka shaqaalaha dawladda ama arrin kasta oo ku xusan xeerkan, Qodobada Xeerkan ayaa la raacayaa, *waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa laga saaro maadaama oo uu burinayo Xeerar kale oo dhaqan gal ah ama shuruuc hore uu Baarlamaanku u ansixiyay.*

**Qodobka 4aad farqadiisa 7aad ee** ka hadlaysa *"Xeerkan lagu dabaqi maayo: - Madaxda Hay'addaha kala duwan ee Dawladda ee Madaxweynuhu Magacaabo marka laga reebo Agaasimeyaasha Guud"* waxaan odhan lahaa maadaama oo booskani uu yahay boos siyaasiya *waxaan soo-jeedinayaa in halkaa Agaasimaha guud laga saaro loona tix-galiyo boosaska siyaasiga ah, sida wasiirka, wasiir-ku-xigeenka iyo gudoomiyahaasha Hay'addaha madax-banaan, waana in la yidhaa waxaa lagu dabaqayaa shaqaalaha ka hooseeya.*

**Qodobka 4aad farqadiisa 7aad** kaasbista iyo wax-ka-beddelka ee ka yimi Golaha Guurtida ee ay soo jeediyeen kuna dareen xarafka **"F"** ee aan xeerkan laftiisa loo adeegsan sida baanka dhexe, Wakaaladdaha Biyaha iyo Dawladdaha Hoose ee dakhligooda soo-saara,

markaa run ahaantii waxaynu u baahanahay in hay'addahan laftooda looga faa'iideeyo oo xeerkan lagu dabaqo, *kaliya waxaan soo-jeedinayaa in ay laba meelood kaliya xeerka ka maxbanaanaadaan, Shaqaalaha Hanti-dhawrka, iyo Shaqaalaha komishanka doorashooyinka Qaranka Jsl. Waxayna kaga faa'iidaysan karaan sida Fasaxyada iyo dhamaan xuquuqaha kale ee xeerkan shaqaalaha hoos-imanaya in ay iyaga oo madaxbanaanidooda leh ay helaan dhamaan xuquuqaha uu xeerkani dhigayo.*

**Qodobka 24aad** ee ka hadlaya qaybaha darajooyinka iyo xilalka jagooyinka **Farqadiisa 3aad** Qaybaha jagooyinka iyo heerarka derejooyinka shaqaalaha dawlada, iyo sidoo kale mushaharka darajooyinkaasi iyo habka dallacaadda qaybaha iyo korodhka musharka ee heerarka derejooyinka gudban waxa xeer-nidaamiye ku soo saaray Guddida Hay'ada. *Waxaan soo-jeedinayaa in qodobkan la faah-faahiyo oo iyada lafteed qodobada ubucda u ah xeerka in halkan lagu xusaa waa mihiim, halka xeer-nidaamiyahay aynu u isticmaali doono qodobo ka sii faa-faahsan oo aanay noqon gab-sharci.*

**Qodobka 26aad** ee ka hadlaya Agaasimaha Guud, **farqadiisa 7aad** Hadii Shaqada laga wareejiyo agaasimayaasha guud oo aan Shaqada looga eryin xil gudasho la'aan ama danbi uu galay waxa uu ku wareegayaa Hay'adda shaqaalaha dawladda waxaanay qaadanayaan mushaharkoodii aasaasiga ahaa oo buuxa iyo kala badh guno xileedkoodii. *Markaa inaga oo ka duulayna xaalada dhaqaale ee wadan keena waxaan aamin sanahay in aynaan u diyaarsanayn wakhtigan, iyada oo aan aamin sanahay in aqoontiisa lagu qaato hadana waxaan soo-jeedinaya in faqadaa laga saaro.*

**Qodobka 35aad kana hadlaya Magacaabista gaarka ah;** unaga dhiga sidan; **farqada 1aad** Guddida Hay'adda Shaqaalaha Dawladu, waxay samayn karaan magacaabis iyo shaqo qoris gaar ah iyaga oo la tashanaysa Madaxweynaha, **iyo farqada 2aad** Marka la samaynayo magaabista iyo shaqo qorista gaarka ah ee ku xusan faqrada 1aad ee Qodobkan, Hay'adda Shaqaaluhu waa in ay xaqiijisaa jiritaanka baahidaa iyo duruufaha gaarka ee magacaabista iyo shaqo qorista keentay. Inaga oo ka duulayna daah-furnaanata iyo in shaqaalaha iyo muwaadiniintaba loo cadaalad sameeyo *waxaan soo jeedinayaa in qodobkaa sidiisa looga saaro si aanay u noqon in hay'addu laha timaado ku-tagrifal awoodeed.*

**Qodobka 41aad** ee Xaqal Ciidka; uanag dhigan sidan, Xiliyadda dabaal-degga munaasabaddaha bisha Ramadaan iyo Arafa, xubin kasta oo kamid ah shaqaalaha dawladda waxaa la siinayaa xaqal ciid, qaddarkisa ay go'aamiso Hay'adda shaqaalaha dawladda iyada oo talowadaag la samaynaysa Madaxwaynaha. *Waxaan soo-jeedinayaa in xeerkan lagu cadeeyo xadiga lagaceeg ee la siinayo qofka shaqaalaha ah, lana yidhaa bil mushaharkeed ayaa la siinayaa.* Waana in aan la odhan hay'adda shaqaalaha ayaa go'aaminaysa ee waa in qofka shaqaalaha ahi uu garanayaa xadiga ku soo hagaagaya inaga oo eegayna duruufa dhaqaale ee wadanka.

**Qodobka 62aad ee da'da Hawl-gabka.** Da'da hawlgabka ee shaqaalaha dawladdu waa 60 jir dumarka iyo 65 jir Ragga. *Waxaan soo-jeedinayaa in la simo raga iyo dumarka oo laga dhigo 65jir,*

**Qodobka 64aad** ee fasaxyada; farqadiisa 2aad; Maalmaha fasaxyada Qaranka ee ku xusan farqada 1aad ee Qodobkani waa 12-maalmood sannadkii. *Waxaan soo jeedinayaa in sidiisa loo daayo oo aanay fasaxyadu ka badan 12-kaa maalmood.*

Qodobada kale ee aan si guud isku dul taagayo waxaa ka mid ah, Maadaama oo aynu nahay Golihii Wakiilada waa in aynu samaynaa faaf-reeb oo tusaale ahaan halka Tusmada Xeerka waxaa lagu ilaaway Contant halkii laga saari ahaa laguna badali lahaa Tumada Xeerka.

Sidoo kale waxaan soo-jeedinayaa in xeerka qodobadiisa lagu qoro boll, sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in jaantus loo sameeyo xeerka, qodobada kale ee aan xildhibaanadii iga horeeyay aan la qabo waxaa ka mid ah;

1. *In qofka dib u yeedhida fasaxa laga tasho qofka laftiisa oo aan ku raacsanaha xildhibaan Jamaal.*
2. *Sidoo kale waxaan la qabaa xildhibaan xirsi in saacadaha shaqada la yidhaa 7:00am ilaa 2:00pm*
3. *Xafiiska shaqo qaran waa in la hoos keenaa shaqaalaha dawladda, arinkaa waxaan la qabaa khadar cali*

*Cumar Jaamac waxaan la qabaa in shaqooyinka banaanaada loo tartamo lana xayaysiiyo oo laga baahiyo xafiiska shaqaalaha dawlada iyada oo la marinayo warbaahinta kala duwan ee qaranka.*

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**